

# Jamhuuriyada Somaliland Xeerka, Habraacaa iyo Hab-dhaqanadda Doorashada Madaxweynaha ee 2017

## *Republic of Somaliland 2017 Presidential Election Law, Procedures and Codes of Conduct (in Somali)*

*Somalilandlaw.com Compilation (October 2017)*
*www.somalilandlaw.com*

(*Picture: NEC ballot box for pre-election testing exercise - http://www.slnec.com/* )

**TUSMADA URRURINTAN**
***(Contents of this Compilation)***


| | Bogga |
|---|---|
| Xeerka Doorashadan: Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001 -2016)<br>*Election Law: Presidential and Local Council Elections {Law No. 20/2001-2016)* | 2 |
| Habraaca Xalinta Cabashooyinka Iyo Muranada Doorashada Madaxtooyada Ee 20I7 (NEC 15/10/2017)<br>*Electoral Compalaints and Disputes Resolution Procedure (NEC 15/10/2017)* | 35 |
| Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda Ee Doorashada Madaxtooyada (Code of Conduct) (26/09/2017)<br>*Presidential Election Code of Conduct for the Political Parties (26/09/2017)* | 49 |
| Xeerka Anshaxa Saxaafada Ee Doorashada Madaxtooyada Ee 2017 (16/10/2017)<br>*Media Code of Conduct for Presidential Election 2017 (16/10/2017)* | 68 |

# XEERKA DOORASHADA (Election Law)
# Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001)

## Nuqulka rasmiga ee iskudhafka Xeerka & Wax ka bedelkiisii (2017)

*(Sidii uu ugua soo baxya Cadadka Gaar ka ee Faafinta Rasmiga 01/04/207*)

**TUSMADA XEERKA**

**Xeerka M/weyne ee Hirgelinta Xeerkan**

**QAYBTA 1AAD**
**QODOBADA GUUD**
Qodobka 1aad: Magaca Xeerka
Qodobka 2aad: Macnaha Erey-bixinta
Qodobka 3aad: Baaxadda Xeerkan iyo Mabaadiii'da Guud
Qodobka 4aad: Mudada Xilka
Qodobka 5aad: Tirada Golayaasha Deegaanada
Qodobka 6aad: Shuruudaha Cod-bixiyaha
Qodobka 7aad: Xuquuqda Cod-bixiyaha
Qodobka 8aad: Shaqaalaha Dawladda&Hay'adaha Dawliga ah
Qodobka 9aad: Waqtiga Qabashada Doorashooyinka
Qodobka 10aad: Goobaha Cod-bixinta

**QAYBTA 2AAD**
**KOMISHINKA DOORASHOOYINKA JSL**
Qodobka 11aad: Qaab-dhismeedka komishinka doorashooyinka
Qodobka 12aad Xubnaha komishinka Doorashooyinka
Qodobka13aad: Shuruudaha Xubinta Komoshinka
Qodobka 14aad: Xil ka qaadista Komishinka
Qodobka 15aad: Awoodaha Komishinka
Qodobka16aad: Miisaaniyadda Komishanka Doorashada
Qodobka 17aad: Xafiiska Goobta Cod-bixinta
Qodobka 18aad: Xafiiska Degmada ee Doorashada
Qodobka 19aad Xafiiska Gobolka ee Doorashada
Qodobka 20aad: Hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashada
Qodobka 21aad: Gunada Hawl-wadeenada
Qodobka 22aad: Dhawrsanaanta Komishinka-Murashaxiinta-Hawl-wadeenada

**QAYBTA 3AAD**
**QAABKA DOORASHADA**
Qodobka 23aad: Habka Doorashooyinka Deegaanada
Qodobka 24aad: Habka Doorashada Madaxwaynaha iyo ku xigeenka Madaxwaynaha

**QAYBTA 4AAD**
**MURASHAXIINTA**

Qodobka 25aad: Shuruudaha Murashaxa Golaha Deegaanka
Qodobka 26aad: Urrurada U gudbi waayay Xisbi
Qodobka 28aad: Qabka soo bandhigidda Murashaxiinta
Qodobka 29aad: Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta
Qodobka 30aad: Deebaaji
Qodobka 31aad: Qabashada Liisaska Murashaxiinta
Qodobka 32aad: Bandhigidda liisaska Murashaxiinta

**QAYBTA 5AAD**
**OLOLAHA DOORASHOOYINKA**
Qodobka 33aad: Bilawga iyo Dhamaadka ololaha Doorashada
Qodobka34aad: Qabashada Shirarka& Bannaan-baxyada
Qodobka 35aad: Muuqaalka Boodhadhka
Qodobka 36aad: Hub iyo Labis ciidanimo
Qodobka 37aad: Wakiilada Axsaabta/Ururada

**QAYBTA 6AAD**
**HAWLAHA DIYAARINTA DOORASHADA**
Qodobka 38aad: Qalabka Goobta Doorashooyinka
Qodobka 39aad: Waraaqaha Cod- bixinta
Qodobka 40aad: Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Codbixineed
Qodobka 41aad: Ogaysiinta Liiska Murashaxiinta
Qodobka42aad: Qaybinta Qalabka Doorashada

**QAYBTA 7AAD**
**BILAWGA HAWLAHA GOOBTA CODBIXINTA**
Qodobka 43aad: Xafiiska Goobta Cod-bixinta
Qodobka44aad: Awoodda Guddomiyaha GoobtaCod-bixinta
Qodobka 45aad: Gelida Goobta Cod-bixinta
Qodobka 46aad: Tallaabooyinka ka horreya Cod-bixinta
Qodobka 47aad: Cod-bixiyeyaasha aan Codka Dhiiban Karin

**QAYBTA 8AAD**
**HAWLGALKA CODBIXINTA**
Qodobka 48aad: Nidaamka cod-bixinta
Qodobka 49aad: Mudada Cod-bixinta
Qodobka 50aad: Go'aanka cabashooyinka ee Goobta Cod-bixinta

**QAYBTA 9AAD**
**TIRINTA CODADKA**
Qodobka 51aad: Hawsha ka Horraysa Tirinta Codadka
Qodobka 52aad: Hawsha Tirinta Codadka
Qodobka 53aad: xidhitaanka Hawsha Tirinta
Qodobka 54aad: Codadka Xumaada ama Lagu muransanyahay
Qodobka 55asad: Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta
Qodobka 56aad: Qaadista iyo Wareejinta Qalabka

**QAYBTA 10AAD**
**HAWLAHA XAFIISYADA SARE EE DOORASHADA**

Qodobka 57aad: Shaqada Xafiiska Doorashada Ee Degmada
Qodobka 58aad: Tirinta Codadka Doorashada Deegaanka & Ku dhawaaqidda Natiijada
Qodobka 59aad: Gudbinta Raad-raaca (Records)
Qodobka 60aad: Soosaaridda Go'aanada Doorashooyinka Deegaanada
Qodobka 61aad: Isugaynta Tirsiga Cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada
Qodobka 62aad: Shaqada Xafiiska Doorashada Ee Gobolka
Qodobka 63aad: Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada
Qodobka64aad: Ku dhawaaqida Natiijada Doorashooyinka Madaxtooyada

**QAYBTA 11AAD**
HUBAAL-CELINTA IYO DACWADAHA
Qodobka 65aad: Hubaal-celinta Natiijada Doorashada Deegaanada
Qodobka 66aad: Dacwadaha Doorashada

**QAYBTA 12AAD**
**KU XADGUDUBYADA**
Qodobka 67aad: Ciqaabta Xadgudubka

**QAYBTA 13AAD**
**QODOBO QUBANA AH**
Qodobka 68aad: Xeer-nidaamiye
Qodobka 69aad: Laalid
Qodobka 70aad: Dhaqangal

---

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-4518/012017 DATE 28/01/17

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0756/012017**

**Dhaqan-galka Wax-Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 (lifaaqa 6aad)**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/G/KF-32/712/2017 ee ku taariikhaysan 11/01/2017 ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-

beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 (Lifaaqa 6aad);

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 (Lifaaqa 6aad).

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

---

## WAX-KA-BEDELKA XEERKA DOORASHOOYINKA MADAXTOOYADA IYO G/DEEGAANKA XEER Lr.20/2001

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**Markuu Arkay:-** Qodobadda 9aad, 22aad, 23aad, 25aad, 39aad, 82aad, 83aad, 111aad ee Dastuurka Qaranka JSL

**Markuu Dersay: -** Nuqulkii xeerkii soo baxay 2001(Xeer LR.20/2001) ee suurto galiyay ka digo-rogashada hab-beeleedka iyo xaqiijinta himiladda ummadu ka dhursugaysay muddada dheer ee u tartanka xorta ah ee xilalka Qaranka, iyo Wax ka beddelkiisii ee la ansixiyay July 2009, May 2010, diisambar 2011, July 2012, ogost 2012.

**Markuu Tixgelayay:-** Waayo-aragnimadii laga dhaxley doorashooyinkii Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanada ee sanadihii 2002, 2003, 2010, 2012.

**Markuu Xaqiiqsadey**:- Baahida loo qabo in la isku dhafo nuqulkii hore ee xeerkan iyo wax ka bedelkiisa inta aan la abuurin, laguna daro wax ka bedelka Komishanka Doorashooyinka Qaranka u aragto daruuri hawlaha doorashooyinka iyo habka farsammo eek u salaysan waayo-aragnimadda iyo farsamooyinka cusub ee diiwaangelinta oo lala jaanqaado.

**Markuu Arkay:-** Soo jeedinta Guddi-hoosaadkiisa Arrimaha Gudaha oo eegtay isla markaana Golaha ugu soo war bixisay in la ansixiyo lifaaqa wax ka bedelka xeerkan.

**WUXUU ANSIXIYEY**

**Wax-Ka-Bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada Iyo G/Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001).**

## QAYBTA 1AAD
## QODABADA GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Degaanadda (Xeer Lr 20/2001).

### Qodobka 2aad
### Macnaha Erey-bixinta

| | |
|---|---|
| **Doorasho: -** | Waxa loola jeedaa habka codbixiyayaashu ku soo doortaan wakiiladooda heer deegaan, heer gobol iyo heer qaran, iyada oo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyada codadka la kala helay. |
| **Komishanka:-** | waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee loo xilsaaray maamulidda iyo ka garsooridda arrimaha doorashooyinka. |
| **Goob-codbixin-** | waxa loola jeedaa goobta tirooyin dadweyne oo cayimani (ka diiwaangashani) ka dhiibanayaan codkooda maalinta doorashada. |
| **Xarun-codbixineed:-** | waxa loola jeedaa barta kulmisa hal ama in ka badan oo goobo-codbixineed ah, oo la hawlgeliyo maalinta cobixinta. |
| **Wakiil:-** | waxa loola jeedaa xubinta urur/xisbi usoo wakiishay la socodka hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed ama xafiisyada doorashada. |
| **Murashax:-** | waxa loola jeedaa qof kasta oo u tartamaya xil doorasho lagu helo karo, kaas oo buuxiyay shuruudaha u dejisan si waafaqsan Xeerkan, isla markaana uu ururkiisu/xisbigiisu u soo xulay in uu ku tartamo doorasho mucayin ah |
| **Cod-bixiye:-** | waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta si waafaqsan Xeerkan kaas oo xaqiisa codbixineed gudanaya maalinta doorashada. |
| **Golaha Degaanka:-** | waxa loola jeedaa Golaha cod-bixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo sharci-dejinta D/Hoose ee degmada. |
| **Gobol-doorasho: -** | waxa loola jeedaa soohdimaha kulmiya degmooyin doorasho. |
| **Degmo-doorasho: -** | waxa loola jeedaa degmooyinka ay u qaybsamaan Gobolada Dalka JSL, kuwaas oo leh gole deegaan oo lasoo doorto. |
| **Kursi:-** | waxa loola jeedaa jago ama xil gole oo lagu tartamayo xili doorasho. |
| **Astaan/Astaamaha:-** | waxa loola jeedaa summad ama calaamad ama lambar u gaar ah hal xisbi/urur ama murashax oo lagu aqoonsanayo. |
| **Liis/Liisaska:-** | waxa loola jeedaa magacyada murashaxiinta uu soo gudbiyey xisbi/urur, ee u tartamaya doorasho mucayin ah. |
| **Ololaha Doorashada:-** | waxa loola jeedaa hawlgalka dhaca muddada sharcigu jideeyay ee ka horaysa maalinta doorashada, ee ay ururada/axsaabtu iyo murashaxiintoodu kusoobandhigaaan barnaamijkooda |

siyaasadeed iyo mabaadiidooda. Hawlgalkaasi waxa ku jiri kara kulano, isu-soo baxyo (rallies), waraysiyo, doodo, IWM, iyadda oo ay ujeedadu tahay in ay hantaan/kasbadaan codbixiyayaasha.

**Xarrunta Dhexe:-** waxa loola jeedaa xafiiska ugu sarays ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Komishanka Doorashooyinka Qaranku.

**Xafiiska Degmada:-** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo goobaha cod-bixinta ee degmo gaar ah.

**Xafiiska Gobolka:-** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee Gobol gaar ah

**Xafiiska Goobta:-** waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed oo gaar ah.

**Goob-joogayaal:-** Waxa loola jeedaa kormeerayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha doorashooyinka ee Komishanku ogolaaday.

## Qodobka 3aad
## Baaxadda Xeerkan iyo Mabaadiida Guud

1. Xeerkani:
   a) waxaa lagu maamulayaa doorashooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha JSL iyo kuwa Golayaasha Degaanada;
   b) wuxu dajiyey aasaasida, awoodaha iyo waajibadaka iyo hawlaha Komishanka Doorashooyinka ee Qarankaee madax banaan iyo xafiisyada doorashooyinka ee ay dhisto;
   c) Wuxuu cayimaya falalka ku xadgudka habsimi-socodka iyo nidaamka doorashooyinka iyo ciqaabtooda.

2. Mabaadiida guud ee Xeerkani ku dhisan yahay waa:
   a) Xoriyada muwaadiniintu u leeyihiin in ay adeegsadaanxuquuqdooda siyaasiga ah si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka JSL.
   b) Hirgelinta doorashooyin xor iyo xalaal ah, oo ka madhan cabsi gelin, laaluush iyo musuqmaasuq, loona maamulay si madaxbanaan, dhexdhexaad ah, sugan, hufan, oo la xisaabtan leh.

## Qodobka 4aad
## Mudada Xilka

Mudada xilka ee Murashaxiinta la doorto waxay ahaanaysaa: -
1. Madaxweynaha & Ku xigeenkiisa 5 sano.
2. Golayaasha Degaanada 5 sano.

## Qodobka 5aad
## Tirada Golayaasha Degaanada

Tirada Golayaasha Degaanada ee la soo dooranayaa waxay ahaanaysaa: -
a) Golaha Degaanka Caasimada 25 Mudane.
b) G/Degaanka degmooyinka darajada A 21 Mudane.

c) " " " B 17 Mudane.
d) " " " C 13 Mudane.
e) " " " D 09 Mudane.

**Qodobka 6aad**
**Shuruudaha Cod-bixiyaha**

1. Waa inuu yahay Muwaadin Somaliland u dhashay.

2. Waa in aan da'diisu ka yaraan 16 sano, maalintadoorasha la qabanayo.

3. Waa inuu xor yahay oo aanu xabsi ku jirin.

4. Waa in uu yahay cod-bixiye ka diiwaangashan goobta uu ka codaynayo, haddii aanu kamid ahayn hawl-wadeennadda xafiiska goobta codbixinta, wakiilada xisbiyadda ee goobta ama ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka goobta codbixinta.

5. Musharixiinta u tartamaya jagooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeenada doorashada goobtu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan. Waxase khasab ah in ay hal mar oo keliya ay codkooda dhiibtaan.

**Qodobka 7aad**
**Xuquuqda Cod-bixiyaha**

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay wuxuu xaq u leeyahay: -

1. Wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa goobta uu cod-bixiye ahaan uga diiwaangashan yahay.
2. Cod-bixiyaha ka maqan dalka JSL wuxuu ka coddaynayaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dibedda ee ugu dhow, haddii aanay jirin ama aanay suuragal ahayn waxa tallo ka gaadhaya Komishanka.
3. Codku waa inuu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
4. Cod-bixiye kastaa wuxuu yeelanayaa hal cod oo keliya doorashadiiba.
5. Xubnaha Komishanka doorashooyinku ma laha xaqa cod-bixinta inta ay xilka hayaan.
6. Hawlwadeenadda xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta codbixinta waxa ay ka codayn karaan goobta codbixineed ee ay ka hawlgelayaan maalinta cod-bixinta.

**Qodobka 8aad**
**Shaqaalaha Dawladda & Hay'adaha Dawliga ah**

1. Shaqaalaha Dawladda, kuwa Hay'adaha madaxa banaan ee Dawladda, iyo ciidamada Qaranka darajo kasta ha lahaadeene looma ogola inay isu sharaxaan doorashooyinka Degaanada iyo Madaxwaynaha ama Ku-xigeenka Madaxweynaha, haddii aanay shaqo-ka-tegis soo qoran 90 cisho ka hor taariikhda qabashada doorashada.

2. Shaqo-ka-tegidda waxa shardi u ah inay sidaa qoraal ku soo caddeyso xafiiska ama Hay'adda awooda u leh caddayntaas.

3. Cadaynta shaqo ka tagista looma diido karo murashaxa, dibna loogama dhigi karo sabab la'aan.

## Qodobka 9aad
## Wakhtiga Qabashada Doorashooyinka

1. Komishanka ayaa cayimaya taariikhaha la qabanayo doorashooyinka si waafaqsan Dastuurka, waxanay ku soo bixi doontaa Degreeto Madaxweyne.

2. Komishanka Doorashooyinku waa in ay cayimaan waqtiga doorashada 120 (boqol iyo labaatan cisho) ka hor waqtiga doorashadu dhacayso, Madaxweynuhu waa in uu 15 casho gudahood kusoo saaraa Degreetada cayimaadda muddada doorashada, kadib marka uu helo cayimaada Komishanka.

## Qodobka 10aad
## Goobaha Cod-bixinta

1. Marka la qabanayo doorashada Madaxweynaha & ku xigeenka waxa dalka loo qaybinayaa gobolo-doorasho (electoral regions) oo loo sii qaybinayo goobo-codbixin (polling stations) iyadoo la waafajinayo soohdimaha Gobolada dalka JSL.

2. Doorashada Golayaasha Degaanada marka la qabanayo soohdimaha maamulka degmada ayaa loo aqoonsanayaa Degmo-doorasho (electoral district), waxaana loo sii qaybinayaa goobo-codbixin, halkaas oo ay ka dhici doonto doorashada Degaanku.

3. Komishanku waa inuu sameeyo goobaha codbixinta ee degmooyinka/gobolada ugu yaraan 40 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta la qabanayo, waxanu Komishanku arrintaas kala tashanayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka.

4. Haddii degaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato duruufo culus ama xaalado aan saamaxayn in doorasho ka qabsoonto, waxa soo qiimeynaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyagoo kala tashanaya Xukuumadda iyo Xisbiyada/Ururrada Siyaasadda.

5. Goobaha Codbixinta ee ay doorashadu ka qabsoomi waydo, tirada kuraasida loo qoondeeyay goobahaas waxay Xisbiyadu/Ururradu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Degmada.

6. Haddiise ay doorashadu ka qabsoomi waydo Degmo dhan, waxa ay Axsaabtu/Ururradu kuraasida degmaddaas u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansxay ee Gobolka, waxaana loo raacayaa sida magacyadoodu ay liiska ugu kala horreeyaan.

7. Haddii ay ku kala bixi waayaan xisbiyada/ururradacodadka gobolka waxa loo eegayaa wadarta guud ee codadka qaranka.

8. Haddii doorashada Madaxweynaha iyo Madaweyna ku-xigeenku oo ku saleysan aqlabiyadda hal dheeriga wadarta codbixayaasha qaranka oo dhan, ay goobo ama degmo cayiman codbixintu ka dhici weydo duruufo culus ama xaaladaha ku xusan faqaradda 4aad ee Qodobkan awgeed, Koomishanka Doorashooyinka Qarankuna uu sidaas ku xaqiijiyo, dacdooyinkaasi saameyn kuma yeelandoonaan habsami socodka iyo natiijada doorashada.

## QAYBTA 2AAD
## KOMISHANKA DOORASHOOYINKA JSL

### Qodobka 11aad
### Qaab-dhismeedka KomishankaDoorashooyinka

Qaab-dhismeedka xafiisyada Komishanka Doorashooyinku wuxuu ahaanayaa sidan:

1. Xarunta Dhexe ee doorashooyinka.
2. Xafiiska Gobolka ee doorashada.
3. Xafiiska Degmada ee doorashada.
4. Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada.

### Qodobka 12aad
### Xubnaha Komishanka Doorashooyinka

1. Komishanku wuxuu ka koobnanayaa 7 xubnood, oo kala ah:
   a) Guddoomiye iyo 6 xubnood.
   b) Guddoomiyaha & Guddoomiye-xigeenka Komishanka ayaa iska dhexdooranaya.
   c) Mudada xilka ee Komishanku waa 5 sano, oo ka bilaabmaysa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, waana loo cusboonaysiin karaa xilka.
   d) Shaqaale dawladeed, xubin Barlamaan, Xubnaha Golaha Wasiirada, ciidanQaran iyo xubin xil u haysa urur/xisbi kama mid noqon karo Komishanka.

2. Komishanka doorashooyinka waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL ka dib marka uu helo soo jeedimaha :-
   a) 2 xubnood oo Golaha Guurtidu soo xulo.
   b) 2 xubnood oo ay soo xulayaan ururada/xisbiyada mucaaridka ah ee diiwaangashan.
   c) 3 xubnood ee kale Madaxweynaha ayaa soo xulaya.

3. Komishanka waxa cod kala badh iyo hal ah (absolute majority) ku ansixinaya Golaha Wakiilada, markuu guddi- hoosaadka Arrimaha Guduhu soo hubiyo in ay buuxinayaan shuruudaha Xeerku tilmaamayo.

4. Xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinku wuxuu xaruntiisa ku yeelanayaa caasimadda Hargeysa.

5. Komishanka xil-gudashadiisa wuxuu ku salaynayaa Dastuurka JSL, Xeerkan, iyo xeerarka kale ee khuseeya, shirarkoodu wuxuu ku qabsoomayaa Kooram, go'aanadoodu waxay ku ansaxayaan aqlabiyad.

6. Komishanku waxa uu yeelan doonaa Xeer-hoosaad u gaar ah, oo waafaqsan Xeerkan.

7. Komishanku wuxuu xilkiisa u gudanayaa si madax banaan, lagumana samayn karo wax fara gelin ah haba yaraatee.

## Qodobka 13aad
## Shuruudaha Xubinta Komishanka

1. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
2. Waa inaan da'diisu ka yarayn 40 jir kana waynayn 70 jir.
3. Waa inuu Muslin yahay, kuna dhaqma diinta Islaamka.
4. Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare ugu yaraan ama wixii u dhigma.
5. Waa inaanu ka mid ahayn urur/xisbi siyaasadeed, kana madax banaan yahay.
6. Waa in lagu yaqaan dhawrsanaan, sharaf iyo cadaalad bulshada dhexdeeda.
7. Waa inaan dembi ciqaab oo maxkamad horteed kaga cadaadey ku dhicin weligiiba.
8. Waa inuu jidh ahaan iyo maskax ahaanba gudan karaa xilka.

## Qodobka 14aad
## Xil ka Qaadista Komishanka

1. Xubnaha Komishanka waxa xilka lagaga qaadi karaa:
   a) Markuu jabiyo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.
   b) Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro ama caafimaad darro awgeed.
   c) Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq iwm.

2. Marka arrimaha kor ku xusan la dareemo, waxa Madaxweynuhu u magacaabayaa guddi-baadhiseed ka soo warbixisa si uu go'aan ugu qaato.

3. Xil ka qaadista Komishanka waxa awood u leh Madaxweynaha, waxase shardi ah in Golaha Wakiiladu ku ansixiyo xil ka qaadistaas cod hal-dheeri ah (simple majority).

4. Marka ay banaanaato xubin Komishanka ka mid ahi, xil ka qaadis, geeri, ama is casilaad awgeed, waxa buuxinta jagadaas loo raacayaa habka xubintii banaysay xilku ku timid.

## Qodobka 15aad
## Awoodaha Komishanka

Komishanku wuxuu awood u leeyahay:
1. Inuu cayimo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaya si uu Degreeto ugu soo saaro.
2. Inay cayimaan tirada iyo goobaha cod-bixinta degmooyinka & gobolada.
3. Inay magacaabaan, eryaan, anshax mariyaan shaqaalaha xafiiska dhexe, xafiisyada degmooyinka & Gobolada doorashooyinka.
4. Inay qorsheeyaan Miisaaniyadaha lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka.

5. Inay ku dhawaaqaan natiijooyinka doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka si ku meel gaadh ah, inta aan Maxkamadda Sareansixin.
6. Inay kormeeraan si kedis ah iyo si qorshaysanba goobaha doorashada iyo meel kasta oo hawshooda khusaysa.
7. Inay go'aan ka gaadhaan muranada iyo cabashooyinka doorashada ee ka soo gaadha xafiisyada hoos yimaada.
8. Inay sameeyaan daraasad ku saabsan sidii dalka loogu samayn lahaa goobodoorasho, oo codbixiyayaashu codkooda ka dhiibtaan maalinta doorashada.
9. Inuu diiwaan-geliyo cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doorashada.
10. In ay ogolaadaan, jiheeyaan, isku xidhaan, hay'adaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah iyo daneeyayaasha kale ee ka shaqeeya hawlaha doorashooyinka.
11. In ay maamulaan hawlaha wacyigelinta codbixiyayaasha ee doorashooyinka.
12. In ay soo saaraan Xeer-nidaamiye (regulations), Habraacyo, go'aanno, Xeerar Anshax (Codes of Conduct), oon ka hor imanayn Xeerkani iyo xeerarka kale ee doorashooyinka khuseeya.
13. In ay awood u leeyihiin in ay dejiyaan habab maamuleed oo ku saabsan ilaalinta, baadhista iyo dabagelkaku dhaqanka xeerarka anshaxa arrimaha doorashooyinka ee xisbiyadda/ururada iyomurashaxiintooda iyo talaabooyinka idaariga ah, oo ay ku jiraan ganaax idaari ah, oo laga qaadi karo ku xadgudbyada axkaamta xeeraka anshaxa.
14. Komishanku waxa uu leeyahay awoodaha kale ee ku xusan xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

## Qodobka 16aad
## Miisaaniyadda Komishanka Doorashada

1. Komishanku wuxuu yeelanayaa Miisaaniyad gaar ah, oo ay soo qorshaysteen, una gudbinayaan Madaxweynaha, taas oo marka laysla ogolaado loo gudbinayo Golaha Wakiilada oo ansixinaya.

2. Miisaaniyadda doorashada waxay Komishanku u isticmaalayaan si madax banaan, iyadoo ay waajib tahayinay xisaab-celin saddex biloodle ah u gudbiyaan Xisaabiyaha Guud.

## Qodobka 17aad
## Xafiiska Goobta Cod-bixinta

1. Xafiiska goobta cod-bixinta ee doorashu wuxuu ka koobmi doonaa guddoomiye, guddoomiye ku-xigeen, hubiye, iyo xoghaye.

2. Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, xoghayaha iyo hubiyaha waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.

3. Haddii loo baahdo oo arrin deg deg ahi timaado, Hubiye ama xoghayaha waxa bedeli kara guddoomiyaha goobta cod-bixinta, iyadoo cod-bixintu socoto, waxanu bedelkaas ka samayn karaa dadka goobta ku sugan ee leh xaqa cod-bixinta sida sharcigu xusayo.

4. Xafiiska goobta cod-bixintu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee goobta.

## Qodobka 18aad
## Xafiiska Degmada ee Doorashada

1. Xarunta degmo kasta waxa jiraya xafiis doorasho degmo. Waxaanu ka koobmayaa guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen, xoghaye, hubiye, iyo laba tiriye.

2. Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, Hubiyaha, Xoghayaha iyo tiriyeyaasha waxaa magacaabaya Komishanka, isagaana awood u leh isku-bedelkooda.

3. Xafiiska degmada ee doorashu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.

## Qodobka 19aad
## Xafiiska Gobolka ee Doorashada

1. Magaalo-madaxda gobol kasta waxaa jiraya xafiis doorasho gobol oo ka kooban guddoomiye, guddoomiye Ku-xigeen iyo xoghaye oo uu soo magacaabay Komishanku.

2. Xafiiska gobolka ee doorashadu wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee gobolka.

3. Haddii loo baahdo Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo tirada shaqaalaha ee ka hawl-galaysa goob-codbineeed, heer degmo, iyo/ama gobol.

## Qodobka 20aad
## Hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashada

1. Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda la qabanayo codbixinta.

2. Qofkii loo magacaabo xilalka xafiisyada doorashooyinka marmarsiiyo shaqada loogama dayn karo, haddii aanu jirin cudurdaar dhab ah oo Komishanku ku qanci karo.

3. Xubnaha loo magacaabay xafiisyada doorashada ee goobaha, degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda degmada (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:

> "WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA INAAN HAWSHA DOORASHADA U GUDAN DOONO SI XILKASNIMO, DAACADNIMO LEH. INAAN DHEX U AHAADO XISBIYADA/URURADA IYO MURASHAXIINTA, SHARCIGA IYO CADAALADNA AAN KU SHAQAYNAYO"

4. Xubnaha Komishanku waxay mid mid dhaarta kor ku xusan kaga hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

5. Xubnaha ciidamada qalabka sida ama kuwa leh qaab-ciidameed, Guddoomiyayaasha gobolada, degmooyinka, golayaasha degaanada, xubnaha golayaasha sharcidejinta, murashaxiinta u taagan doorasho looma magacaabi karo xafiisyada doorashooyinka.

6. Hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, kuwa xafiisyada doorashada degmooyinka/gobolada waxay mudada shaqadoodu ku dhamaanaysaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, hasayeeshee Komishanku wuu kordhin karaa mudada shaqada intii uu u baahdo.

7. Guddoomiyayaasha xafiisyada doorashada degmooyinka iyo gobolada ma noqon karaan shaqaale dawladeed, ciidan qaran, xubin xisbi/urur. Shuruudaha lagu soo xulanayaa waxay la mid yihiin kuwa Komishanka Heer Qaran lagu soo doortey, marka laga reebo da'da oo ah:

8. In aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 36 jir kana waynayn 70 jir.

## <u>Qodobka 21aad</u><br><u>Gunnada Hawl-wadeenada</u>

1. Gunnooyinka ay qaadanayaa hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka waxa qorshaynaya Komishanka, iyagoo ku salaynaya xilalka hawl-wadeenadu ku kala magacaaban yihiin.

2. Hawlwadeenka loo diro hawl meel ka baxsan halka uu ku noolaa wuxuu yeelanayaa gunno-saad (subsistence allowance) mudada uu maqan yahay, waxana qorshaynaya Komishanka.

## <u>Qodobka 22aad</u><br><u>Dhawrsanaanta Komishanka, Murashaxiinta, Hawl-wadeenada</u>

1. Dhammaan hawl-wadeenada ka hawlgelaya xafiisyada doorashooyinka, wakiilada Ururada/xisbiyada ee xeerkani tilmaamay waxay sharci ahaan (legal status) la mid yihiin saraakiil guud (public officer).

2. Murashaxiinta, hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka iyo wakiilada xisbiyada lama xidhi karo xilliga doorashada, haddii aan la qaban iyagoo dembi ciqaabtiisu gaadhayso 3 sano faraha kula jira.

3. Haddii uu dembi galo waxaa lagu soo oogi karaa marka ay doorashadu dhamaato ee laga wareejiyo hawsha uu u xil saarnaa.

4. Komishanku wuxuu leeyahay dhawrsanaan la mid ah ta Golaha Wasiirada mudada uu xilka hayo. Dhawrsanaan ka qaadistoodana waxa loo marayaa sida uu tilmaamayo qodobada 94(8) iyo 96(4) ee Dastuurka".

# QAYBTA 3AAD<br><u>QAABKA DOORASHADA</u>

## <u>Qodobka 23aad</u>

**Habka Doorashoyinka Deegaaanada**

1. Habka doorashooyinka degaanada wuxuu noqonayaa habka isu qiyaasidda saamiyada kuraasta iyo tirada codadka uu xisbi/urur ka helo gobol ama degmo (proportional representative system).

2. Doorashada Golayaasha degaanada xisbi/urur kastaaba wuxuu soo bandhigayaa liiska dadka uu u doonayo in degmada looga doorto.

3. Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo dorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinku Qaranka u gudbiyo liiska murashaxinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go'an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan habka liistada Furan (open list system). Waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta astaan u gaar ah.

4. Liisaska doorashada Golayaasha Deegaanka ee ah liiska furan, magacyada taxanaha ah ee liisku wax saameyn sharci ah kuma leh natiijada doorashada. Kuraasta Degmo-dorasho, waxaa Axsaabtu/Ururadu ku kala helayaan habka saami qaybsiga (Proportional Representation System) ee kuraasida iyo codadka Xisbi/Urur kasta ka helo Degmadaas, iyadoo uu Xisbigu/Ururkuna ay musharaxiintiisu ku kala guulaysanayaan sida ay u kala cod badan yihiin.

5. Musharixiinta ku guulaysan waaya doorashada Deegaanka waxa ay noqonayaan kayd, iyaga oo loo kala qaadanayo sida ay u kala cod badan yihiin, marka xubin ama xubno ka mid ah Golaha Deegaanku uu baneeyo xilka.

6. Tirada kuraasida uu helayo liis kasta oo ah murashaxiintaka qaybgalaya doorashada Golayaasha degaanka waxa loo xisaabayaa qaabka qiyaasta saamiga kuraasta iyo codadka (proportional representative list system).

7. Degaamada aanu tartan ka jirin ee la soo bandhigo doorasha deegaankaliis keliya, cod-bixin laga samayn maayo, waxana la qaadanayaa dadka loo soo magacaabay Degaanadaas, iyadoo ku jaan go'an tiradii degmada laga doonayay, waxana loo raacayaa sida loo soo kala horaysiiyey.

**Qodobka 24aad**
**Habka Doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha**

Habka lagu dooranayo Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha wuxuu ahaanayaa kan ku tilmaaman Qodobka 83aad ee Dastuurka JSL, Faqradihiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo 4aad, Waana habka aqlabiyadda hal dheeriga ah (majority system), sida Distuurku tilmaamay.

## QAYBTA 4AAD
## MURASHIXIINTA

**Qodobka 25aad**
**Shuruudaha Murashaxa Golaha Degaanka**

1. Waa inuu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Waa inuu si rasmi ah u degan yahay degmada uu iska sharaxayo.
3. Waa inuu muslin yahay kuna dhaqmaa diinta Islaamka.
4. Qofka isku taagaya doorashada Golayaasha Deegaanka waa inuu/aanay da'diisu/deedu ka yaraan 25 jir.
5. Waa inuu ku sifoobay xilkas, dhaqan toosan bulshada dhexdeeda.
6. Waa in aanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo maxkamad horteed kaga cadaadey 10kii sanno ee u dambeeyay.
7. Waa inuu leeyahay aqoon dugsi sare haddii uu iska sharaxayo degmooyinka darejada A iyo B. Hadii uu iska sharaxayo degmooyinka derajada C waa inuu lahaado aqoon dugsi dhexe ugu yaraan ama wixii u dhigma.
8. Waa inuu yahay cashuur bixiye degmada uu degan yahay ama uu ka qayb qaatey si mutadawacnimo ah hawlo dan guud ah ee degmadaas.

## Qodobka 26aad
## Ururada u Gudbi Waaya Xisbi

Murashixiinta Ururada ku guulaysan waaya inay u gudbaan xisbi hasayeeshee, doorashada Golayaasha degaanka ee degmooyinka, ee iyagu ku guulaysta kuraas, waxa ku waajib ah inay ku biiraan saddexda xisbi ee la ansixiyey midkood.

## Qodobka 27aad
## Shuruudaha Murashaxa Madaxweynaha & Ku xigeenka Madaxweynaha

1. Shuruudaha murashaxa Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxay ahaanayaan kuwa ku tilmaaman Qodobka 82aad Dastuurka JSL.

2. Xubnaha isu taagaya doorashada Madaweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waa inay ka mid yihiin xisbi diiwaan-gashan ama ansaxsan, soona sharaxay.

## Qodobka 28aad
## Qaabka soo Bandhigida Murashaxiinta

1. Liiska murashaxiinta golaha degaanka waxaa soo bandhigaya Guddiga degmada ee Ururka/xisbiga, waana in si cad loo soo muujiyaa magaca murashaxa oo affaran, meesha uu ku dhashay iyo sanadkii uu dhashay; haddii ay jiraan dad isku magacyo ah waa in la sheego naanaysta (haddii ay jirto), waxa kale oo la soo muujinayaa degmada laga sharaxay.

2. Liisaska murashaxiinta ururka/xisbiga waxa kale oo la soo raacinayaa: -
   a) Caddeynta shaqo ka tegidda ee ku xusan Qodobka 8aad ee Xeerkan.
   b) 4 koobi oo saxeexan oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii iyo shaanbadii ururku/xisbigu.
   c) Caddeyn uu bixiyey murashax kastaa oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay murashaxnimada iyo inuu buuxiyey shuruudaha ku xidhan
   d) Rasiidhada bixinta deebaajiga murashaxnimo ee Wasaaradda Maaliyadda ee ku xusan Qodobka 30aad ee Xeerkan.

3. Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashaxiin oo ka soo baxa xisbi/urur gudahiisa waxa go'aan ka gaadhaya guddida fulinta ee xisbiga/ururka arrintu khusayso.

4. Murashaxa isusoo sharraxay Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo. Hasayeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharaxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 30 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.

5. Xisbigii uu marashaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.

6. Haddii mid ka mid ah murashixiinta Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo kadib marka lasoo gudbiyo liiska murashixiinta, waxa uu xisbiga ay khuseysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.

7. Haddii uu murashaxu geeriyoodo 20 maalmood ee ugu danbaysa gudahooda, xisbigaasi xaq uma laha in uu soo badasho. Xaaladaha ku saabsan bannaanaanshaha Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee ku xusan Qodobbada 86aad, iyo 89aad ee Dastuurka, waxa loo tixraacayaa Dastuurka.

8. Haddii muddada lagu cayimay Faqradaha 5aad iyo 6aad ee 20ka maalmood ah ay Xisbiyadu ku soo beddeli waayaan Murashaxii ay jagadiisu bannaanaatay sababaha ku xusan farqadaas awgood, magaca murashaxa jagadiisu bannaanaatay ayaa lagu tartamayaa.

## Qodobka 29aad
## Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta

1. Astaamaha murashixiinta doorasha Madaweynaha iyo ku-xiggeenkiisu waxay ahaanayaan astaamaha xisbiyada qaran ee soo sharaxay.

2. Astaamaha liisaska murashixiinta ururada/xisbiyada ee doorashooyinka golayaasha deegaanka ee habka liiska furan waa in ay kala duwanaadan marka la soo bandhigayo, Kommishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ku soo saaraysa xeer-nidaamiye habka loo qeybinayo iyo shuruudaha isticmaalkooda.

3. Komishanka Doorashooyinka ayaa u astayn doona murashax kasta astaan u gaar ah oo uu kaga duwan yahay/tahay murashixiinta kale.

4. Astaamuhu waa in ay noqdaan qaar kala duwan oo si dhibyar loo aqoonsan karo, waana in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed, dariiqo ama diimeed, ayna waafaqsanyihiin xeer-nidaamiyaha Kommishanka Qaranka ee ku xusan faqrada 2aad ee Qodokan.

## Qodobka 30aad
## Deebaaji

Murashaxiinta u tartamaya xilalka waxay bixinayaan deebaaji aan celin lahayn, oo kala noqonaya sidan: -

a) Sl.Sh. 100,000, 000 (Boqol Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Madaxtooyada midkiiba;
b) Sl.Sh 5,000,000 (Shan Milyan oo Shilin) Murashaxiinta Golayaasha Deegaanka midkiiba.

## Qodobka 31aad
## Qabashada Liisaska Murashaxiinta

1. Liistooyinka murashaxiinta Madaxweynaha & ku xigeenkiisa waa in la geeyo xafiiska Komishanka, ka hor lixda galabnimo maalinta 45aad inta aanay codbixintu dhicin, kuwa murashaxiinta degaanadana la geeyo xafiisyada doorashada ee degmooyinka ka hor 6da galabnimo maalinta 75aad intaanay codbixintu dhicin, iyadoo ay dhan yihiin lifaaqyadiisa ku tilmaaman Xeerka.

2. Xafiiska Komishanka ama xafiisyadiisa doorashada ee degmooyinka waxay hubinayaan in murashaxiinta liisaska ku qorani buuxinayaan dhamaan shuruudaha u dhigan heerkooda, Murashaxa aan buuxin shuruudaha waxa lagu celinayaa urur/xisbigii soo sharaxey si ay bedelkiisa u keenaan muddo loo cayimey, oo aan ka badnayn 72 saacadood.

## Qodobka 32aad
## BandhigidaLiisaska Murashaxiinta

1. Komishanka iyo xafiisyadooda degmo kasta waa inay diyaariyaan qaabka bandhigidamurashaxiinta iyagoo u habaynaya siday u kala horeeyaan, kana muuqato astaamahoodii.

2. Komishanka iyo xafiisyadiisa goob kasta oo cod-bixineed waa inay qoraal ahaan u diyaariyo qaab soo bandhigida liisaska murashaxiinta degmada iyadoo lagu dhajinayo goobaha cod-bixinta degmada.

3. Komishanka iyo xafiisyadiisu waa inay 30 maalmood ka hor taariikhda codbixinta ku dhajiyaan liisaska murashaxiinta degmada goobaha fagaarayaasha, boodhadhka ogeysiiska, xafiisyada Dawladaha Hoose IWM.

# QAYBTA 5AAD
# OLOLAHA DOORASHOOYINKA

## Qodobka 33aad
## Bilowga iyo Dhamaadka Ololaha Doorashada

1. Ololaha doorashooyinku wuxuu bilaabmayaa marka la soo dhejiyo ogeysiiska ku xusan Qodobka 32aad ee Xeerkan, waxaanu dhamaanayaa 48 saac ka hor taariikhda la qabanayo cod-bixinta.

2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa go’aaminaya muddada uu socon doono ololaha doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka iyaga oo qiimaynaya

xaalada markaa taagan, waxana ku waajib ah in ay siiyaan xisbiyada/ururada tartamaya tiro maalmo ah oo is-leeg.

3. Jadwalka ololaha doorashada waxaa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka, muddada ololaha doorasho waa in aanay ka yaraan 21 maalmood.

## Qodobka 34aad
## Qabashada Shirarka & Banaan-baxyada

1. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu diyaarinayaa soona saarayaa shaxda isku-soo-baxyada iyo dhoollo-tusyada qorshaysan ee Xisbiyada/Ururadda loogu qoondeeyey tiro maalmo ah oo is-leeg.

2. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka waxaa waajib ku ah in ay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen Komishanka Doorashooyinku xiliga ololaha doorashada.

3. Magaalo/tuulo kasta waxa banaan bax ka samayn kara hal xisbi/urur maalintiiba.

## Qodobka 35aad
## Muuqaalka Boodhadhka

1. Muuqaalka boodhadhka iyo waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo fariimaha ololaha doorashada ee xisbi/urur/murashax waxaa ogolaanaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka isla markaana joojinaaya haddii ay ka soo horjeedaan Xeerarka iyo Anshaxa Guud. Mana jirto waxa cashuur ah oo laga bixinayaaarrintaas.

2. Lama oggola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada, xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diblomaasiyiinta, xafiisyada Komishanka Doorashooyinka Qaranka & ururada caalamiga ah, urrurada bulshada, goobaha wax barashada iwm.

## Qodobka 36aad
## Hub iyo Lebbis Ciidanimo

Shirarka iyo banaan-baxyada ololaha doorashooyinka waxa ka reebban in loo qaato hub iyo lebbis ciidan ama wax u eg.

## Qodobka 37aad
## Wakiilada Axsaabta/ururada

1. Guddiyada dhexe ama kuwa gobolada/degmooyinka ee ururadu/xisbiyadu waxay wakiil leh xaqa cod-bixinta u soo diran karaan goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso oo ay murashaxiin ku leeyihiin. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkiisa haddii uu maqnaado.

2. Wakiilada ay ururadu/axsaabtu soo dirsadeen waa inay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo, soona jeediyaan wixii tabasho ama cabasho ah ee ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.

3. Magacyada wakiilada xisbiyada/urrurada waa in loo geeyo Komishanka ama xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Komishanka ama xafiisyadiisu wuxuu siinayaa wakiil kasta qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu geli karo kana hawl geli karo goobta cod-bixinta ee loo soo diray.

4. Waxaa lagu soo xulayaa wakiillada Axsaabta/Ururrada Shuruudaha hoos ku xusan:
   a) Waa in uu yahay/tahay muwaadin Somaliland u dhashay;
   b) Waa in aanu/aanay da'diisu/da'deedu ka yarayn 25 jir sannadka doorashada la qabanayo;
   c) Waa in uu/ay wax qori karo/karto waxna akhriyi karo/karto;
   d) Waa in uu yahay/tahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.
   e) Waa in uu/ay u hogaansamo shuruucda iyo xeerarka doorashooyinka ee khuseeya shaqadiisa/deeda.

## QAYBTA 6AAD
## HAWLAHA DIYAARINTA DOORASHADA

### Qodobka 38aad
### Qalabka Goobta Doorashooyinka

1. Komishanka Qaranka ee doorashooyinku waa inay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa qalabkan:
   a) Nuqul Xeerkan ka mid ah.
   b) Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaambaddii goobta cod-bixinta oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
   c) Xidhmo lingaxan oo ay ku jiraan waraaqihii cod-bixintu.
   d) Sanaadiiqdii cod-bixinta lagu ridayay.
   e) Weel lagu qaado waraaqaha cod-bixinta.
   f) Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta.
   g) Saddex foom oo lagu qoro hawl-galka cod-bixinta.
   h) Foom leh khaanado jeexjeexan.
   i) Qalimo-biiro ku filan calamadaynta warqadaha cod-bixinta.
   j) Ugu yaraan 5 waraaqadood oo tusinaya qaabka cod-bixiyayaashu u calaamadaynayaan warqadaha cod-bixinta.
   k) Quraarad ah khadka aan tirtirmi karin ee la marinayo cod-bixiyayaasha.
   l) Qalabka qoraalada kala duwan ee loo baahan karo.
   m) Liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha loo qoondeeyay inay codkooda ka dhiibtaan goobtaa cod-bixineed.
   n) Mastarad aanu dhererkeedu ka yaraanin khaanadaha liiska ee cod-bixiyaha macluumaadkiisu ku qoran yihiin.

2. Qalabka ku xusan c, d, e, f, g, ee ku tilmaaman faqradda xubinta hore waa inay ahaadaan laba laba oo si fiican loo kala calaamadiyaa haddii wadajir loo qabanayo laba doorasho.

3. Komishanku waa inay xafiiska dhexe ee doorasho iyo degmo/gobol kasta u diyaarisaa qalabkan:
   a) Nuqul Xeerkan ah.

b) Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shambaddii xafiiska degmada, gobolka ee doorasho oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
c) Saddex foom oo lagu qorayo hawlgalka cod-bixinta xafiiska doorashada ee degmada/gobolka.
d) Foom leh shax jeex-jeexan (tabulation forms).
e) Qalabka wax lagu qoro oo kala duwan (stationary).

4. Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxarad gaar ah. Saraxadda waa in la xidho oo la lingaxo. Komishanku waa inay qalabkaas diraan wakhti ku haboon iyadoo la socdaan sanaadiiqdii codka lagu ridayey, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada degmada/gobolka oo u sii gudbinaya goobaha cod-bixinta.

5. Komishanku wuxuu tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta codbixinta ku jaan-gaynayaa tirada codbixiyayaasha goobta cod-bixinta eeku cad liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobtaas cod-bixineed oo lagu daray tirada dadka ka hawlgelaya goobta cod-bixinta oo ka kooban hawlwadeennada xafiiska doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiilada xisbiyada ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixinta.

6. Komishanku waxa uu goob kasta oo cod-bixineed u diyaarinayaa waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo aanay tiradoodu ka badnayn 2% tirada waraaqaha ee ku xusan farqadda 5aad ee Qodobkan, lambarradooda iyo goobaha cod-bixineed ee loo kala dirayana lagu qorayo diiwaan gaar ah oo Komishanka Doorashooyinka Qaranku leeyahay, waxana goobtaa loogu ridayaa buqshad xidhan oo gaar ah oo lagu rido sanduuqa doorashada ee goobta cod-bixineed.

7. Waraaqaha dheeraadka ah waxa loo adeegsanayaa oo keliya beddelaadda waraaqaha cod-bixineed ee xumaada intaan lagu codayn, taas oo ay waajib tahay in ay ku wada qancaan guddoomiyaha iyo wakiilada axsaabta/Ururrada u jooga goobta codbixinta. Mar kasta oo warqad ka mid ah waraaqaha dheeraadka ah lagu codeeyana waa in la diiwaan-geliyaa asbaabaha kalifay.

8. Komishanku waa inay xafiisyadooda degmo/gobol u diyaariso waraaqo codbixineed oo dheeraad ah oo ku lingaxan kiishash si loo siiyo xafiiska doorasho ee soo codsada, iyadoo ay waajib tahay in ay soo sababeyaan, waxana la guddoonsiinayaa guddoomiyaha goobta cod-bixinta**.**

9. Komishanka Doorashooyinka Qaranku isaga oo qiimeeyanaya baahida xafiisyada gobolada, degmooyinka iyo goobaha cod-bixinta, waxa uu awood u leeyahay in uu kordhiyo, dhimo, ama qalab cusub oo lagama maarmaan ah ku darro qalabka loo dirayo goobaha doorashooyinka, waana in uu go'aan Komishan kusoo saaraa.

## Qodobka 39aad
## Waraaqaha Cod-bixinta

1. Waraaqaha cod-bixinta waa inay ku daabacan yihiin astaamaha ururada/xisbiyada oo kor u taagan si afar gees ah. Astaan kastaa waa inay leedahay meel banaan oo loogu talagalay inuu cod-bixiyuhu ku muujiyo codkiisa.

2. Komishanka Doorashooyinka ayaa go'aamin doona Astaamaha kale ee ay yeelanayso waraqada codbixintu.

## Qodobka 40aad
## Habaynta Liisaska Rasmiga ah iyo Goobaha Codbixineed

1. Goob kasta oo codbixinta laga dhiibanayaa waa inay lahaato laba ilo-xidhoo yar yar oo loogu talagalay in lala galo calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta loona habeeyo in qarsoodi codka loogu dhiibto.

2. Sanaadiiqda cod-bixinta lagu ridayaa waa inay yaaliin meel muuqata ama hareeraha ka xigaan miisaska guddoomiyaha goobta cod-bixinta.

3. Liiska dadka ka diiwaan-gashan isku goob doorasho, waxa ay qoraal ahaan u kala horaynayaan siday xuruuftu u kala horreeyaan iyadoo laga duulayo magacooda 1aad, haddii ay ku kala bixi waayaana magacooda 2aad, haddii ay kaas ku kala bixi waayaana kooda 3aad, haddii ay kaas ka sinmaanna kooda 4aad.

## Qodobka 41aad
## Ogeysiinta Liiska Murashaxiinta

1. Halka nuqul ee ku xusan Qodobka 32aad ee Xeerkan waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah xafiiska doorashada ama goobta cod-bixinta gudaheeda iyo dibeddeedaba.

2. Nuqulka ogaysiinta ee ku xusan Qodobka 32aad ee Xeerkan oo Komishanku ka soo sameeyay liiska murashaxiinta oo u kala horeeya sidii loogu soo gudbiyay waa in lagu dhejiyo banaanka xafiisyada doorashada iyo gudaha meel la wada arki karo.

## Qodobka 42aad
## Qaybinta Qalabka Doorashada

1. Xafiiska doorashada degmadu waa inuu hubiyo in goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso in la geeyo wixii qalab ah ee loo baahan yahay ugu danbayn markay saacadu tahay 6:00 saac ee subaxnimo maalinta cod-bixinta.

2. Komishanku waa inuu geeyo xafiiska doorashada degmada qalabka loogu talagalay cod-bixinta ugu dambayn 4ta galabnimo maalinta ka horaysa codbixinta.

3. Goob kasta oo cod-bixineed waa in la siiyo:-
   a) Nuqul muujinaya magacyada hawlwadeenada goobta.
   b) Nuqul muujinaya wakiilada ururada/axsaabta ee goob-jooga ahaanaya.

# QAYBTA 7AAD
# BILOWGA HAWLAHA GOOBTA CODBINTA

## Qodobka 43aad
## Xafiiska Goobta Cod-bixinta

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixintu markuu helo qalabka ku xusan Qodobka 42aad waa inuu: -
    a. Diyaariyo goobta codbixinta xafiiska oo uu hubiyayaasha iyo xoghaynta, u sheego inay yihiin hawlwadeenadii goobta isla markaana la socodsiiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan.
    b. Hubiyo in Wakiilada axsaabta/ururada ee loo soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inay joogaan.
    c. Markuu hubiyo inay saxaraduhu lingaxan yihiin waa inuu furo saxarada oo hubiyo inay dhan yihiin qalabkii, waana inay goob-joog ahaadaan Hawlwadeenadii goobta iyo wakiiladii ururada/axsaabtu.
    d. Markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambadda goobta iyo waraaqaha cod-bixintu lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu ilaaliyo meel xafidan. Waxaa reebban in uu markaas joogo qof aan ahayn inta goobta ku qoran.
    e. Inuu hubiyo in ogeysiinta ay ku qoran yihiin tilmaamaha cod-bixinta iyo liisaska murashaxiintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.
    f. Inuu hubiyo in qalabkii loo baahnaa ee cod-bixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashu si hufan ugu hirgasho.

2. Waa inuu diiwaan-geliyo dhamaan hawlgalka kor ku xusan in la fuliyey. Qoraalka waa inay ku cadaato shaambadda goobta, tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixintu heshay.

3. Waa inuu markaa ka saxeexo hawlwadeenada iyo wakiiladaba in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.

4. Markuu hubiyo guddoomiyaha goobta cod-bixintu in hawshaasi qabsoontay waa inuu ku dhawaaqo in cod-bixintu furan tahay.

5. Haddii ay xisbiyadda siyaasaddu goob cod-bixineed usoo diran waayaan wakiilo, hawsha doorashadu u xannibmi mayso, hawl-wadeenada Komishanka ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan.

6. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa uu soo saarayaa habraacyo dhamays tiran oo lagu faahfaahinayo hawlqabadka goobta codbixinta, kaas oo hawlwadeenada goobta lagu tababari doono.

## Qodobka 44aad
## Awoodda Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixinta waxa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto. Booliska ayuu ku amri karaa inuu qof goobta dibedda uga saaro ama in la qabto qof gef ku sameeyay hawsha doorashada ama qof waali ka muuqato.

2. Booliska looma ogola inuu galo gudaha goobta cod-bixinta haddii aanu Guddoomiyuhu amrin.

3. Saraakiisha Booliska, masuuliyiinta dawladda, hawlwadeenada goobta, wakiilada axsaabta/ururada, goob-joogayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah, waa in ay fuliyaan codsiyada Gudoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawl-wadeenada ama goobta agteeda.

4. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta iyo xubnaha Komishanka heer qaran, gobol iyo degmo, waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awoodaha ku xusan farqadaha Qodobkan.

## Qodobka 45aad
## Gelidda Goobta Cod-bixinta

1. Xafiiska goobta cod-bixinta waxa geli kara dadka maamulaya xafiiska iyo kuwa ka wakiilka ah axsaabta/ururada iyo kuwa codka bixinaya.

2. Waxa reebban in cod-bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta, markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo lookala hor marinayo sidii loo soo kala horeeyay, hasayeeshee waa in tixgelin la siiyaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof naafo ah, hooyo uur leh ama ilmo sidata, qof waayeel ah, ama qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiisa bixiyo.

## Qodobka 46aad
## Talaabooyinka Ka Horeeya Cod-bixinta

1. In uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-ku-xigeenka goobta cod-bixinta, si uu u hubiyo inuu yahay kaadh cod-bixineed oo sax ah (valid), isaga ooka hubinaaya tilmaaha kaadhka codbixiyaha liiska codbixiyayaasha ansaxa ah.horena aan loogu codayn maalintaa codbixinta,isla markaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna far-yaradiisa midig, haddii aanu taana lahayna meelaha muuqda ee jidhkiisa inaanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo xoghayaha goobta, iyadda oo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiila xisbiyaddu, haddii ay goobta ku sugan yihiin.

2. Marka uu xoghayaha goobtu ka helo magaca kaadhka ku qoran liiska rasmiga ah ee cod-bixiyayaasha goobta, isla markaana uu hubiyo inay is waafaqsanyihiin lambarka kaadhka ku qoran iyo lambarka kaadhka ugu diiwaangashan liiska cod-bixiyayaashu, waa in uu codbixiyuhu suulka bidix saaro meesha liiska codbixiyayaasha ah ee loogu talo galay.

3. In tallaabooyinka farqadda sare ee Qodobkan ku xusan u guto si dhamaystiran oo nidaamka waafaqsan, kuna wada qancaan hawlwadeenada iyo wakiilada axsaabtu ee goobta codbixinta ku sugan ayaa cod-bixiyaha loo goyn karaa warqadda cod-bixinta.

4. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa xaddidi doona tiradda codbixiyayaasha ee hal goob ka codaynaya, iyaga oo u kala qaybin kara haddii tirada codbixiyayaasha ee hal goob ka codayn karaa ay ka bataan tiro xaddidan oo Komishanku goyn doono, iyaga oo ku xisaabtamaya in dhamaan codbixiyayaasha diiwaagashani codkooda wada dhiiban karaan maalinta codbixinta.

## Qodobka 47aad
## Cod-bixiyayaasha aan Codka Dhiiban Karin

1. Waxa codkiisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta, ee buuxiyey shuruudaha codbixinta.

2. Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo guddoomiyaha goobta cod-bixinta ayaa u ogolaanaya in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay inuu gacan siiyo oo ka caawiyo sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa.

3. Haddii uu jiro qof waayeel ah ama aan fahmi karayn halka uu warqadda ka calaamadinayo, guddoomiyaha goobta codbixintu wuxuu amrayaa in qof uu ku kalsoon yahay ama haddii aanu jirinna hawlwadeenadda goobtu ay gacan ka siiyaan oo ay ka caawiyaan sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa. Wakiilada xisbiyada/ururrada waa in la tusaa cida uu doortay, codbixiyuhu ee loo calaamadiyey.

4. Xoghayaha goobta cod-bixinta ayaa qoraalka gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas naafada ah laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxa kale oo uu qoraalka ku muujinayaa qofka naafada ah iyo qofka kaalmeeyey.

# QAYBTA 8AAD
# HAWLGALKA CODBIXINTA

## Qodobka 48aad
## Nidaamka Cod-bixinta

1. Marka la dhamaystiro hawlaha ku xusan Qodobka 46aad ee ayuu guddoomiyaha goobtu:
   a) Cod-bixiyaha u goynayaa warqadda codbixinta isagoo xaqiijinaya in dabadii hadhaaga ahayd ee warqadda cod-bixineed ku hadhay buugga, hubinayana in shaanbadii goobtu ku taalo, kuna wareejinayaa si uu ugu soo codeeyo;
   b) Kaadhka codbixiyaha u gudbinayaa hubiyaha goobta;
   c) xariijin ka talaabinayaa magaca codbixiyaha iyo dhamaan xogta kale ee cod-bixiyaha eeku qoran khaanadaha cod-bixiyahaas ee liiska, isaga oo adeegsanaya mastaradda iyo qalin, ilaaliyana in magaca cod-bixiyaha iyo xogtiisa kaleba la akhriyi karo xariijin marinta ka dib.

2. Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn in warqadda cod-bixiyuhu aanay dhammayn ama ay jeexan tahay, ama aanay lahayn shaanbadii goobta wuu soo celinayaa, waxaanu codsanayaa in lo beddelo, dhacdadaasna waa in la diiwaangeliyaa.

3. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed gelayaa ilo-xidhka waraaqaha lagu soo calaamadiyo.

4. Isaga oo adeegsanaya mid ka mid ah qalimadda goobta, ayuu codbixiyuhu calaamadinayaa halka loogu talo-galay ee ka mid ah qaybaha warqadda ee u gaarka ah xisbiga/musharraxa uu doonayo inuu u codeeeyo, dabadeena wuu soo laalaabayaa warqadda kana soo baxayaa qolka calaamadinta warqadda.

5. Intaa kadib ayuu cod-bixiyuhu wuxuu ku ridayaa warqaddiisa cod-bixinta sanduuqa cod-bixinta.

6. Cod-bixiyuhu wuxuu dabadeed u imaanayaa hubiyaha oo loo soo gudbiyey kaadhkiisa, kaas oo faryaradiisa bidix u marinaaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahayna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahayna farta kale ee kusoo xigta iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu laba gacmood midna lahayna meeshii kale ee jidhkiisa ah ee muuqanaysa.

7. Intaas kadib ayuu hubiyahu siinayaa cod-bixiyaha kaadhkiisii, cod-bixiyuhuna waa in uu si deg-deg ah uga baxaa goobta cod-bixinta isaga oo anshaxa dhawraya.

8. Qof kasta oo ka mid ah hawl-wadeenadda doorasho ee goobta cod-bixinta, wakiillada xisbiyadda ee goobta cod-bixinta iyo ciidanka booliiska ee sida rasmiga ah ugu xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu, wuxuu codkiisa dhiiban karaa (isaga oo u maraya tallaabooyinka ku xusan 1-6 ee Qodobkan) isla marka goobta codbixinta la diyaariyo, ee hawl-wadeenada goobta cod-bixintu iyo wakiillada xisbiyadda ee goobta-codbixintu ay isla hubiyaan in kaadhka qofkaasi yahay mid sax ah (valid) horena aan loogu codayn, foomka uu Komishanka Doorashooyinku Qaranku u soo diyaariyena lago qoro:

a) Magaciisa oo afarran;
b) Lambarka iyo goobta uu ka diiwaangashan yahay;
c) Lambarka iyo magaca goobta uu ka codaynayo;
d) Xilka uu ka hayo goobta cod-bixinta;
e) Saxeexa suulkiisa bidixna uu dhiga meesha foomka loogaga talo-galay.

9. Qof kasta oo ka mid ah dadka ku xusan farqadda 8aad ee Qodobkan waxa kaadhkiisa codbixinta haynaya, guddoomiyaha Goobta cod-bixinta oo dib usiin kara uun ka dib marka lasoo gebagebeeyo hawsha doorasho ee goobta cod-bixinta.

10. Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinayaa hawl-wadeennada kale ee xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan bannaanaanayaa kala-socodsiinta hawsha goobta.

11. Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu debadda uga saaro cod-bixiyaha cudur-daar la'aan dhex meeraysta goobta iyo inuu cod-bixiyayaas dib ugu soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyayaas waxa loo oggolaanayaa inuu codkiisa dhiibto ka dib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.

12. Haddii uu cod-bixiye la yimaaddo goob cod-bixineed kaadh aan waafaqsanayn goobtaas, Hubiyuhu wuxuu u tilmaamayaa goobta cod-bixineed ee uu kaadhkiisu waafaqsan yahay.

13. Cod-bixiye kasta oo sita kaadh codbixineed oo aanu lahayn ama waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, Guddoomiyuhu wuxuu si deg-deg ah u amrayaa in laga qaado, waxaanu si deg-deg ah ugu dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaangellinayaa.

## Qodobka 49aad

**Muddada Cod-bixinta**

1. Hawlgalka cod-bixintu waa in la dhamaystiro hal maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 7:00 saac ee subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 fiidnimo.

2. Cod-bixintu way soconaysaa wakhtiga xidhitaanka la tixgelin maayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan welli codkooda bixin ilaa ay ka dhamaanayaan.

3. Marka ay saacadu gaadho 6:00 fiidnimo, askarta ilaalinaysa safku waxa ay calaamadin doonaan qofka ugu danbeeya dadka taagan safka, waxaanay u ogolaan doonaan in ay codeeyaan inta safka ku jirta oo kali ahi.

4. Komishanka Doorashooyinka ayaa go’aamin doona goobaha xaalado gaar ahi la soo darsaan maalinta doorashada.

**Qodobka 50aad**
**Go'aanka Cabashooyinka ee Goobta Cod-bixinta**

1. Hawlwadeenadagoobta cod-bixintu waa inuu si ku meel gaadh ah go'aan uga gaadho cabashooyinka (haddii ay jiraan) oo ay ka mid yihiin kuwa af ahaan loo soo jeediyey iyo wixii muran ah ee ku hawl-galka goobta cod-bixinta. Cabashooyinka iyo muranadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

2. Haddii ay jirto amni darro halis galin karta hawlwadeenada goobta iyo dadka codbixiyayaasha, guddoomiyaha goobtu waxa uu si ku meel gaadh ah u xidhayaa goobta codbixinta, waana in uu sida ugu dhakhsaha badan u soo wargaliyaa Komishanka Doorashooyinka ee heer degmo, gobol, iyo heer qaran.

## QAYBTA 9AAD
## TIRINTA CODADKA

**Qodobka 51aad**
**Hawsha ka Horaysa Tirinta Codadka**

1. Markay cod-bixiyayaashu codkooda bixiyaan guddoomiyaha goobtu wuxuu cod sare ku dhawaaqayaa inay cod-bixintu xidhan tahay.

2. Markuu guddoomiyaha goobtu ka ururiyo miiska dhamaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta wax ahmiyad ah u lahayn wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota: -

a) Wuxuu hubinayaa tirada cod-bixiyayaasha isagoo ka eegaya tirada waraaqaha codbixinta.
b) Wuxuu ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha cod-bixinta ee aan la isticmaalin waxaanu ku ridayaa buqshadda 1aad.
c) Wuxuu xaqiijinayaa oo saxeexiisa ku muujinayaa waraaqaha doorashada ee xumaaday ama aan hagaagsanayn ee ay soo celiyeen cod-bixiyayaashu, ama la arkay inay xun yihiin, waxaanu ku ridayaa buqshada 2aad.

**Qodobka 52aad**
**Hawsha Tirinta Codadka**

1. Marka guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha ku xusan Qodobka 51aad wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod-bixinta ee sanduuqa ku jira. Si taa loo fuliyo guddoomiye ku-xigeenku wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa hal warqad cod-bixineed, wuxuuna u dhiibayaa guddoomiyaha, guddoomiyuhuna wuxuu furayaa warqaddii codbixinta oo cod sare ku dhawaaqayaa ururka/xisbiga codka lagu siiyey; warqadaas waxa guddoomiye ku-xigeenku u sii gudbinayaa Hubiyaha oo tusi doona wakiilada Xisbiyada/Ururada, markaas xoghayaha ayaa gelinaya foomka khaanadaysan ee loogu talagalay ururka/xisbiga codkaas helay waxaanu warqadaas ku ridayaa buqshada 3aad, iyada oo u kala xidhan xisbi/urur ama murashax.

2. Ma banana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod-bixineed inta tii ka horaysay laga dhamaynayo ee buqshadda lagu ridayo. Hawsha waxa maamulaya hawl-wadeenada goobta cod-bixinta oo keliya.

3. Guddoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tiradaguudee waraaqaha cod-bixinta, iyo inay isle'ekaadaan tirada codadka ururada/axsaabtu guud ahaan heleen, tirada codadka lagu muransan yahay, aan hagaagsanayn, aanay waxba ka jirin, iyo kuwa aan la isticmaalin ee ku xusan Qodobka 58aad ee Xeerkan.

4. Guddoomiyaha goobtu markuu caddeeyo ee sidaas saxeexiisa ku muujiyo:
   a) Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee waxba-kama-jiraanka laga dhigay ku ridayaa buqshadda 4aad.
   b) Wuxuu waraaqaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa buqshada 5aad.
   c) Ugu danbeyntiina, wuxuu waraaqaha ansaxay ee la tiriyey ku ururinayaa buqshada 3aad, iyaga oo u kala xidhan xisbi/urur.

5. Haddii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ah ama ka duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaanbadii goobta, lambarkii waraaqda cod-bixinta ee goobta ama nooc ahaan aanay ula mid ahayn waraaqadaha lagaga codeeyay goobta, hawl-wadeenada goobta codbixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, waxayna tusayaan wakiillada xisbiyadda/ururrada ee goobta codbixinta, ka dib waxa lagu ridayaa buqshad gaar ah iyada oo dhacdadaas la diiwaangelinayo.

## Qodobka 53aad
## Xidhitaanka Hawsha Tirinta

1. Markuu guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan Qodobada 51aad, 52aad, wuxuu iyadoo fagaare ah ku dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, wadarta codadka ansaxayiyo tirada codadka uu helay, murashax kasta oo xisbi/urur.

2. Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa wakiilka xisbi/urur ku waajib ah in uu saxeexo Xaashida Natiijada Goobta-codbixinta (result sheet) ama uu qoraal kusoo gudbiyo sababaha uu u saxeexi waayay, iyo cabashooyinka kale ee xisbiyada/ururada laguna rido buqshadda 6aad.

3. Buqshadaha korkooda waxa lagu qorayaa faahfaahinta waxa buqshadda gudaheeda ku jira.

4. Hawsha tirinta waa in loo dhamaystiro si isdaba jooga ah ee la soo tilmaamay oo hakad lahayn oo wax kale aan la dhex galin.

5. Qoraalada raadraaca ahi (records) waa inay si cad u muujiyaan hawlaha kor ku xusan.

6. Komishanka Doorashooyinka Qaranku waxa ay soo saari doonaan habraac dhamays tiran oo khuseeya habka xidhitaanka iyo tirinta codadka.

## Qodobka 54aad
## Codadka Xumaada ama Lagu Muransanyahay

1. Waraaqaha cod-bixinta marka la tirinayo waxay noqonayaanwaxba kama jiraan:
    a) Haddii ay ka duwan yihiin waraaqaha cod-bixinta ee Komishanku gartay in doorashada loo isticmaalo.
    b) Haddii aanay lahayn shaambadda goobta cod-bixinta.

2. Waraaqaha cod-bixinta ee la tiriyay waxay noqonayaan waxba kama jiraan haddii:-
    a) Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xirfad leh loo soo agaasimay oo aan loogu talagelin in lagu qoro.
    b) Haddii warqadda cod-bixinta aanay si fiican uga muuqan karin Ururka/xisbiga codka la siiyey oo la aqoonsan kari waayo.
    c) Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadeyay hal astaan xisbi/urur wax ka badan.

3. Codka waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah isku raacaan Hawl-wadeenada goobta cod-bixintu. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa waraaqahaas cod-bixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay.

4. Xafiiska Doorashada ee degmada ayaa go'aan ka gaadhi kara waraaqaha codbixinta ee muranku ka taagan yahay.

## Qodobka 55aad
## Qoraalka Raadraaca Goobta Cod-bixinta

1. Natiijada raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey Komishanka Doorashooyinka Qaranku ee ka kooban xaashi asal (original ah) iyo nuqulada lagama maarmaanka ah (copies), iyada oo fagaare ahna waxa guddoomiyaha goobtu ku dhawaaqayaa:
    a) Tirada guud ee ka codaysay goobta;
    b) tirada codadka xumaaday;
    c) tirada codadka lagu muransan yahay;
    d) tirada codadka ansaxay, iyo
    e) Tirada ay kala heleen xisbiyada/murashaxiinta tartamay.

2. Xaashida asalka ah ee Natiijada goobta ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan waxa lagu ridayaa Buqshada 7aad waxaana gacantaloogu gudbinayaa Guddoomiyaha Xafiiska Doorashada ee Degmadda.

3. Laba nuqulna waxa lagu ridayaa buqshada 8aad,oo lagu ridayo isla sanduuqa ay ku jiraan buqshadaha lingaxan ee ku xusan Qodobka 56aad (1 iyo 2) ee Xeerkan iyo wixii ka hadhay agabkii doorashada waxaana loo gudbinayaa Xafiiska Doorashada ee Degmadda, wakiilada xisbiyadana/ururada waa in la siiyaa min hal nuqul.

## Qodobka 56aad
## Qaadista iyo Wareejinta Qalabka

1. Guddoomiyaha goobta cod-bixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawl-wadeenada ka tirsan iyo Boolis ilaalo ah ayaa qaadaya qoraalka raadraac iyo buqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, iyadoo aan lahayn wax dib u dhac ah.

2. Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo sanduuqa ay ku jiraan buqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin lana farafarayn. Guddoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.

# QAYBTA 10AAD
# HAWLAHA XAFIISYADA SARE EE DOORASHADA

## Qodobka 57aad
## Shaqada Xafiiska Doorashada ee Degmada

1. Markuu Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay Qodobka 56aad ee Xeerkan: -
   a) Waa inuu faro guddoomiye ku-xigeenka, hubiyaha, xoghayaha iyo tiriyayaasha inay hawshooda u diyaar garoobaan.
   b) Waa inuu u yeedho wakiilada ururadda/axsaabta ee murashaxiin ku leh degmada ee Komishanku soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inta hawshu socoto.
   c) Markay guddoomiyaha, hawlwadeenada iyo wakiilada xisbiyada/ururradu hubiyaan inay sanduuqyaddu lingaxan yihiin oo aan la furin, waa inuu furo sanduuqa oo ka soo saaro qalabka ku jira oo hubiyaa.
   d) Markay wadajir u hubiyaan in buqshadahu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa inuu furaa buqshadda ay ku jirto shaamnbadu oo hubiyaa in lambarka shaambadu ku yaal qoraalada.

2. Xafiiska doorashada ee degmadu waa inuu markaas hubiyo in qoraalada iyo buqshadaha ku xusan Qodobadda 51aad, 52aad, 53aad, 55aad ee Xeerkan ay dhan yihiin.

## Qodobka 58aad
## Tirinta Codadka Doorashada Degaanka & ku Dhawaaqidda Natiijada

1. Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu markuu helo agabka ku xusan Qodobka 56aad ee doorashada degaanka, markaas waa inuu:
   a) Tiriyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo baxday goobaha cod-bixinta degmada.
   b) Hubiyo codadka waxba kama jiraanka ah ee ka soo xerooday goobaha codbixinta degmada.
   c) Go'aan ka gaadho codadka lagu muransan yahay.
   d) Tiriyo codadka ansaxay ee urur/xisbi kasta ka helay doorashada degmada.
   e) Xisaab ahaan isu qaybiyo tirada guud ee codadka ansaxay ee degmada iyo tirada kuraasta degaanka degmada, soona saaro inta urur/xisbi waliba ka helayo codadka.
   f) Hubiyo urur/xisbi kasta inta uu ka helayo kuraasida degaanka.
   g) Markaas ku dhawaaqo magacyada murashaxiinta ee xisbi/urur kasta ku guulaystay doorashada, iyagoo isugu xiga siday u kala horeeyeen, sida uu tilmaamayo Qodobka 24aad ee Xeerkan
   h) Natiijada doorashada degmada si fagaare ah ugu dhawaaqo kuna dhejiyo boodhka xafiiska doorashada ee degmada magacyada murashaxiinta guulaystay.

## Qodobka 59aad
## Gudbinta Raad-raaca (Records)

1. Raadraacyada hawlgalada ku xusan qodobada 56aad, 57aad ee Xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ka koobnaadaan nuqulada lagama maarmaanka ah ee Komishanku go'aamiyo.

2. Nuqulada raadraacyada (records) waxaa loo qaybinayaa sida uu tilmaamayo Qodobada 56aad, 60aad ee Xeerkan.

## Qodobka 60aad
## Soo Saaridda Go'aanada Doorashooyinka Degaanada

Xafiiska doorashada ee degmaddu waa inuu soo saaro go'aanka doorashada degmada, iyagoo ku muujinaya qoraal kooban oo ay ku qoran yihiin magacyada murashaxiinta ku guulaystay doorashada degaanka, waxaana lagu dhejinayaa xafiiska maamulka Dawladda Hoose ee ay khusayso. Iyagoo nuqul ka mid ahna u gudbinaya xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

## Qodobka 61aad
## Isugeynta Tirsiga Cod-bixinta Doorashada Madaxtooyada.

1. Guddoomiyaha doorashada ee degmadu markuu qabanayo hawsha doorashada Madaxtooyada: -
   a) Waa inuu tiriyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo hoyatay goobaha cod-bixinta.
   b) Waa inuu hubiyo codadka waxba kama jiraanka noqday ee ka soo hoyday goobaha cod-bixinta.
   c) Waa inuu go'aan ka gaadho codadka muranku ka taagan yahay, sida uu tilmaamay qodobka 54aad ee Xeerkan.
   d) Waa inuu isu geeyo codadka xisbi kasta oo murashaxiin ku leh degmada ka helay goobaha cod-bixinta.

e) Waa inuu natiijada codadka ee soo baxay iyo cabashooyinka (haddii ay jiraan) u gudbiyo Xafiiska doorashada gobolka.

## Qodobka 62aad
## Shaqada Xafiiska Doorashada ee Gobolka

1. Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo qoraalka raad-raaca ee goobaha cod-bixinta iyo natiijada guud ee codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta xisbi kasta ka helay ee uu u soo gudbiyey xafiisyada doorashada ee degmooyinka gobolku wuxuu hubinayaa xisaab ahaan natiijada codadka.

2. Xafiiska Doorashada ee Gobolku wuxuu ka go'aan gaadhayaa wixii cabasho ka taagnayd ama lagu muransanaa ee loo soo gudbiyey, iyada oo ay goob-joog yihiin wakiilada xisbiyada tartamayaa, wuxuu isu geynayaa natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:

a) Tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhamaan degmooyinka gobolka;
b) Tirada guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka Gobolka.
c) Tirada Guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka gobolka.
d) Tirada codadka ay kala heleen xisbiyada/ururrada tartamay.

3. Waa inuu natiijada codadka ee soo baxay iyo cabashooyinka (haddii ay jiraan) u gudbiyo Xarrunta Komishanka Doorashooyinka ee Heer Qaran.

4. Xafiiska Doorashada Gobolku:

a) Wuxuu natiijada raadraaca doorashada ee gobolka ku qorayaa foomka ku xusan Farqada 2aadee Qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo nuqulada lagama maarmaanka ah;
b) Nuqulada foomamka natiijada gobolka, oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxa uu u dirayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
c) Wakiiladda Axsaabta/ururada ee Xafiiska Doorashada Gobolkana waa in uu siiyaa min hal nuqul.

## Qodobka 63aad:
## Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada

1. Xafiiska Dhexe ee Komishanku markuu helo qalabka & qoraalada raadraaca ee ku xusan Qodobka 59aad ee Xeerkan, waa inuu:

a) Faro kaaliyayaasha iyo xoghaynta inay u diyaaargaroobaan hawsha.
b) U yeedho Wakiilada ururada/axsaabta si ay goob-joog u ahaadaan marka hawshu socoto.
c) Inay wadajir u hubiyaan in buqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furaa oo ka soo saaraa agabka ku jira.
d) Inay wadajir u hubiyaan in buqshadahu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furo buqshadda ay ku jirto shaambadda xafiiska doorashadu, waana in qoraalka raadraaca lagu muujiyo lambarka shaambada.

2. Xafiiska dhexe ee doorashooyinku waa inuu markaas hubiyo inuu helay qoraalka raadraaca ee ku xusan Qodobka 59aad ee Xeerkan oo laga doonayo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada.

## Qodobka 64aad
## Ku Dhawaaqidda Natiijada Doorashooyinka Madaxtooyada

Xarrunta dhexe ee Komishanku markuu ka helo xafiisyada doorashooyinka ee degmooyinka/gobolada waa inuu:
1. Go'aan ka gaadho dacwooyinka iyo murranada la xidhiidha cod-bixinta iyo tirinta.
2. Tiriyo oo isku geeyo (xisaab ahaan) codadka ansaxay, kuwa xumaaday ama waxba kama jiraanka ah ee ka yimid xafiisyada doorashooyinka gobolada.
3. Markuu si walba u hubiyo ee uu ku qanco in hawshu si habsami u dhacday, Guddoomiyaha Komishanku wuxuu si ku meel gaadh ah ugu dhawaaqayaa natiijooyinka doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha.

## QAYBTA 11AAD
## HUBAL-CELINTA IYO DAWCADAHA

## Qodobka 65aad
## Hubaal-celinta Natiijada Doorashada Degaanadda

1. Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolku waa inuu hubaal-celiyo oo ansixiyo go'aanka doorashada Golayaasha degaanada. Waa inuu go'aan ka gaadho wixii muran ama cabasho ah ee guud ahaan uu u soo gudbiyey xafiiska doorashada ee degmadu ee soo baxay intii hawshu socotey.

2. Dacwadaha ku saabsan Doorashada Deegaanka waxaa awood u leh Maxkamadda Gobolka, waana in dacwadaasi ay soo gaadho kaalinta maxkamadda gobolka 7 (toddoba) maalmood gudahood oo ka bilaabmanta maalinta ay Xafiiska heer degmo ee Komishanka Doorashooyinka Qaranku ay soo saaraan go'aannada doorashooyinka deegaanada sida ku cad Qodobka 60aad ee Xeerkan. Cabasho kasta oo ka danbaysa muddada qaanuuniga ahi waa waxba kama jiraan (null and void).

3. Maxkamadda gobolku waa in ay go'aan qaadataa muddo 10 (toban) cisho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta ay cabashadu soo gaadhay kaalinta Maxkamadda Gobolka ee ay khuseyso.

4. Dhinac kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka Maxkamadda Gobolku waa in ay rafcaan qaadashadooda diiwaangeliyaan isla marka xukunka lagu dhawaaqo. Waa in ay rafcaan qaadashadooda qoraal ahaan ku soo gudbiyaan muddo laba (2) cisho gudahood ah oo ka bilaabmaysa isla maalinta ay maxkamaddu ku dhawaaqday go'aanka.

5. Maxkamadda Gobolku waa in ay muddo 2 (laba) cisho ah ugu soo gudbiso Maxkamadda Sare. Haddii ay isla maalintaa rafcaan qaadan waayaan, xaq uma laha in ay dacwadoodu u gudubto Maxkamadda Sare.

6. Go'aanka Maxkamadda Gobolka waxaaa looga racfaan qaadanayaa Maxkamadda SareMaxkamadda Sare waa in ay muddo toban cisho gudahood ah (10 cisho) kusoo saartaa xukunka iyo natiijada kama danbaysta ah.

## Qodobka 66aad
## Dacwadaha Doorashada

1. Dacwadaha ku saabsan doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku xigeenka Madaxweynaha waxa awood u leh Maxkamadda Sare, waana in dacwadaasi soo gaadho kaalinta maxkamadda 7 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada. Haddii ay wakhtigaa dhaafto dacwadaasi wax tixgelin ah ma yeelanayso.

2. Maxkamadda Sare waa in ay dacwadaha doorashada madaxtooyada kaga go'aan gaadhaan muddo 10 casho gudahood ah.

3. Maxakamadda Sare markay hesho qoraaladda raad-raaca ee xafiiska dhexe ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka isla markaana hubiso xisaab ahaan iyo sharci ahaan doorashada waxay ansixinaysaanatiijada doorashada Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.

# QAYBTA 12AAD
# KU XADGUDUBYADA

## Qodobka 67aad
## Ciqaabta Xadgudubka

1. Qof kasta oo la yimaada goob-codbixineedkaadh codbixneed oo aanu lahayn, isaga oo ujeedadiisu tahay in uu ku codeeyo, ama waraaqo codbixineed oo dheeraad ah, waxa uu galay danbi waxaana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama ganaax lacageed oo dhan 2,000,000/= ilaa 3,000,000/= (laba ilaa saddex milyan oo shilin Somaliland ah).

2. Qof kasta oo keydsada kaadhadh codbixineed oo cid kale leedahay isaga oo ujeedadiisu tahay in tahay in uu maalinta codbixinta si qaldan uga faa'iideysto waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa laba sanadood oo xadhig ah iyo/ama ganaax lacageed ah oo dhan 500,000/= ilaa 2,000,000 oo Shilin Somaliland ah.

3. Qof kasta oo sameeya, qaybiya, qaata, ama sifo kalaba u adeegsada kaadh codbixineed oo been abuura ama waraaqo codbixneed oo been abuur ah, waxa uu galay danbi waxanu mutaysanayaa ciqaab dhan saddex sanno ilaa lix sanno oo xadhig ah, iyo ganaax lacageed oo dhan 5,000,000 ilaa 10, 000, 000 (Shan milyan ilaa toban milyan oo Shilin Somaliland ah).

4. Waxa reeban in goobta cod-bixinta laga ololeeyo, cod-bixiyayaasha laga hor istaago ama loo diido in ay codeeyaan, la hadido, la laaluusho ama khalkhal gelin lagu sameeyo nidaamka goobta codbixinta. Qof kasta oo falalkaasi ku kacaa waxa uu galay danbi,

waxanu mutaystay ciqaab dhan lix bilood ilaa saddex sano iyo/ama ganaax lacageed oo dhan 1 milyan ilaa 3 milyan oo Somaliland Shiling ah.

5. Qof kasta oo xoog u adeegsada ama ugu hanjaba inuu xoog u adeegsanayo, hawlwadeenada goobta codbixinta, si ugu qasbo in ay wax-is-daba marin sameeyaan, ama joojiyaan hawsha goobta codbixinta, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan lix bilood ilaa 5 sano oo xadhig ah, iyo/ama ganaax dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Shilin.

6. Hawlwadeenkasta oo fududeeya in la musuqmaasuqo natiijada goobaha codbixinta, ama wax-is-daba marin ku kaca, waxa uu galay danbi, waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 sanno ilaa 5 sanno oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,000/= ilaa 5,000,000/= oo Somaliland Shilin ah.

7. Hawlwadeen kasta oo si ula kac ah u burburiya, qariya, ama baabiiya waraaqaha codbixinta, najiitada codbixinta, ama qalabka goobta codbixinta waxa uu galay danbi waxana uu mutaysanayaa ciqaab dhan hal sanno ilaa laba sanno oo xadhig ah, ama/iyo ganaax lacageed oo dhan 1,000,0000/= ilaa 3,000,000/= oo Shilin.

## QAYBTA 13AAD
## QODOBO QUBANE AH

### Qodobka 68aad
### Xeer-nidaamiye

Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer-nidaamiye, xeerar anshax, habraacyo, hagaha tababarka (training manuals), wacyigalino hannanka doorashooyinka oo lagu hirgalinayo, laguna faafaahinayo Xeerkani iyo doorashooyinka, kuwaas oon ka hor imaanayn Xeerkan.

### QODOBKA 69aad
### Laalid

Waxa halkan lagu tirtiray qodob kasta oo kasoo horjeeda Qodobada wax-ka-bedelkani iyo isku-dhafkani, oo kusoo baxay Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golyaasha Deegaanada ee Xeer Lr. 20/2001 iyo wax ka beddaladiisa/kaabistiisa iyo lifaaqyadiisa 1aad, 2aad, 3aad, 4aad, iyo 5aad.

### Qodobka 70aad
### Dhaqangal

Xeerkani (Isku-dhafka iyo Wax ka Beddelka ah) waxauu dhaqangelayaa marka ay ansixiyaan goleyaasha sharci dejintu. Madaxweynuhu uu saxeexo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JSL.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle**<br>**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**<br>________________________ | **Baashe Maxamed Faarax**<br>**Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ahna Ku-simaha Gudoomiyaha G/Wakiilada JSL**<br>________________________ |

| | |
|---|---|
| **REPUBLIC OF SOMALILAND** | **JAMHUURIYADDA SOMALILAND** |
| **NATIONAL ELECTORAL COMMISSION** | **GUDDIDA DOORASHOOYINKA QARANKA** |

**Habraaca Xalinta Cabashooyinka Iyo Muranada Doorashada Madaxtooyada Ee 20I7**

*(Waxaan nuqulkan Habraacan ku daray Tusmodan Qodobadiisa)*

**Tusmada Habraaca**

**ARAR**

**QAYBTA KOOWAAD: QODOBO HOR-DHAC AH**
Qodobka 1aad: Magaca Habraaca
Qodobka 2aad: Mabaadiida Habraaca
Qodobka 3aad: Erey Bixin
Qodobka 4aad: Xiliga Cabashada Iyo Muranada La Soo Gudbiyo Iyo Cida U Xil Saaran

**QAYBTA LABAAD: NOOCA CABASHADA IYO AWOODA**
Qodobka 5aad: Cabashooyinka Doorashada Ka Horeeya
Qodobka 6aad: Foomka Cabashooyinka
Qodobka 7aad: Go'aan Ka Gaadhida Cabashada Ee Gudida Ilaalinta Anshaxa
Qodobka 8aad: Cabashooyinka Loo Gudbinayo Komishanka Doorashooyiinka Ee Heer Qaran (Doorashada Ka Hor)

**QAYBTA SADEXAAD: CABASHOOYINKA MAALINTA COD-BIXINTA EE LA XIDHIIDHA DOORASHADA IYO TIRINTA CODADKA**
Qodobka 9aad: Cabashooyinka Fudud
Qodobka 10: Cabashooyinka Culus

**QAYBTA AFRAAD: MUDDOOYINKA LAGU GUDBINAYO CABASHOOYINKA LA XIDIDIDHA NATIJADA DOORASHADA AMA TIRINTA CODADKA**
Qodobka 11aad: Mudada Cabashooyinka Gooobta
Qodobka 13aad: Mudada Cabashooyinka Loo Gudbinayo Iieer Gobol
Qodobka 14aad: Mudada Cabashooyinka Gaarka Ah
Qodobka 15aad: Mudada Cabashooyinka Loo (*Gudbinyayo)* Komishanka Heer Qaran
Qodobka 16aad: Mudada Cabashooyinka Loo Gudbinayo Maxkamada Sare

**QAYBTA SHANAAD: CIDDA CABASHO SOO GUDBIN KARTA**
Qodobka 17aad: Cabashooyinka Muwaadinka
Qodobka I8aad: Cabashada Wakiilada Xisbiyada
Qodobka 19aad: Cabashada Mushaiuxiinta

**QAYBTA LIXAAD:**
Qodobka 20aad: Shuruudaha Laga Doonayo Cabashada

**QAYBTA TODOBAAD**
Qodobka 21aad: Baadista Cabashada
Qodobka 22aad: Cabashooyinka Fudud
Qodobka 23aad: Cabashooyinka Culus
Qodobka 24aad: Baadhida Iyo Go'aaminta Cabashada
Qodobka 25aad: Foomamka Baadhista Iyo Go'aanada Cabashada
Qodobka 26aad: Mudada Go'aan Gaadhida
Qodobka 27aad: Tirtirida Natiijada Sanduuqa
Qodobka 28aad: Xumaanshaha Waraaqaha
Qodobka 29aad: Waraaaqaha Lagu Muransan Yahay

**QAYBTA SIDEEDAAD: QODOBO KALA DUWAN**
Qodobka 30aad: Ciqaabta Lyo Xadgudubyadda
Qodobka 31aad: Cabashooyinka Been Abuurka Ah, Aan Wadan Cadaymo Ku Filan, Ama Waqtigoodii Lagala Dib-Dhacay
Qodobka 32aad: Fasiraada Hab-Raaca
Qodobka 33aad: Wax-Ka-Bedal
Qodobka 34aad: Dhaqangal

---

Tixraac: KDQ/XK/148/2017 Taariikh: 15/10/2017

**<u>Habraaca Xalinta Cabashooyinka iyo Muranada Doorashada Madaxtooyada ee 20I7</u>**
**<u>(Electoral Complaints and Disputes Resolution Procedures 2017)</u>**

**ARAR**

**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKU:**

Iyaga oo Tixraacaya Qodobka 15aad, Farqadiisa 7aad, oo Komishanka Doorashooyinka u awood siinaysa in ay go'aan ka gaadhaan cabashooyinka iyo muranada la xidhiidha doorashada ee ka soo gaadha xafiisyada hoos yimaada.

Iyaga oo Tixraacaya Qodobka 15aad Farqadiisa 12aad iyo Qodobka 68aad oo Komishanka Doorashooyinka u awood siinaya in ay soo saaraan xeer-nidaamiye, hab-raacyo, go'aano, xeerar anshax oon ka hor imaanayn Xeerka Doorashada Madaxtooyadda iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2017.

Iyaga oo ku xisaabtamaya ahmiyadda wayn ee ay qarankan Jamhuuriyada Somaliland u leedahay doorashada Madaxtooyadda ee 2017, oo ku dhacda nidaam hufan, oo ka madhan musuqmaasuq, cabsi-gelin, laaluush, eex, isla markaana waafaqsan Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2017, Dastuurka Qaranka JSL, Xeerarka kale ee khuseeya doorashooyinka iyo xeerarka hab-dhaqanka.

Iyaga oo ogsoon waajibka qaran ee ka saaran liiltirka iyo qabyo-tirka habraaca loo

raaci doono soo gudbinta, qiimaynta, baadhista, iyo go'aan ka gaadhista cabashooyinka iyo muranada la xidhiidha doorashooyinka Madaxtooyada ee sanadka 2017. Taas oo ay waajib tahay in si deg-deg ah, oo hubsiimo leh, dhexdhexaad ah, cadaalad ah, isku mid ah, loona siman yahay looga go'aan gaadho.

Iyaga oo qirsan cawaaqibka ay yeelan karto hanaan doorasho oo aan loo marin habraaca sharci ee u dejisan, taas oo xagal daacin karta amniga, nabad-gelyadda, iyo madaxbanaanida JSL.

Iyaga oo tixgelinaya talooyinka iyo soo jeedinta la taliyaha Sharci ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

Iyaga oo tixraacaya Qodobka 68aad ee Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lambar. 20/2001) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2017.

Waxa ay soo saareen Habraaca Xalinta Cabashooyinka iyo muranada la xidhiidha Doorashada Madaxtooyada ee 2017 ka.

**ALLAA MAHAD LEH**

**ENG. ABDULQAADIR IIMAN WARSAME**
**GUDDOOMIYAHA KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA**

---

## QAYBTA KOOWAAD: QODOBO HOR-DHAC AH

### QODOBKA 1AAD: MAGACA HABRAACA

Habraacani Waxa Loogu Yeedhayaa Habraaca Xalinta Cabashooyinka iyo Muranada Doorashada Madaxtooyada ee 2017.

### QODOBKA 2AAD: MABAADIIDA HABRAACA

Mabaadiida Guud ee Habraacani ka duulayaa waa:

1. Xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta Jamhuuriyadda Somaliland uu u damaanad qaaday Dastuurka Qaranka JSL, sida ku cad Qodobka 22aad ee Dastuurka Qaranka xuquuqdaasi oo ah, xuquuqda siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo xuquuqda doorashada, xuquuqdaasi oo ay sidoo kale damaanad qaadayaan xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ee Umadaha Midoobay, oo waafaqsan Dastuurka;

2. In Ia qabto doorasho xor iyo xalaal ah, hufan, daah-furan, sugan oo la jaanqaadaysa heerarka caalamiga ah ee lagu qiimeeyo doorashooyinka. Taas oo ah masuuliyada saaran Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee madaxa banaan.

3. In cabashooyin ka iyo muranada kasoo baxa doorashooyinka looga go'aan gaadho si

deg- degsiimo leh, cadaalad ku dhisan, loo siman yahay, si isku mid ah loogu dhaqmo, isla markaana waafaqsan Sharciga iyo Dastuurka JSL.

4. Iyada oo laga duulayo in muwaadiniinta loo suurtogeliyo in ay gutaan oo adeegsadaan xuquuqdaasi doorashada, iyo in doorashadaasi ku dhacdo sifo xor iyo xalaal ah oo ka madhan cabsi-gelin, boob, dagaal, musuqmaasuq, laaluush, iyo saamayn aan haboonayn. Komishanka Doorashooyinku waxa uu dajiyay Hab-raaca Xalinta Cabashooyinka iyo Muranada ee khuseeya doorashada, kaas oo loo mari doono xalinta muran kasta iyo cabasho kasta oo ka dhalata xiliga doorashada ka hor, doorashada dhexdeeda iyo doorashada kadib.

**QODOBKA 3AAD: EREY BIXIN**

Kalmadaha soo socda, haddii aanay nuxurka si kale ugu jirin, waxa loo qaadan doonaa sidan:

1) **Cabasho fudud (maamul)**: waxa loolajeedaa cabasho kasta oo go'aanka u danbeeya ee laga gaadhaa aanu waxba ka bedelayn natiijada Doorashada guud ahaan, isla markaana aanay ka dhalayn danbi ciqaab ahi;

2) **Cabasho Culus**: waxa loolajeedaa cabashooyinka iyo muranadda go'aanka laga gaadho ay wax-ka-bedelayaan natiijadda Doorashda ama danbi ciqaab ahi ka dhalanayo;

3) **Cabasho/muran**: waxa loola jeedaa arji qoran (Foom) oo ay soo gudbisay cid dan ku leh, oo ka cabanaysa xad-gudub lagu sameeyay XeerkaDoorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer LR. 20/2001), Xeerarka Anshaxa, iyo xeerarka kale ee khuseeya loona soo gudbiyay saraakiisha doorashada si waafaqsan Xeerarka iyo Habraacyadda, kaas oo buuxiyay shuruudaha u yaala. Cabasho waxa kale oo lagu gudbin karaa af ahaan, xaaladaha ee Habraacani ogolaaday.

4) **Xeer**: kalmadaha "Xeer" ama "Xeerka" waxa loola jeedaa Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2017.

**QODOBKA 4AAD: XILIGA CABASHADA IYO MURANADA LA SOO GUDBIYO IYO CIDA U XIL SAARAN**

1. Cabashooyinka waxa lagu kala saari doonaa:
a) Waqtiga la soo gudbiyay,
b) Cidda soo gudbisay,
c) Asbaabta ama nuxurka ay cabashaddu xanbaarsan tahay;

2. Xalinta cabashooyinka, waqtiga lasoo gudbinayo, cida soo gudbin karta cabasho, iyo shuruudaha laga doonayo waxa lagu dajin doonaa qodobada Habraacani .

**QAYBTA LABAAD: NOOCA CABASHADA IYO AWOODA**

**QODOBKA 5AAD: CABASHOOYINKA DOORASHADA KA HOREEYA**

1. Cabashooyinka ka horeeya maalinta doorashada ee khuseeya in aan lagu dhagmin Xeerka Anshaxa, Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Gol eyaasha Deegaanka (Xeer Lr. 20/ 2001) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sarneeyay 2017, oo ay ka mid nogon karaan, balse aan ku koobnayn:
a) Ololaynta maalin aanu xisbigu lahayn, ama olole aan wagtigiisa la gaadhin;
b) Googoynta waraagaha iyo jajabinta xaftisyada iyo gaadiidka xisbiyadda kale,
c) Gaadiidka ama hantida dawlada oo loo adeegsado ololayn,
d) Shaqaal e dawladeed ama xubnaha ciidanka oo gala olol e xisbi,
e) Hadalo aflagaado, nacayb, ama shakhsi weerar ah oo xisbi adeegsado;
f) Olole ku dhisan gabyaalad iyo gabiil;
g) Iyo fa] kasta oo ka dhan ah Xeerka Anshaxa Xisbiyada Siyaasada;

2) Cabashooyinka ku xusan firqada laad ee qodobkan, Waxa xalintooda loo raaci doonaa si waafaqsan Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada, waxana awood u leh daba-galka iyo xaqiijintooda Guddida Tiaalinta Anshaxa Doorashada, iyaga oo raacaya Xeerka Hab-dhaganka waxa ay Komishanka usoo gudbin doonaan talaabada anshax marineed ee ay ka gaadayaan;

## QODOBKA 6AAD: FOOMKA CABASHOOYINKA

Cabashooyinka ku xusan Qodobka 5aad waa in ay qoraal ahaan xisbigu ku soo gudbiyaa, laguna soo hagaajiyaa Guddida Ilaalinta Anshaxa, waana in lagu cadeeyaa cida laga cabanayo, asbaabta lagaga cabanayo, taariikhda uu falku dhacay, cida ku lug lahayd, iyo cadaymaha loo hayo.

## QODOBKA 7AAD: GO'AAN KA GAADHIDA CABASHADA EE GUDIDA ILAALINTA ANSHAXA

1 . Guddida Ilaalinta Anshuxu marka ay hesho cabashada, iyo cadaymaha loo hayo, isla markaana si madax banaan iyaga oo adeegsanaya wakiiladooda ay u xaqiijiyaan falka dhacay iyo heerka uu gaadhsiisan yal1ay, waxa ay muddo dhan saddex cisho ku gaadhi doonaan go'aan ay wax kaga qabanayaan, si waafagsan Qodobka 25aad ee Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda ee Doorashada Madaxtooyada ee 2017.

2. Haddii cabashadu khuseyso shaqaale dawladeed oo olole xisbi galay, ama xubnaha ciidamada oo olole xisbi galay, waxa loo raaci doonaa xeerarkooda gaarka ah ee u yeela ee dhaqangalka ah.

## QODOBKA 8AAD:CABASHOOYINKA LOO GUDBINAYO KOMISHANKA DOORASHOOYIINKA EE HEER QARAN (DOORASHADA KA HOR)

l. Cabashooyinka ku saabsan Diiwaanka Codbixiyaha ee kama danbaysta ah, soo saarista liiska cod-bixiyayaasha, goobaha cod-bixinta, murashixiinta xisbiyada, hawlaha ku saabsan diyaar-garawga farsammo ee doorashada, agabka doorashada, waxa loo soo gudbin doonaa Komishanka Doorashooyinka ee heer Qaran, kaas oo leh awooda ka go'aan gaadhista u danbaysa,

2. Go'aanka KDG waxa rafcaan looga qaadan karaa maxkamadda awooda u leh.

## QAYBTA SADEXAAD: CABASHOOYINKA MAALINTA COD-BIXINTA EE LA XIDHIIDHA DOORASHADA IYO TIRINTA CODADKA

### QODOBKA 9aad: CABASHOOYINKA FUDUD

l. Cabashooyinka fudud sida kuwa la xidhiidha arrimaha maamulka goobta cod-bixinta sida habsami u socodka shaqada goobta, safafka ay codbixiyayaasha, deg-degsiimadda shaqaalaha, waxa loo gudbin karaa Guddoomiyaha Goobta cod-bixinta oo ay waajib ku tahay in uu sida ugu deg-deg siimaha badan waxa uga qabto, cabashooyinka noocaasi ah waxa lagu soo gudbin karaa af ahaan ama qoraal ahaan, mar walba, Guddoomiyuhu waa in uu diiwaangeliyaa, isla markaana xusaa go'aanka iyo talaabada uu ka qaaday cabashada soo gaadhay, haddii Guddoomiyaha goobtu wax ka qaban waayo cabashooyinkaasi waxa loo soo bandhigi doonaa Komishanka Degmadda.

2. Cabashooyinkaasi la xidhiidha maalinta codbixinta ee khuseeya maamulka goobta cod-bixinta, waxa lm jiraya, balse aan lm koobnayn:
a) Diyaarinta iyo hawl-gelinta goobaha cod-bixinta,
b) Nidaamka safafka goobta,
c) Ololе ka socda goobta codbixinta maalinta cod-bixinta,
d) Goobta cod-bixinta oo aan shaqayn ama habsan ku jiro,
e) Goobta codbixinta oo waqtigeedii waqti aan ahayn shaqaynaysa;

3. Waxa looga caban karaa Guddoomiyaha Goobta Cod-bixinta oo ay tahay in uu sida ugu dhakhsaha badan wax uga qabto, haddii uu si deg-deg ah wax uga qaban waayo, waxa loo gudbinayaa Komishanka Heer Degmo ama Kormeerka Degmadda si ay wax uga qabtaan;

### QODOBKA 10: CABASHOOYINKA CULUS

1. Cabashooyinka la xidhiidha musuqmaasuqa tirinta codadka, ku shubasho waraaqaha soo hadhay, ama muranada ku saabsan waraaqaha lagu muransan yahay, waxa loo soo gudbinayaa Komishanka Heer Degmo, haddii markaa ay ku qancaan in loo hayo cadaymo ku filan, waxa ay qaadi doonaan talaabada lagama maarmaanka ah, waxana ay ka gaadhi doonaan go'aan sababaysan, haddiise la cadayn kari waayo, waa in ay cabashadaasi xidhaan;

2. Cid kasta oo ku qanci wayda go'aanka Komishanka Degmaddu waxa uu cabasho usoo gudbin doonaa Komishanka Heer Gobol, oo iyaguna marka ay dib-u-eegis iyo qiimayn ku sameeyaan cabashada loo soo gudbiyay, go'aanka degmadda, cadaymaha la hayo, go'aan ka gaadhi doona;

3. Haddii lagu qanci waayo go'aanka Komishanka ee heer Gobol waxa cabashadaasi loo gubdin doonaa Komishanka Heer Qaran, kuwaas oo dib-u-eegis iyo qiimayn ku samayn doonaa, cabashada, cadaymaha, iyo go'aanada laga gaadhay inta aanay soo saarin natiijadda hor-dhaca ah;

## QAYBTA AFRAAD: MUDDOOYINKA LAGU GUDBINAYO CABASHOOYINKA LA XIDIDIDHA NATIJADA DOORASHADA AMA TIRINTA CODADKA

**QODOBKA 11AAD: MUDADA CABASHOOYINKA GOOOBTA**

1. Cabashooyinka ku saabsan natiijada doorashada goobta, ama tirinta codadka goobta waxa loo gudbin karaa Guddoomiyaha goobta cod-bixineed,

2. Cabashooyinkaasi waxa la soo gudbin karaa ugu danbayn, marka lagu dhawaaqo natiijada cod-bixinta ee goobta, agabka goobtana aan la xidhin,

3. Haddii waqtigaasi lagala dib dhaco Guddoomiyaha goobtu wax cabasho qaban maayo.

**QODOBKA 12: MUDADA CABASHOOYINKA LOO GUDBINAYO DEGMADA**

Cabashooyinka loo soo gudbinayo heer degmo waxa bilaabmi karaan marka degmaddu hesho agabka iyo qalabka ku xusan Qodobka 55aad ee Xeerka Doorashada, waxaana loo gudbinayaa ugu danbayn inta aanay degmaddu dhamays tirin hawsha ku xusan Qodobka 61aad ee Xeerka, haddii waqtigaasi lagala dib dhaco Dagmaddu cabasho qaban mayso.

**QODOBKA 13AAD: MUDADA CABASHOOYINKA LOO GUDBINAYO IIEER GOBOL**

l. Cabashooyinka loo gudbinayo heer gobol waxa ay ka bilaabmayaan marka uu helo qoraalada raad-raaca ee uu usoo gudbiyay xafliska doorashada ee degmaddu, waxaana loo soo gubdin karaa inta gobolku aanu dhamays tirin shaqada xafiiska doorashada gobolka ee ku xusan Qodobka 62aad ee Xeerka Doorashada.

2. Komishanka Heer Gobol waxa uu dacwad goob ka timid tixgelin karaa oo keliya haddii wakiilka xisbiga si ula kac ah goobta lagaga yimaado, isla markaana u suurto geli waydo in uu la xidhiidha Wakiilkiisa heer Degmo, mudadii degmadu gacanta ku haysay cabashooyinka.

**QODOBKA 14aad: MUDADA CABASHOOYINKA GAARKA AH**

1. Iyada oon loo eegayn Qodobada sare ee Ilaad, 12aad, xaaladahan gaarka ah ee soo socda, wakiilka xisbiga ee degmaddu waxa uusoo gudbin karaa cabashadiisa degmadda inta aan sanduuqa iyo agabku soo gaadhin degmadda, xaaladahaasi waxa ka mid ah:

a) Haddii wakiilka xisbiga laga eryo/caydhiyo goobta uu ku qoran yahay iyada oo aysan jirin sabab sharci ama macquul ah oo la garwaaqsan karo; cabashadaasi waxa ay degmadda gaadhi kartaa inta lagu gudajiro isla maalinta cod-bixin ta;
b) Iyada oo laga taxadirayo in Wakiil xisbi goobta uu ku qoran yahay laga saaro, wakiil xisbi waxa kaliya oo goobta uu sharci ahaan ugu qoran yahay laga saari karaa, haddii uu dhex dagaalamo goobta, isla markaana ka hor istaago cod- bixiyayaashu in ay codkooda dhiibtaan.
c) Xaalada sare ku xusan waa in sida ugu deg-dega badan loola xidhiidhaa Wakiilka Xisbiga ee Degmadda iyo Komishanka Heer Degmo si ay go'aan uga gaadhaan.
d) Haddii sanduuqa cob-bixinta xoog goobta looga qaato, waa in cabashadaasi Komishanka heer Degmo, Gobol iyo Qaranba loo soo gudbiyo sida ugu dhakhsaha

badan, uguna suurtogashan, isla marka hawshaasi dhacdo;

e) Haddii wakiilka xisbiga loo dildo in uu soo gudbiyo cabasho sharci ah oo uu ka qabo goobta uu ka hawlgalayo.

## QODOBKA 15AAD: MUDADA CABASHOOYINKA LOO (*GUDBINYAYO)* KOMISHANKA HEER QARAN

Cabashooyinka loo soo gudbinayo Komishanka Heer Qaran waxa ay ka bilaabmayaan marka Komishanku helo qalabka iyo qoraalada raad-raaca ah ee ku xusan Qodobka 59aad ee Xeerka Doorashada, waxaanay ku eg yihiin marka lagu dhawaaqo natlijooyinka ku-meel gaadhka ah doorashada Madaxtooyada iyo ku-xigeenka.

## QODOBKA 16AAD: MUDADA CABASHOOYINKA LOO GUDBINAYO MAXKAMADA SARE

1) Dacwadaha la xidhiidha nidaamka doorashada loo qabtay ama natiijada hordhaca ah waxa loo gudbin doonaa Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland, taas oo ka gaadhi doonta go'aan kama danbays ah;

2) Dacwadaha ku saabsan doorashooyinka madaxweynaha iyo madaxweyne lru xigeenka ee lagaga cabanayo natiijada ku-meel gaadhka ah ee Komishanka waa in loo gudbiyaa Maxkmadda Sare muddo dhan todoba cisho gudahood oo ka bilaabmaysa marka lagu dhawaaqo Natiijada Doorashada. Haddii waqtigaa lagu gudbin waayo dacwadaasi lama tixgelin doono.

3) Iyadda oo lagu xisaabtamayo waqtiga iyo ka go'aan gaadhista arrimaha muhimka ah, waa in muhiimad gaar ah la siiyaa in cabashooyinka lasoo gudbiyo sida ugu degdegsiimaha badan loo qiimeeyo, loo derso, go'aana looga gaadho;

4) Cabasho kasta oo la soo gudbiyo, waa in ay ahaataa qoraal, kuna cadahay tafaasiisha iyo ciwaanada cida cabashada soo gudbisay, falka laga cabanayo, taariikhda uu falku dhacay, goobta uu ka dhacay, cida falkaasi lagu eedaynayo (ku lugta leh), iyo xalka cida cabanaysaa doonayso, waa in ay weheliyaan cadaymo ku filan oo lagu go'aan qaadan karo.

5) Xilka cadayntu (burden of proof) waxa uu saaran yahay cida soo gudbinaysa cabashadu in ay keento cadayn rasmi ah oo lagu qanci karo, sugan, lehna raad-raac saxan;

## QAYBTA SHANAAD: <u>CIDDA CABASHO SOO GUDBIN KARTA</u>

## QODOBKA 17AAD: CABASHOOYINKA MUWAADINKA

1. Cid kasta oo cabasho soo gudbinaysaa waa in ay dan ku leedahay cabashada (vested interest); iyada oo qodobkan la raacayo waxa cabasho soo gudbin kara:

2. Muwaadin xaq u leh in uu codeeyo, oo diiwaangashan, kaas oo ka cabanaya:

a) In loo diiday in uu codeeyo,

b) In la iska hortaagay, la hadiday, in uu codeeyo,

c) In aan loo suurtogelin in uu codeeyo sababo la xidhiidha nidaamka doorashada loo maamulay awgood;

3. Cashooyinka ay soo gudbinayaan muwaadiniintu waa in Guddoomiyaha goobta cod-bixintu xil iska saaraa inta suurto gal ah in uu goobta ku xaliyo.

**QODOBKA I8AAD: CABASHADA WAKIILADA XISBIYADA**

1) Cabasho waxa kale oo soo gudbin kara wakiil xisbi ee goob, degmo, gobol ama xarunta Guud.

2) Wakiilka xisbiga ee la kulma xaadaladaha ay ka midka yihiin, kuwan soo socdaa, waxa uu xaq u leeyahay in uu soo gudbiyo cabasho:

a) Agabka codbixinta oo aan dhamayn,
b) Agabka codbixinta oo aan lahayn lixgaxii loogu talo-galay;
c) Cod-bixiyayaasha goobta ka diiwaangashan oo loo diidayo in ay codeeyaan, la hadidayo, laga hor-istaagayo, in ama la laaluushayo, si ay cid gaar ah ugu codeeyaan;
d) Goobta cod-bixinta oo ay ka jirto amni darro khatar galinaysa cod-bixiyayaasha;
e) Hawl-wadeenada goobta cod-bixinta oon si habsarni leh aan shaqadooda u gudanayn, habsaan aan loo baahnayn lm jiro;
f) Musuqmaasuq iyo ku-shubasho cod oo ka dhacda goob cod-bixineed;
g) Tirinta codadka oo la qalday ama si badheedha ah la isku daba mariyay;
h) Goobta oon shaqaynayn saacadihii loogu talo-galay;
i) Goobta cod-bixinta oo furan saacado aan loogu talo-galin;
j) Iyo wax kasta oo ka hor imaanaya Xeerka;

**QODOBKA 19AAD: CABASHADA MUSHAIUXIINTA**

1. Cabasho waxa soo gudbin kara Murashax xisbi ama xisbi oo ka cabanaya:

a) Inaan doorashada loo maamulin hab-cadaalad iyo dhex-dhexaadnimo leh oo waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka (Xeer Lr. 20/2001) ee wax-ka-bedelka lagu sameeyay 2017,
b) In ay jirtay qaladaad baahsan oo ku saabsan habraaca doorshada;
c) In la garab maray Xeerarka khuseeya doorashada;
d) In doorashada si ula kac ah loogu shubtay, codadka loo buux-buuxsaday,
e) In muwaadiniinta loo diidayo in ay codeeyaan, la hadidayo, ama la dhibaataynayo;
f) In maalinta cod-bixinta uu socdo olole xisbi oo ka socda goobaha dhexdooda;
g) In aan goobaha cod-bixinta qaarkood furnayn saacadihiii loogu talo-galay;
h) In ay jirto laaluush lagu bixinayo goobaha cod-bixinta si loo saameeyo cod-bixiyayaasha;
i) Iyo wax kasta oo ka hor imaanaya Xeerka.

**QAYBTA LIXAAD:**

**QODOBKA 20AAD: SHURUUDAHA LAGA DOONAYO CABASHADA**

1. Cabasho kasta waa in ay la socotaa:

a) Magaca oo dhamays tiran, cinwaanka, telefanka gacanta ee cida soo gudbisay cabashada, haddii wakiil xisbi ama murashax uu yahay, magaca wakiilka iyo murashaxa cabashada soo gudbinaya, iyo xisbigiisa/geeda,
b) Faahfaahinta asbaabta waxyaabaha laga cabanayo, taariikhda ay dhaceen, goobta,
cida saamaynta ku leh,
c) Cadaymaha lagama maarmaanka ah ee lagu xaqiijinayo/sugayo cabashada, sida dakumenti qoran, sawir, markhaati la heli karo,
d) Dalabaadka iyo waxyaabaha uu doonayo cida cabashada soo gudbisay oo sababaysan.

2. Komishanka Doorashooyinka ee Qaranku waxa ay goob kasta oo cod-bixineed, degmo doorasho, iyo gobol doorasho dhigi doonaan foomamka cabashada, oo leh nuqulo kala duduwan, oo ay ku cadahay nuqul kasta cida la siinayo.

3. Cid kasta oo cabasho soo gudbinaysaa waa in ay buuxiyaan foomamka cabashada, isla markaana waa in ay qaataan nuqul ka mid ah foomka cabashada ee ay soo gudbiyeen.

4. Cadaymaha loo hayo cabashada, asbaabta iyo falka oo sababaysan, waxa lagu soo lifaaqi doonaa foomamka cabashada.

## QAYBTA TODOBAAD

## QODOBKA 2IAAD: BAADISTA CABASHADA

Inta aan go'aan laga gaadhin lana baadhin cabashada waa in la kala saaraa cabashooyinka fudud ee aan wax xidhiidha ah la lahayn ama aan wax ka bedelayn natiijada doorashada, iyo cabashooyinka culus ee wax-ka-bedelaya natiijada doorashada ama danbi ciqaab ahi ka dhalanayo.

## QODOBKA 22AAD: CABASHOOYINKA FUDUD:

1. Waxa cabasho fudud loola jeedaa sida lagu qeexay Qodobka 2aad farqadiisa 1aad ee Hab-raacan;

2. Xalinta iyo wax ka qabashada cabashooyinka fudud waxa loo raaci doonaa si waafaqsan Qodobka 9aad ee Habraacani.

## QODOBKA 23AAD: CABASHOOYINKA CULUS

1. Cabashooyinka la xidhiidha arrimaha cod-bixinta iyo tirinta, sida:
   a) Ku-shubasho, musuqmaasuq, wax-is-daba marin,
   b) Xisbi/dadweyne goob cod-bixineed xoog ku qabsaday,
   c) Tirinta codadka oo si badheedh ah loo khalday.

2. Waxa loo soo gudbin doonaa Komishanka heer degmo, cabashooyinkaasi waa in ay waafaqaaan shuruudaha laga doonayo cabashadda iyo muranadda ee ku faah-faahsan Qodobka 20aad ee Habraacani.

## QODOBKA 24AAD: BAADHIDA IYO GO'AAMINTA CABASHADA

1. Komishanka heer degmo/gobol marka ay helaan cabasho laga soo gudbiyay doorashada degmadda/gobolka, waa in ay baadhaan waxa ay cabashadu ku saabsan tahay, iyadda oo ay goob-joog yihiin wakiiladda saddexda xisbi, haddii ay lagama maarmaan tahayna waxa ay furi doonaan sanduuqa/yada cabashada laga soo gudbiyay, si ay go'aan uga gaadhaan cabashada loo soo gudbiyay.

2. Go'aanka ugu danbeeya waxa saxeexi doona Guddoomiyaha Degrnadda ay khuseyso kadib marka uu kala tashado xubnaha kale ee degmadda, waana in nuqul ka mid ah Ia siiyaa, cida cabashada soo gudbisay, iyo wakiilada xisbiyadda kale degmadda u jooga.

3. Komishanka heer degmo/ gobol ama qaran waa in ay baadhaan kana baaraan degaan cadaymaha loo hayo cabashooyinka sare ku xusan, isla markaana si madax banaan u xaqiijiyaan jiritaanka cabashada ama muranka, haddii ay u waayaan wax cadaynaya sheegashada dhinaca, dacwada way iska xidhi doonaan.

4. Haddii ay hayaan cadaymo lagu qanci karo, waxa ay hubin doonaan in cadaymuhu yihiin kuwo sugan oo sax ah, lana xaqiijin karo.

5. Cabasho kasta oo waqtigeeda lagala dib-dhaco lama tixgelin doono waana waxba kama
jiraan.

## QODOBKA 25AAD: FOOMAMKA BAADHISTA IYO GO'AANADA CABASHADA

1. Komishanka Heer Gobol iyo Degrno waa in ay buuxiyaan Foomamka loogu talo-galay ee baadhista, warbixinta iyo go'aanka, iyaga oo qoraal ahaana ku soo gudbinaya, soona raacin doona sanduuqa.

2. Foomamka Baadhista Cabashada, Go'aanka, iyo Diiwaanka cabashada maalinlaha ah oo uu diyaariyay Komishanka Doorashooyinku ayaa degmo/ gobol kasta Ia dhigi doonaa.

## QODOBKA 26AAD: MUDADA GO'AAN GAADHIDA

1. Komishanka heer degmo, gobol, iyo qaran waa in ay go'aankooda sida ugu dhakhsaha badan u gaadhaan, isla markaana sida ugu baboon u baadhaan, si kasta ha ahaatee, go'aan ka gaadhista cabashooyinka iyo muranada Ia xidhiidha doorashada waa in Komishanka Heer Degmo/Gobol ku soo saaraa ugu badnaan hal maalin gudaheed, oo ka bilaabmaysa marka loosoo gudbiyo.

2. Go'aan kasta oo laga gaadho cabasho culus waa in !ala socodsiiyaa cida soo gudbisay, isla markaana waa in nuqul loo soo diraa Komishanka Doorashooyinka ee heer Qaran.

## QODOBKA 27AAD: TIRTIRIDA NATIIJADA SANDUUQA

1. Komishanka Doorashooyinka ee Heer Degmo, Gobol ama Qaran waxa kaliya oo ay natiijadda sanduuq cod-bixineed gabi ahaan tir-tiri karaan, haddii si shaki la'aan ah loo cadeeyo, xaaladahan soo socda:

a) In uu jiro musuqmaasuq ku saabsan ku shubasho, codadkii soo hadhay ah, kaas oo loo baahan yahay in loo helo cadaymo sugan oo shaki la'aan lagu qanci karo;

b) Sanduuqaasi oo xoog lagaga qaatay goobta cod-bixinta laguna tagri-falay habkii cod-bixinta, si badheedh ahna loo buux-buuxsaday codadka goobta;

c) Xaaladaha ku xusan farqada (A iyo B), waa in lambarka Kaadhka Codbixinta ee hubaal celintu (security check digit) aanu ku jirin oon lagu qorin liiska cod-bixiyayaasha, oo ah ugu yaraan 5% wadarta guud ee gooobta ka codaysay si loogu qanco ama aanay lahayn saxeexa suulka;

d) Sanduuqaasi oo la cadeeyo in codadka ku jiraa ka badan yihiin intii ka diiwaangashanayd goobtaasi, iyo hawl-wadeenada sharcigu u ogolaaday inay goobta ka codeeyaan, taas oo marka la hubiyo aan ahayn qalad madbaci ah, oo qoraalka tirada ku saabsan balse uu yahay in si ula kac iyo badheedha ah loogu daray codad dheeraad ah oon ka diiwaangashanayn goobta;

e) Sanduuqa oo ay ka muuqato raad si shaki la'aan ah u muujinaya in lagu soo shubtay, sida diiwaanka codbixiyayaasha oo aan saxeex iyo suul midna lahayn, lambarka hubaal celinta ah dhamaan aan lagu qorin liistooyinka, waraaqaha cod-bixinta oo sidoodii iskugu xidhan oo lagu riday sanduuqa cod-bixinta;

f) Sanduuqa codbixintu marka uu goobta ka yimaado inta aanu gaadhin degmadda oo lagu tagri falo, lana cadeeyo in dib loo furay, codadkii soo hadhayna lagu shubay, xaaladan waxa lagu cadayn karaa asbaabta soo socota, balse kuma koobna:

i. Foomka Natiijada Cod-bixinta (D1) oo wax laga badelay lana masmasaxay, kana duwan kii goobta ee xisbiyada la siiyay,

ii. In lambarkii taxanaha ahaa ee lingaxa oo si badheedh ah oo musuq looga danleeyahay loo gooyay (seal tembered),

iii. Liistada cod-bixiyayaasha aan lagu qorin lambarka hubaal-celinta,

iv. Xariijin aan laga talaabin magacyada cod-bixiyayaasha, suulka ama saxeexa codbixiyayaashu oo ka maqan, ama been abuur ah taas oo ugu yaraan ah tirada codbixiyaasha ee lagu doodayo in codkooda oo soo hadhay lagu shubtay,

2. Dhamaan xaaladaha kale, een ahayn kuwa ku xusan farqadda sare Komishanku ma tirtiri karo natiijadda goob cod-bixineed gabi-ahaanba.

## QODOBKA 28AAD: XUMAANSHAHA WARAAQAHA

Warqad cod-bixineed waxa loo tixgelin doonaa in ay xumaatay xaaladahan soo socda:

a) Waraaqaha cod-bixintu waxa ay noqonayaan waxba kama jiraan:

i. Haddii ay ka duwan yihiin waraaqaha cod-bixinta ee Komishanku u gartay in doorashada loo isticmaalo;

ii. Haddii aanay ku oolin shaanbadda goobta cod-bixintu;

iii. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xirfad leh loo agaamisay oo aan loogu talo-galin in lagu qoro;

iv. Haddii warqadda cod-bixinta aanay si fucan uga muuqan xisbiga codka la siiyay oo la aqoonsan kari waayo;

v. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadiyay astaan hal xisbi wax ka badan;

b) Iyada oo lagu xisaabtamayo in ay jiraan dad badan oo ka tirsan cod-

bixiyayaasha oo aan waxna qorin, waxna akhriyin, calaamadin warqada cod-bixinta waxa loo raaci doonaa nidaamkan soo socda:

i. Cod-bixiyaha waxa loo oggol yahay in uu calaamadiyo meel kasta oo ka mid ah qaybta warqadda cod-bixinta ee loo gaar yeelay Xisbiga uu codkiisa siinayo. Calaamad kasta oo uu cod-bixiye ku qoro warqadda cod-bixinta, sida dhibic, isku- tallaab, xarriijin, sumad, calaamadda saxnimada, waa la aqbalayaa, illaa inta ay calaamaddu si bayaan ah ugu jirto qaybta warqadda ee Xisbi u gaar ah, isla markaana si fiican loo arki karaya

ii. Haddii calaamadintu ay cod-bixiye si weyn ugala gudubto qaybta warqadda ee Xisbi u gaar ah codkaa waxa lagu tirinayaa wax-kama-jiraan. Si kastaba ha ahaatee, codka waxa loo tirinayaa mid sax ah oo la qaato, haddii ay muuqato in ku-tala-galka cod-bixiyuhu ahaa in uu Xisbi gaar ah codka siiyo oo tusaale ahaan, ay calaamadda inteeda badani ku gudo-jirto qayb warqadda cod-bixinta ah oo Xisbi u gaar ah, in yar se ay ku dacal-dhawday qaybta warqadda ee Xisbi kale.

**QODOBKA 29AAD: WARAAAQAHA LAGU MURANSAN YAHAY**

1) Codku waxa uu waxba kamajiraan noqon karaa marka go'aan wadajir ah ay isku raacaan hawl-wadeenada iyo wakiilada axsaabta ee goobta cod-bixintu. Haddiiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa warqadaasi cod-bixineed loo aqoonsan doonaa kuwo lagu muransan yahay.

2) Xafiiska doorashada ee degmadda ayaa qaraar ka gaadhi kara waraaqaha cod-bixinta inta ee lagu muransan yahay.

3) Go'aanka ay ka gaadhaan Komishanka Heer Degmo waraaqaha lagu muransan yahay, waa in uu qornaadaa, saxeexnaadaa, isla markaana lahaadaa shaanbada degmadda,

4) Go'aankaasi iyo natiijada uu wax ka bedelay ee goobta waa in loo soo gudbiyaa Komishanka Heer Gobol, kuwaas oo haddii aanay jirin dacwad ka dhan ah go'aanku diwaangelin doona.

5) Haddii lagu qanci waayo go'aanka degmadda waxa cabasho loo gudbin karaa gobolka ay degmadu ka tirsan tahay; haddii gobolka lagu qanci waayana waxa cabasho loo gudbin doonaa Komishanka Doorashooyinka ee heer qaran.

## QAYBTA SIDEEDAAD: QODOBO KALA DUWAN

### QODOBKA 30AAD: CIQAABTA lYO XADGUDUBYADDA

Dhamaan danbiyada ciqaabi ka dhalanayso ee uu jideynayo Qodobka 67aad ee Xeerku, ama xeerarka kale ee dhaqangalka ah ee Somaliland, waxa loo raaci doonaa si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta waxana loo gudbin doonaa maxkamadda awooda u leh, si waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.

### QODOBKA 31AAD: CABASHOOYINKA BEEN ABUURKA AH, AAN WADAN CADAYMO KU FILAN, AMA WAQTIGOODII LAGALA DIB-DHACAY

1. Cabasbooyinku waa in ay noqdaan kuwo ku dhisan xaqiiqo dbab ah, lehna cadaymo sugan, isla markaana la soo gudbiyay waqtigoodii.

2. Cabashooyinka haddii ay dhaafaan waqtigoodii lagama qaban doono cida soo gudbinaysa, waana in marka horeba laga diidaa.

**QODOBKA 32AAD: FASIRAADA HAB-RAACA**

Haddii qodob, farqad ama weedh ka mid ah habraacani ay si uun uga hortimaad Xeer dhaqangal ah ama dhaqangalkeeda sifo sharciya ay u durto maxkamad awood u lehi, qodobada kale ee Habraacani sidooda ayay u jiri doonaan dhaqangalna u ahaan doonaan.

**QODOBKA 33AAD: WAX-KA-BEDAL**

Komishanka Doorashooyinka ayaa leh awooda wax-ka-bedelka, ku darida iyo ka saarida Habraacani.

**QODOBKA 34AAD: DHAQANGAL**

Habraacani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan xubnaha Komishanka Doorashooyinka ee Qaranku, Guddoomiyuhuna saxeexo, waxana lagu dhaqi doonaa doorashooyinka madaxtooyada ee 2017.

**Lifaaqyadda:**

1. Foomka Cabashada;
2. Foomka Baadhista Cabashada;
3. Foomka Go'aanka Cabashada;
4. Foomka Warbixinta Cabashooyinka

| | |
|---|---|
| **REPUBLIC OF SOMALILAND** | ***JAMHUURIYADDA SOMALILAND*** |
| **NATIONAL ELECTORAL COMMISSION** | ***GUDDIDA DOORASHOOYINKA QARANKA*** |

**Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda Ee Doorashada Madaxtooyada (Code Of Conduct)**
(***Waxaan ku kordhinay Tusmada Xeerka Habdhaqanka)***

**Tusmada Xeerkn Hab-dhaqanka**

**AARAAR**

**QAYBTA KOWAAD**
Qodobka 1aad: Cinwaan Gaaban
Qodobka 2aad: Qeex1taan
Qodobka 2aad: Qeexitaan
Qodobka 3aad: Dabbaqaadda Xeerka Hab-Dhaqan
Qodobka 4aad: Mabaadii'da Guud
Qodobka 5aad: Ujeeddada Xeerka Hab-Dhaqanka
Qodobka 6aad: Ku Dhaqanka Xeerka Hab-Dhaqanka
Qodobka 7aad: Xuquuqda Doorasho Ee Didnacyada
Qodobka 8aad: Maamulka Ololaha Doorashada
Qodobka 9aad: Waxyaabaha Ka Reebban Xisbiyada Wakhtiga Doorashada
Qodobka 10aad: Reebbanaanta Isticmaalka Iyo Haysashada Noocyada Hubka
Qodobka 11aad: Tallaabooyinka Ka Reebban Xukuumadda
Qodobka 12aad: Dhexdhexaadnimada Hantida Iyo Adeegyada Qaranka (Neutrality Of Public Offices, Assets And Facilities)
Qodobka 13aad: Geeddi-Socodka Doorashada
Qodobka 14aad: Doorka Saxaafadda

**QAYBTA LABAAD: GUDDIDA HAWLEEDKA XISBIYADA**
Qodobka 15aad: Aasaasid
Qodobka 16aad: Shaqada Guddi Hawleedka
Qodobka 17aad: Maaliyadda Guud. Hantida Iyo Warbaahinta Dawladda

**QAYBTA SADDEXAAD**
Qodobka 18aad: Xaalado Gaar Ah
Qodobka 19aad: Nidaamka Loo Raacayo Soo Saarista Liiska Codbixiyeyaasha Ah
Qodobka 20aadd: Daabacaada Iyo Soo Saarista Liiska Codbixiyeyaasha
Qodobka 21aad: Soo Saarista Liiska Kama Danbaysta Ah
Qodobka 22aad: Xallinta Khilaafaadka Xisbiyadda (Conflict Resolution)
Qodobka 23aad: Cabashooyinka
Qodobka 24aad: Cabashooyinka Been-Abuurka Ah (Abuse Of Complaint Procedure)

**QAYBTA AFRAAD**

Qodobka 25aad: Guddida Ilaalinta Anshaxa Doorashooyinka

**QAYBTA SHANAAD**

Qodobka 26aad: Tallaabooyinka Laga Qaadayo Cidda Xeerkan Jebisa
Qodobka 27aad: Ku Dhaqanka Iyo Wax Ka Beddelka Xeerkan Hab- Dhaqan
Qodobka 28aad: Awoodda Saxeexa

---

## XEERKA HAB-DHAQANKA XISBIYADA SlYAASADDA EE DOORASHADA MADAXTOOYADA (CODE OF CONDUCT)

Ref KDQ / XK /118/017 Taar: 26/09/2011

AARAAR:

Saddexda Xisbi Siyaasadeed ee Qaranka Somaliland iyo Komishanka Doorashooyinku:

• ***Iyagoo ogsoon*** muhiimadda doorashada Madaxtooyadu ay u leedahay shacbiweynaha reer Somaliland.

• ***Iyagoo maanka ku haya*** in liiltirka iyo dhamaystirka guushu ku dheehan tahay ee geeddi socodka dimuqraadiyadeed ay waxtar weyn u leedahay qaddiyadda Madaxbannaanida Jamhuuriyadda Somaliland,

• ***Iyagoo aqoonsan*** in doorashooyin xor ah oo xalaal ah oo dalka ka dhacaa ay muftaax u yihiin kor u qaadista xorriyad iyo caddaalad taam ah oo ka taabbo-gasha gayiga Jamhuuriyadda Somaliland.

• ***Iyagoo dareensan*** khatarta iyo halista ku iman karta dimuqraadiyadda curdinka ah ee xilligan kala guurka ah ay u baahan tahay bisayl iyo dhaqan dimuquraadiyadeed oo ka hufan qabiil, gobolaysi, gacan ka hadal, caadifad, shakhsi weerar iyo nacayb.

• ***Iyagoo ogsoon*** baahida deg-degga ah ee loo qabo in la abuuro jawi suurto geliya inay qabsoonto doorasho xor ah oo xalaal ah, banyaal ah, la-xisaabtan leh, kuna dhisan doonista shacbi weynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

• ***Iyaga oo maanka ku haya*** in dalka ay ka dhacday diiwaangelin hufan oo casriya, dalkana laga suurto galiyay in muwaadin kastaa yeesho hal cod oo kaliya, si sharciga waafaqsan.

• ***Iyagoo garawsan*** in Komishanka Doorashooyinka Qaranka, Hay'adaha Cadaaladda iyo Warbaahinta Gaarka loo leeyahayba ay u madaxbannaan yihiin hawlahooda isla markaana ay ka madaxbannaan yihiin Xisbiyada Siyaasadda;

• ***lyagoo ku qanacsan*** muhiimadda ay leedahay in la abuuro dhaqan isku dulqaadasho siyaasadeed ku dheehan tahay (a culture of political tolerance); isla markaana aan

waxyeello u gaysanahaynin Qiyamka iyo Hiddo-samida suubban ee dhaqanka iyo cirdiga qofka, oo ka reebban shakhsi cay, nasab cay, aflagaaddo, iyo isceebayn; taasoo dhaawac u gaysanaysa sharafta (cirdiga) qofka;

• ***Iyagoo ogsoon*** in meel looga soo wada jeedo danta iyo maslaxadda guud ee dalkan Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana sida Dastuurka iyo Shuruucda Doorashooyinku ay jideeyeen si nabad-gelyo ah ugu loollamaya hoggaanka siyaasadeed ee dalka;

• ***Iyagoo aamminsan*** in sida keliya ee hoggaanka dalka lagula wareegi karaa ay tahay rabitaanka iyo iraadada Shacbiga oo loo marayo sifo Sharci ah iyo hab nabadeed;

Waxa ay saxeexeen Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyadda Siyaasadda ee Doorashada Madaxtooyada 2017" waxaanay balan-qaadayaan in ay u hogaansamaan Xeerkan Hab-dhaqan (Code of Conduct for Political Parties) kaas oo ay saddexda Xisbi Siyaasadeed iyo Komishanku si wada jir ah isula oggolaadeen iyadoo ay Xisbiyada Siyaasadda iyo KDQ wada saxeexeen maanta oo ay taariikhdu tahay 26 September 2017.

## QAYBTA KOWAAD

### QODOBKA 1aad: CINWAAN GAABAN

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa "**Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda ee Doorashada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland ee 201**7".

### QODOBKA 2aad : QEEXITAAN

1) "**Komishan**": Waxaa loola jeedaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka Somaliland, ee lagu aasaasay Qodobka 11aad ee Xeerka Doorashada Madaxtooyadda iyo Goleyaasha Deeganka (Xeerka Lr. 20/2001) ee wax laga bedelay 2017;
2) "**Xisbi/Xisbiyada**": Waxaa loolajeedaa Xisbi ama Xisbiyada Siyaasadda;
4) "**Murashax**": Waxaa loola jeedaa murashaxiinta u taagan jagooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenka, ee tartamaya doorashada Madaxtooyada ee 2017, kaas oo uu soo sharaxay Xisbi gaar ahi, isla markaana ay ogolaadeen KDQ musharaxnimadiisa;
5) "**Mas'uul Xisbi**": Waxaa loola jeedaa mas'uuliyiinta kala duwan ee Xisbiyada Siyaasadda, heerarkooda kala duduwan ee heer qaran, gobol, degmo, IWM.
6) "**Taageere Xisbi**" waxa loola jeedaa taageerayaasha lagu yaqaano in ay u ololeeyaan ama taageeraan xisbi gaar ah, ama taageerayaasha sita ama xidhan calamaanta, garamaanta, boodhadhka xisbi gaar ah.
7) "**Shaqaale Dawladeed**" waxa loola jeedaa shaqaalaha dawlada ee ku qeexan Xeerka Shaqaalaha Dawladda (Xeer LR. 07 /96).

### QODOBKA 3aad: DABBAQAADDA XEERKA HAB-DHAQAN

Xeerkan Hab-dhaqan waxaa lagu dabbaqayaa, kuna dhaqmaaya dhammaan hogaamiyeyaasha Siyaasadda, Murashaxiinta, Mas'uuliyiinta Axsaabta Siyaasadda,

Mas'uuliyiinta Dawladda ee leh Magacaabista Siyaasadeed, Xubnaha Xisbiyada Siyaasadda, iyo taageerayaasha lagu yaqaan in ay Xisbi u ololeeyaan.

## QODOBKA 4aad: MABAADII'DA GUUD

Sharcinimada (legitimacy) dawlad lagu soo doortay nidaam Dimuqraadi ah oo ku salaysan doorasho xor ah oo xalaal ahi waxa ay ku iman kartaa:

1) Marka codbixiyeyaasha lagu war-geliyo (informed decision), laguna wacyigeliyo barnaamijka siyaasadeed ee Xisbiga ay dooranayaan iyo murashaxa ay u codaynayaan iyadoo taas loo maraayo olole doorasho oo caafimaad qaba;
2) Marka ay cod-bixiyeyaashu codkooda u dhiibtaan si madaxbannaan iyadoo aan lagu faro-gelinayn, la cabsi-gelinayn, laaluush ama khiyaamo kale loo adeegsanayn;
3) Marka ay Xisbiyada Siyaasadda iyo hoggaamiyeyaashoodu si niyad-sami ah (good faith) ugu dhaqmaan una ixtiraamaan Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda, Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta iyo Dastuurka;
4) Doorashadu waa cabiraadda (expression) rabitaanka iyo iraadada Shacbiga, go'aanka ka soo baxana waa in ay wada ixtiraamaan una hoggaansamaan dhammaan Xisbiyadda u tartamaaya Hoggaanka Siyaasaddu (Political Parties).

## QODOBKA 5aad: UJEEDDADA XEERKA HAB-DHAQANKA

1. Ujeedadda Xeerkan Hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasadu waa in kor loo qaado waxyaalaha suurto gelin kara inay dhacaan doorashooyin xor iyo xalaal ah waxyaalahaas oo ay ka mid yihiin:
   a) In la isugu dulqaato arrimaha siyaasadda ee dimuqraadiyadda ku dhisan;
   b) In la abaabuli karo olole siyaasadeed oo xor ah iyo dood shacbiga u furan;
   c) In la ixtiraammo lana dhawro Xuquuqda Aadamiga si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda dalka JSL;
   d) Xeerkan Hab-dhaqanku waxa uu kaabayaa Xeerarka Doorashooyinka 1yo Diiwaan-gelinta, Dastuurka Qaranka, iyagaana marjac u ah.

2. Ujeedooyinka gaarka ah ee Xeerka Hab-dhaqanka waxa rna mid ah:
   a. in uu qeexo hab-dhaqanka iyo anshaxa xisbiyada siyaasada ee Doorashada Madaxtooyada ee 2017
   b. in lagu qeexo waxyaabaha ka reeeban xisbiyada doorashada horteed, doorashada dhexdeeda iyo doorashada kadib.

3. in uu dhiso Guddida Ilaalinta Anshaxa Doorashooyinka, isla markaana qeexo xilkooda iyo waajibadkooda.

## QODOBKA 6aad: KU DHAQANKA XEERKA HAB-DHAQANKA

Axsaabta Qaranka iyo murashixiintu iyaga oo fulinaaya Xeerkan Hab-dhaqanku waa:

1. lnuu Murashax kasta oo uu ogolaaday KDQ murashaxnimadiisa keenaa warqad saxeexan oo uu ku caddaynayo oggolaanshaha ku dhaqanka Xeerka Hab-<l.haqanka doorashada Madaxtooyada isla markaana uu ku ballan-qaadayo inay taageerayaashiisu ku dhaqmayaan Xeerkan Hab-dhaqan (Declaration ofCommitment);

2. lnuu Xisbi kastaa muujiyo inuu u hoggaansan yahay ku dhaqanka Xeerkan Hab-d.haqan;
3. lnay ku wacyi-geliyaan taageerayaashooda, Wakiillada Xisbiyada, Xubnaha Xisbiga iyo Madaxdaba in ay ku dhaqmaan isla markaana ixtiraamaan meel-marinta iyo ku dhaqanka Xeerkan Hab-d.haqan;
4. lnay adkeeyaan joogteeyaanna wada shaqaynta ka dhaxaysa Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Axsaabta Qaranka;
5. lnuu ka qaato tallaabo adag oo ka-hortag u ah in lagu xad-gudbo Xeerkan Hab-dhaqan;
6. lnuu qaado tallaabo kasta oo suurtogal ah inaan la dhiirri-gelin wax kasta oo jabinaaya Xeerkan Hab-dhaqan;
7. In uu dadweynaha hortiisa ku cambaareeyo fal kasta oo minjo xaabin kara qabashada doorasho xor iyo xalaal ah.
8. In uu hubiyo in tartanka xisbiyadda kale u dhaxeeyaa uu noqdo *mid* ku dhisan is-ixtiraam iyo iskugu dul-qaadasho fikirka iyo mabaadiida kala duwan;
9. In uu kobciyo is-aarninaada iyo kalsoonida xisbiyada kale iyo KDQ isaga oo u maraya is-kaashi;
10.In uu maamulo oo yareeyo khilaafaadka xisbiyadda iyada oo loo marayo wada-hadal ku dhisan wax-wada-lahaansho;
11. In uu kor u qaado wada-hadalada iyo dood wadaagta xisbiyadda si loo xoojiyo midnimadda guud ee qarankan JSL;
12. lnuu ballan qaado inuu aq balayo natiijada doorashada arna uu dacwad ka fur to Maxkamadda Sare, haddii uu ku qanci waayo natiijada ku-meel gaadhka ah (provisional result), si sharciga waafaqsan.

## QODOBKA 7aad: XUQUUQDA DOORASHO EE DIDNACYADA

Dhinacyada Xeerkan Hab-dhaqan wada saxeexay waa inay ogyihiin xuquuqdooda doorasho ee la xidhiidha:

a. Dhiibashada ra'yiga siyaasadeed ee waafaqsan shuruucda Dalka;
b. Ka doodista siyaasadda iyo barnaamijyada Xisbiga;
c. Faafinta suugaan aan cid kale lagu weerarayn;
d. Daabacaadda, qaybinta qoraalo war-galineed iyo xayaysun aan cidna lagu weerarayn ama aan aflagaado ahayn;
e. Dhejinta boodhadh, ha1-ku-dhegyo waafaqsan Xeerka Nidaamka Guud iwm;
f. Abaabulidda iyo qaadista ololayaal doorasho oo xor ah si waafaqsan Xeerarka, Shuruucda dalka, Xeerkan Hab-dhaqan iyo Dastuurka JSL.

## QODOBKA 8aad: MAAMULKA OLOLAHA DOORASHADA

Xisbi kastaa wuxuu ballan qaadayaa:-

1) lnuu maamuuso, qaddariyo, ixtiraamana xuquuqda iyo xorriyadda Xisbiyada kale inay ololeeyaan; inay faafiyaan aragtidooda siyaasadeed iyo mabaadii'dooda si aan gabbasho ku jirin; iyo inay si sharciga waafaqsan u taagaan, dhejiyaan hal- ku-d.hegyo, boodhadh, calaamadaha Xisbiyadooda si waafaqsan shuruucda wadanka iyo Xeerkan Hab-dhaqan IWM;
2) Inuu xaq-dhawro dhammaan xuquuqda saxaafadda, Gudigga Illaalinta Anshaxa Axsaabta iyo goob-joogayaasha doorashada (Observers);
3) lnuu ku dhaqmo jadwalka kaltanka maalmaha ololaha doorashada, ee ay soo

saaraan Komishanka Doorashooyinku; oo aanu olole gelin (ololaynin) maalinta ama wakhtiga loo qoondeeyay Xisbiyada kale.

4) In uu xaqiijiyo in cod-bixiyeyaashu ay u madax bannaan yihiin go'aankooda iyo aragtidooda Siyaasadeed;

5) In aanu hanjabaad iyo caga-juglayn u gaysanin taageerayaasha iyo xubnaha Xisbiyada kale, isla markaana uu ixtiraamo xafiisyadooda iyo xarumaha iyaga u gaarka ah.

6) Luqada ay ku hadlayaan Xisbiyada Siyaasadda iyo hoggaamiyeyaashoodu waa in ay ahaato mid caafimaad qabta oo aan abuurayn iska hor-imaad dadweyne, xaalad abuur, kicin dadweyne, isku dir, colaad abuur, caadifad aan caqli ku dhisnayn iyo kala dil ummadda walaalaha ah. Isla markaana waa in aanay nabadgelyada iyo amniga qaranka wax u dhimayn.

7) Waxaa saaxadda Siyaasadda iyo ololaha doorashadda ka reebban shakhsi weerar, sharaf dil (character assassination) iyo caytan;

8) Xisbi kastaa isagaa mas'uul ka ah hab-d.haqanka Xubnaha Xisbigiisa iyo taageerayaashiisa; waxaanu waajib ka saaran yahay in uu ku war-geliyo Xeerkan Hab-dhaqan iyo Shuruucda kale ee Doorashooyinka.

## QODOBKA 9aad: WAXYAABAHA KA REEBBAN XISBIYADA WAKHTIGA DOORASHADA

Xisbi kasta waxaa ka reebban:

1) lnuu ku kaco hawlo wiiqi kara ama waxyeello u gaysan kara nabadgelyada iyo deggenaanshaha dalka ka-hor doorashadda, doorashada dhexdeeda, ama doorashada ka dib;

2) In uu ku kaco fal kasta oo waxyeello u geysan kara qaranimadda iyo israacsanaanta dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland;

3) Inuu adeegsado hadallo aflagaado ah ama meel ka dhac ah oo sababi kara rabshado gacan-ka-hadal ah wakhtiga doorashadu socoto;

4) In uu ku ololeeyo hanaan ku dhisan qabyaalad, kala fogayn iyo nacayb, iyada oo qodobkan laga duulayo waxa reeban in Ia abaabulo taageerayaal, olole, isku soo bax, shir, ku dhisan qabyaalad ama ay ka muuqanayso weedho qabiil, ama qabyaaladeed, xisbi kasta waxa ka reeban in ay dhajiyaan hal-ku-dheg ay ka muuqato qabiil, qabyaalad, ama gobolaysi gaar ah;

5) Inuu baqo-geliyo murashaxiinta, wakiillada Xisbiyada, xubnaha ama taageerayaasha Xisbiyada kale;

6) Inuu arbusho ama khalkhal geliyo ololaha Xisbi kale;

7) In uu burburiyo, weeraro ama qabsaddo xafiisyadda iyo fagaarashaasha xisbiyadda kale;

8) In uu burburiyo, jeexjeexo, baabiiyo, Ia wareego, ka hor yimaado wacyigelinta codbixiyayaasha, ama qoraalada, calaamadaha, calammada iyo boodhadhka Xisbi kale;

9) lnuu iska hortaago qaybinta qoraalada, ama muujinta hal-ku-dhegyo ama samaynta banaanbax, kulammo, socod ama dhoolla-tus uu leeyahay Xisbi kale, ama iska hortaago Xisbi kale inuu dadweynaha Ia xidhiidho; ama u diido taageere in uu ka qayb-galo banaanbax Xisbi kale

10) lnuu u oggolaado taageerayaasha Xisbigiisa inay ku kacaan wax kasta oo Xeerkani mamnuucay.

11) Inuu sameeyo olole ama bannaan-baxyo Siyaasadeed xilli aan ugu xusnayn

jadwalka saami-qaybsiga ololaha doorashada.

12) Xisbina xoog kuma qabsan karo goob-doorasho si uu xoog ugu buux-buuxsado codadka goobtaas cod-bixineed (procuring votes by occupation of a polling station) umana adeegsan karo qaabab sharci darro ah goob codbixineed si uu uga helo codad sharci darro ah, iskamana hortaagi karo Xisbi kale codad uu sharci ku heli lahaa. Qodobkani xisbiga, taageerayaasha, iyo murashaxa ku kaca ee lagu helo waxa ciqaabtiisa loo raacayaa si waafaqsan Qodobka 67aad farqadihiisa 4aad iyo 5aad.

13) Xisbiyadda waxa ka reeban in ay isku dayaan in ay dadweynaha laaluushaan, cabsi-geliyaan, u hanjabaan ama saamayn aan haboonayn ku kasbadaan codkooda, cid kasta oo ku kacda falka ku xusan farqadan waxa ciqaabtiisa loo raaci doona si waafaqasan farqada sare ee Qodobkan.

14) Xisbiyadda iyo taageerayaashooda waxa ka reeban in ay ka dhex ololeeyaan goobaha cod-bixinta, keenaan ama la yimaadaan goobaha cod-bixinta hal-ku-dhegyo muujinaya ama ka tarjumaya calaamad xisbi, calan, boodh, ama wax kasta oo loo qaadan karo in uu yahay olole maalinta cod-bixinta iyo 24ka saacadood ee ka horeeya.

15) Xisbiyaddu iyo taageerayaashoodu rna samayn karaan dabaal-deg ka hor ku dhawaaqista natiijada, ama samayn karaan natiijo male-awaal ah, oo khal-khal gclin karta nabadgelyada guud ee dalka JSL, mana abaabuli karaan banaanbax lagaga soo horjeedo doorashada ama natiijada doorashada.

## QODOBKA 10aad: REEBBANAANTA ISTICMAALKA IYO HAYSASHADA NOOCYADA HUBKA

1. Murashaxiinta, Xubnaha Xisbiyada Siyaasadda, Wakiillada Xisbiyada iyo taageerayaashoodaba waxaa ka reebban kana mamnuuc ah in ay noocyada hubabka kala duwan u soo qaataan meelaha dadweynuhu isugu soo baxo (Public Gatherings), shirarka, goobaha ay ka socoto cod-bixinta doorashadu, iyo goob kasta oo uu ka socdo olole Xisbi kale.

2. Ilaalada gaarka ah ee ay Musharixiinta Xisbiyaddu wataan waa in ay ka mid noqdaan ciidanka booliska JSL.

## QODOBKA 11aad: TALLAABOOYINKA KA REEBBAN XUKUUMADDA

1) Waxaa reebban in ay Xukuumaddu u adeegsato Xoogagga Nabadgelyada sida Ciidanka Booliska, Asluubta, Sirdoonka iyo Ciidanka Qarankaba in lagu cabudhiyo Murashaxiinta Xisbiyada Siyaasadda iyo taageerayaashooda;

2) Qofna lama xidhi karo iyadoo uusan jirin Waaran Maxkamadeed (Warrant of Arrest); marka laga recbo xaaladaha uu Xeerku jideeyey in Boolisku uu qaban karo qof lagu tuhunsan yahay in uu gaystay faldambiyeed.

## QODOBKA 12aad: DHEXDHEXAADNIMADA HANTIDA IYO ADEEGYADA QARANKA (NEUTRALITY OF PUBLIC OFFICES, ASSETS AND FACILITIES)

1) Hantida Qaranka waa loo siman yahay, loomana adeegsan karo in loogu adeego danaha Xisbi gaar ah.

2) Shaqaalaha dawladu way ka reeban tahay in ay xisbiyadda ka mid noqdaan, loomana ogolla in ay u ololeeyaan xisbi gaar ah, waxaa reebban in shaqaalaha dawladu u ololeeyaan xisbi gaar ah ama in ay ku dhex milmaan hawlaha xisbiyadda iyo ololahooda.

3) Ciidamada Booliska, Asluubta iyo Ciidanka Qaranku waa in ay ka fogaadaan oo aanay ku dhex milmin arrimaha Siyaasadda isla markaana waa in ay ahaadaan dhexdhexaad, shaqadoodana ku eekaadaan.

## QODOBKA 13aad: GEEDDI-SOCODKA DOORASHADA

Xisbi kasta waxaa ku waajib ah:-

1) lnuu wada shaqayn Ia yeesho Komishanka Doorashooyinka Qaranka, saraakiisha iyo hawl-wadeenada KDQ, iyo Xisbiyada Kale si loo xaqiijiyo codbixin u dhacda si nabadgalyo iyo habsami ah kuna dharnmaata in si xornimo ah codbixiyayaashu u gutaan xuquuqdooda carqalad la'aan iyo cabsi la'aan, si waafaqsan sharciga;
2) in uu dhawro isla markaana xaqiijiyo nabadgelyada hawl-wadeennada doorashada iyo xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka xilliga u diyaar-garawga doorashada, cod-bixinta, tirinta iyo ku dhawaaqidda natiijada;
3) In ay ka hor tagaan fal-dambiyeed kasta oo suurto-gal ah in uu dhaco xilliga doorashada kaasoo ku saabsan hawlaha doorashada (electoral offences);
4) Inuu qaato tilmaan kasta oo sharci ah una hoggaansamo awaamiirta Komishanka Doorashooyinka Qaranka, si sharciga waafaqsan;
5) Inaanu sinaba u farogelin shaqada KDQ iyo saraakiisha doorashada;
6) lnuu qaddariyo lana shaqeeyo goob joogayaasha (observers) iyo Guddida Illaalinta Anshaxa Doorashooyinka.
7) Inuu dhawro isla markaana ixtiraamo qarsoonaanshaha (sir ahaanshaha) codbixinta.
8) In uu xoojiyo kana qayb-qaato isfahanka guud ee daneeyayaasha doorashada, isla markaana abuurin jawi khalkhal gelin kara arna dhibaato u gaysan kara doorashada;
9) In uu hubiyo in dhamaan bulshada ay u furan tahay ka qayb-galka siyaasadu,
10) In uu muujiyo dhaqan bisayl dimuquraadiyadeed ku dheehan tahay, oo hufan, isla markaana kor uqaado hanaanka doorashooyinka, si hufana ugu tartamo doorashada;
11) In uu ixtiraamo, ku dhaqmo, difaaco, xoriyadda iyo xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadiniinta ee uu damaanad qaaday Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Xeerarka Doorashooyinka, Xeerkan Hab-dhaqan, Xeerka Diiwaangelinta iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland;
12) In uu dhawro qiyamka iyo aaminaada bulshada JSL;
13) In uu ilaaliyo sharafta bani'aadanka, isla markaana meel ka dhac iyo ceebayn aanu ku samayn sharafta, karaamada iyo sumcadda qofka iyo bulshada midbanaba;
14) In uu difaaco, ku dhaqmo, ixtiraamo xeer hoosaadyadooda gaarka ah (dastuuradooda), iyo shuruucda xisbiga u gaarka ah;
15) In uu xoojiyo waddaniyadda iyo midnimadda dalka Jamhuuriyadda Somaliland;
16) In uu xoojiyo, ixtiraamo, kobciyo mabaadiida maamul wanaaga, isku ulqaadashada, is-ixtiraamka, banyaalnimadda, iyo isla xisaabtanka;

17) lnuu kobciyo kana qayb-galo tartan hufan oo xor iyo xalaal ah.

### QODOBKA 14aad: DOORKA SAXAAFADDA

Saxaafaadu waa Waax ka mid ah Waaxyaha waawayn ee Qaranka.
Saxeexayaasha Xeerkani Hab-dhaqan waxay ixtiraamayaan Mas'uuliyadda saaran Saxaafadda Madaxbannaan iyo tan Dawladdaba. Sidaas awgeed, Saxaafadda Madaxa bannaan iyo tan Dawladduba waa:

1) In ay dhiirri-geliyaan ku dhaqanka Xeerka Hab-dhaqanka;
2) In ay Ummadda ku wacyi-geliyaan ku dhaqanka iyo dhawrista Xeerkan Hab-dhaqan;
3) In ay faafiyaan Xeerkan Hab-dhaqan, gaadhsiiyaana bulshada. Sidoo kale waa in ay tixgeliyaan Xeerkan.
4) Warbaahinta ay lceyihiin xisbiyadda Qaranka sida bogooda lnternetka, Youtube ka, iyo bogaga ay ku leeyihiin warbaahinta Bulshada (social media), waa in ay ixtiraamaan, kuna dhaqmaan Xeerarka Hab-dhaqanka.
5) Saxaafadu waxa ay yeelan doontaa Xeer Hab-dhaqan oo u gaar ah, muddada doorashada.

## QAYBTA LABAAD

## GUDDIDA HAWLEEDKA XISBIYADA

### QODOBKA 15aad: AASAASID

Si loo abuuro jawi is-faham oo u dhaxeeya Xisbiyada Siyaasadda isla markaana loo dhaqan-geliyo Xeerkan, waxaa Ia abuuray Guddida Hawleedka Xisbiyadda Siyaasadda (Task Force Committee). Sidaas darteed;

1) Guddidu waxay fududaynaysaa xidhiidh iyo isfaham u dhaxeeya Xisbiyada Siyaasadda ee tartamaaya iyo KDQ
2) Guddidu waxa ay noqonaysaa Xarun ada hadal (Forum for Dialogue) iyo ,..,ada xaajood oo u dhaxaysa Xisbiyada Siyaasadda;
3) Guddidu waxa ay ka koobnaanaysaa Saddexda Xisbi Siyaasadeed oo uu mid waliba soo diran doono laba wakiil;
4) Guddidu waa mid Ia talineed oo KDQ gacan ka siinaysa in Xisbiyadu ay yecshaan wada xaajood siyaasadecd;
5) Guddidu awood uma laha in ay awaamiir siiso KDQ iyo in ay ku xad-gudubto awoodaha uu sharcigu siiyay KDQ, waxase ay leeyihiin soo jeedin;
6) Guddidu waxa ay yeelanaysaa shirar joogto ah oo toddobaadkiiba hal mar ah. Haddii aanay jirin arrimo deg deg ahi.

### QODOBKA 16aad: SHAQADA GUDDI HAWLEEDKA

Guddi Hawleedku waxa ay shaqadeedu noqonaysaa:

1) In ay ahaadaan xarun ay ku doodaan Xisbiyada Siyaasaddu oo lagaga hadlo wax-qabadka iyo hab-sami u socodsiinta hawlaha doorashada;
2) In ay dhiirigeliyaan in Xisbiyada Siyaasaddu ay ku dhaqmayaan isla markaana ixtiraamayaan Xeerkan Hab-dhaqan, Xeerarka Doorashooyinka, Diiwaangclinta iyo Dastuurka;

3) In ay noqdaan biriijka isku xidhaaya Xisbiyada Siyaasadda iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
4) In ay xallilaan khilaafaadyada ka dhex-dhasha Xisbiyada dhexdooda (amicable solution) si waafaqsan Xeerkan Hab-dhaqan 1yo Xeerarka Doorashooyinka iyo Diiwaan-gclinta;
5) In ay hubiyaan in Xisbiyadoodu u hogaansan yihiin Xeerka Hab-dhaqanka, isla markaana xaqiijiyaan fulinta iyo ku dhaqanka Xeerkan, iyo awaamiirta kasoo baxda KDQ iyo Guddida Ilaalinta Anshaxa.

## QODOBKA 17aad: MAALIYADDA GUUD. HANTIDA IYO WARBAAHINTA DAWLADDA

Qodobka 26aad ee Xeerka Doorashada Golaha Wakiiladda (Xeer Lr. 20-2/2005), wuxuu Komishanka Doorashooyinka Qaranka u xilsaarayaa in uu hubiyo in Xisbiyada Qaranku si siman u isticmaalaan warbaahinta dawladda iyo fagaarayaasha khayriyadaha. Qodobku waxa kale oo uu xusayaa inaan Xisbina hantida ummadda u adeegsan karin ujeedooyin u gaar ah. Qodobku wuxuu KDQ awood u siinayaa inuu ganaax maamul ahaaneed ku rido cid kasta oo ku kacda fal liddi ku ah habsami-u-socodka doorashada ama Xeerarka iyo nidaamka doorashada.

Si uu xilkiisaa u gutto, Komishanku wuxuu diyaarinayaa hawlahan farsammo ec hoos ku qoran si uu u xaqiijiyo u-hoggaansanaanta Xccrka iyo nidaamka doorashada:

**1. Adeegsiga Warbaahinta Dawladda**

***A. Barnaamijyada Raadhiyaw Hargeysa Iyo Telefishanka Qaranka***

Qaabka Fulinta:

- Heerka Koowaad: La-socodka Xilliga Ololaha
- Heerka Labaad: Wakhti-u-qoondaynta Xisbiyada Xilliga Ololaha

Heerka Koowaad: La-socodka maalinlaha ah ee barnaamijyada af-Soomaaliga ah ee ka baxaya Raadhiyaw Hargeysa iyo TV-ga Qaranka
Komishanka Doorashooyinka Qaranku wuxuu la soconayaa, isla markaana ilaalinayaa barnaamijyada maalinlaha ah ee af-Soomaaliga ah ee ka baxaya Raadhiyaw Hargeysa ee la xidhiidha ololaha doorashada. La-socosho taas oo kale ah ayaa lagu samaynayaa TV-ga Qaranka.

Heerka labaad: Uga-qoondaynta Wakhti Is-le'eg Raadhiyaw Hargeysa iyo TV-ga Qaranka saddexda Xisbi Siyaasadeed
Komishanka Doorashooyinka Qaranku, isagoo ka duulaya u sinaanta wakhtiga hawo-ku-jiridda, isla markaana kala tashanaya Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyigelinta iyo Xisbiyadda ayuu wakhti is-le'eg u qoondaynayaa saddexda Xisbi Siyaasadeed. Shaxda qeexaysa u-qaybinta saddexda Xisbi wakhtiga hawo-ku-jiridda, waxa loo aqoonsanayaa inuu lifaaq u yahay Xeerkan Hab-dhaqan.

***B.Wargeysyada Dawladdu Maamusho***

Komishanka Doorashooyinka Qaranku, wuxuu labadan ku-tala-ga1 ee hoos ku qoran ka yeelanayaa wargeysyada Dawladdu Maamusho:

1. La-socoshada maalinlaha ah ee qoraallada ku soo baxa Wargeysyada dawladdu maamusho.
2. Uga-qoondaynta saddexda Xisbi Siyaasadeed bogagga wargeysyada dawladdu

maamusho bed (space) is-le'eg.
Faahfaahinta ku-tala-galkan waxa goynaya Xisbiyada, KDQ iyo Wasiirka Warfaafinta, waxaana loo aqoonsanayaa inuu lifaaq u yahay Xeerkan Hab-dhaqan.

***C. Warhaahinta Gaarka Loo Leeyabay***

Warbaahinta gaarka loo leeyahay waa inay si si.man u soo gudbisaa afkaarta Xisbiyada Siyasadeed ee diyaarka u ah inay ka iibsadaan warbaahinta gaarka loo leeyahay bed (space) ay ku soo qoraan afkaartooda. Waa inaan Xisbiyada lagu kala faquuqin arrintan. Qodobkan waa in lagu daraa Xeerka Hab-Dhaqanka Warbaahinta Madaxa Bannaan. Buugga Tilmaan-bixiyaha Warbaahintuna (the Media Guide) waa inuu si cad u xuso baahida loo qabo m warbaahintu si isu-dheelli-tiran oo wax-ku-ool ah u soo tebiso wararka.

Noocyada Warbaahinta midkoodna rna diidi karo inuu daabaco ama baahiyo aragti Xisbi, haddii Xisbigaasi bixinayo kharashka caadiga ah ee bedka (space) wargeys ama wakhtiga baahineed. Haddii nooc warbaahineed uu ku kaco falkaa reebban, Xisbiga ay khusaysaa waa inuu cabasho u gudbiyo Guddida Illaalinta Hab-sami-u-socodka Saxaafadda, guddidaas oo ka qaadaysa arrintaas tallaabo kasta oo sharciyeed oo ku habboon ama siyaasadeed oo lagama maarmaan ah si loo suurto-geliyo in warbaahintu gudato mas'uuliyadda ay u hayso ummadda.

**2 . Hantida iyo Maaliyadda Guud**

Qodobka 26aad ee Xeerka Lr. 20-2/2005 wuxuu mamnuucayaa in Xisbi u isticmaalo ujeeddadiisa gaarka ah hantida guud. Qodobku waxa kale oo uu xusayaa inaan Xisbina si toos ah iyo si dadban toona u isticmaali karin hanti shisheeye leeyahay, sida Ururradda Samafalka ee debedda iyo Hay'adaha Qarammada Midoobey.

Waxa Intaa dheer, Qodobka 64aad ee isla Xeer Lr. 2o-2/2005 wuxuu awood u siinayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka inuu samayn karo ganaax maamul ahaaneed.

Si loo dhaqan-geliyo qodobbadan, Komishanka Doorashooyinka Qaranku:

a) Wuxuu hubinayaa in saddexda Xisbi Siyaasadeed u siman yihiin maaliyadda guud, warbaahinta dawladda iyo fagaarayaasha dadweynuhu isugu soo baxaan.

b) Wuxuu xaqiijinayaa in, xilliga doorashada, aan Wasiirrada Xukuumaddu u adeegsan gaadiidka dawladda u ololaynta Xisbiga ay ka tirsan yihiin.

c) Waa inuu maskaxda ku hayo inaan shaqaalaha dawladda loo oggolayn, inay u ololeeyaan Xisbi. U-ololaynta uu qof shaqaale ahi u ololeeyo Xisbi waxay xad-gudub halis ah ku tahay maamulka nidaamka doorashada, Komishanka Doorashooyinka Qarankuna wuxuu kaga soo oogayaa qofkaas tallaabada anshax-marineed ee habboon.

d) Si loo horumariyo is-aaminaadda iyo kalsoonida Xisbiyadu isku qabaan, isla markaana loo abuuro jawi habboon oo doorashadu si hab-sami ah ugu qabsoonto; waxaa lagama maarmaan ah in xukuumaddu ka joogsato fal kasta oo ah ku-takri- fal awoodeed. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in Xisbiyada Siyaasadeed ay iska ilaaliyaan fal kasta oo halis ku ah nabadgelyada iyo xasilloonida.

Si uu Komishanka Doorashooyinku awood ugu yeesho inuu si fiican ugu gutto waajibaadkiisa, waa in arrimahan la helo:

- Wareegto Madaxweyne oo amraysa saraakiisha ciidamadda iyo Xukuumadda

inay wada-shaqayn buuxda la yeeshaan KDQ, iyo hay'ad kasta oo KDQ gacan ka siin karta gudashada waajibaadkeeda Qaran.

• Wareegto Madaxweyne oo si rasmi ah u mamnuucaysa u-adeegsiga gaadiidka dawladda olole siyaasadeed iyo in lagu dhejiyo astaan Xisbi, hal-ku-dheg Xisbi iwm. Xafiisyada, kaamboollada iyo gaadiidka dawladda.

• Wareegto Madaxweyne oo lagu fulinayo laguna adkaynayo in aan shaqaalaha dawladu geli karin olole siyaasadeed, waqtiga tartanka xisbiyadda siyaasadda.

• Wareegto Madaxweyne oo lagu adkaynayo laguna hirgelinayo u sinaanta warbaahinta dawladdu maamusho, sida Raadyoow Hargeysa, TV ga Qaranka, iyo Wargeyska Dawan;

Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ka mas'uul ah muu ka keeno Madaxweynaha wareegtooyinka kor ku xusan.

## QAYBTA SADDEXAAD

## QODOBKA 18aad: XAALADO GAAR AH

1. **<u>Xeerarka La Xidhiidha Isu-Soo-Baxyada</u>**

Qodobka 34aad ee Xeer Lr. 20/2001 wuxuu KDQ siinayaa in ay diyaariyaan soona saaraan shaxda isku soo baxyadda, iyo dhoola-tusyadda qorshaysan ee Xisbiyadda oo ah tiro maalmo ah oo isleeg, waxanu farayaa Wasaarada Arrimaha Gudaha Guddoomiyayaasha Gobolada iyo Degmooyinka in ay ku dhaqmaan shaxda Komishanku soo saaro, sidaa darted:

a) Komishanku waa in uu tiro maalmo ah oo is leeg xisbiyadda siiyaa si waafaqsan sharciga;

b) Haddii ay dhacdo nabadgalyada awgeed in laga baqo in rashshad, gacan ka-hadal ama dhibaato kale ka imaanayso isku-soo-bax xisbi, hay'adaha ay khuseysaa waxa ay codsi sababaysan usoo gudbin doonaan Komishanka oo awood u leh in uu ka diido ama ka ogolaado ka dib marka uu qiimeeyo xaalada markaa taagan, kuna xisaabtamo heerka cabsida jirtaa leeg tahay;

c) Xisbiga ay ololihiisa laga joojiyay waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo maalin kale oo deegaankaasi laga joojiyay ka qabsado ololihiisa.

2. **Dhaqdhaqaaqa Gaadiidka ee Maalinta Doorashada**

Iyadoo la raacayo sida uu jideynayo Qodobka 2iaad ee Xeer Lr. 20-2/2005, waxa la mamnuucay dhaqdhaqaaqa baabuur kasta oo dadweyne, dawladeed ama gaar ahaaneed maalinta doorashada laga bilaabo 06:00 subaxnimo ilaa 08:00 fiidnimo.
Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ah Hay'adda keliya ee awood u leh bixinta oggolaansho dhaqdhaqaaq baabuur maalinta cod-bixinta, si loo meelmariyo adeegyada guud ee aasaasiga ah iyo habsami-u-socodka doorashada. KDQ gaadiidka adeegyadaas guud iyo habsami-u-socodka doorashada lagu fulinayo wuxuu siinayaa warqad xabag leh (sticker), ama lambar oo muujinaysa oggolaanshaha KDQ ee dhaqdhaqaaqa baabuurka ee maalintaas cod-bixinta. Baabuur kasta oo aan maalinta codbixinta sidan oggolaansho dhaqdhaqaaq oo KDQ bixiyey, waxa qabanaya ciidanka boliiska waxaana la sii deynayaa ka dib 08:00 ftidnimo ee isla maalintaas.

3. **Wakiillada Xisbiyada**

Qodobka 29(5) ee Xeerka Lr. 20-2/2005 wuxuu qeexayaa in KDQ uu wakiillada Xisbiyada u tababaro waajibaadkooda, isla markaana uu u oggolaado Xisbiyada inay u kala beddeshaan wakiillada siday doonaan; halkaa waxa lagala soo bixi karaa in wakiil tababaran oo keli ahi uu noqon karo muraaqib (wakiil) goob codbixineed, degmo ama gobol doorasho.

***Xisbiyadu waxay ku heshiiyeen sidan**:*
Haddii ay baahiyi timaaddo, Xisbiyadu way beddelan karaan wakiilladooda Xisbi, laakiin waa in kuwa lagu soo beddelayaa noqdaan uun wakiilladii kaydka ahaa ee KDQ tababaray. Waajibaadka wakiilka Xisbi waxa lagu sheegi doona tilmaamaha bixiyo; dhinacyada kale ee kaalintooda shaqo oo dhan waxa loo raacayaa Qodobka 37aad ee Xeerka Doorashada Goleyaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada.

4. ***Cod-dhiibashada***

Qodobka 48(4) ee Xeer Lr. 20/2001 aad buu u cad yahay una kooban yahay, marka la eego halka uu cod-bixiyuhu ka calaamadinayo warqadda cod-bixinta. Marka lagu xisaabtamo xaqiiqda ah in tiro aad u badan oo ah dadweynaha Somaliland aanay wax akhriyi karin waxna qori karin, suurto-galnimada ay dad aad u badani ku cod waayayaan, akhris-qoris-la'aantaa sarraysa darteed, meesha lagama saari karo. Si looga badbaado xaaladdaas Xisbiyadu waxay ku heshiiyeen sida boos ku cad oo waafaqsan hab-dhaqankii lagu soo maamulay doorashooyinkii bore:

Cod-bixiyaha waxa loo oggol yahay in uu calaamadiyo meel kasta oo ka mid ah qaybta warqadda cod-bixinta ee loo gaar yeelay Xisbiga uu codkiisa siinayo. Calaamad kasta oo uu cod-bixiye ku qoro warqadda cod-bixinta, sida dhibic, isku-tallaab, xarriijin, sumad, calaamadda saxnimada, waa la aqbalayaa, illaa inta ay calaamaddu si bayaan ah ugujirto qaybta warqadda ee Xisbi u gaar ah, isla markaana si fiican loo arki karaya.

Haddii calaamadintu ay cod-bixiye si weyn ugala gudubto qaybta warqadda ee Xisbi u gaar ah codkaa waxa lagu tirinayaa wax-kama-jiraan. Si kastaba ha ahaatee, codka waxa loo tirinayaa mid sax ah oo la qaato, haddii ay muuqato in ku-tala-galka cod-bixiyuhu ahaa in uu Xisbi gaar ah codka siiyo oo tusaale ahaan, ay calaamadda inteeda badani ku gudo-jirto qayb warqadda cod-bixinta ah oo Xisbi u gaar ah, in yar se ay ku dacal- dhawday qaybta warqadda ee Xisbi kale.

5. **Diidmada Wakiil Xisbi diido in uu Saxeexo Natiijada**

Qodobka 53(2) ee Xeer Lr. 20/2001 wuxuu ku waajibinayaa in dhammaan wakiillada Xisbiyadu ay saxeexaan xaashida natiijada ama qoraal uu ku soo gudbiyo sababta uu u saxeexi waayay. Si kastaba ha ahaaatee, weli waxa jira suw·to-galnimada in wakiil Xisbi ama laba joogey xafiis doorasho ay si badheedh ah u diidaan saxeexidda, ama ay dhuuntaan intaan la gaadhin saxeexidda natiijada goobta.

Si loo xalliyo arrintaa Xisbiyadu waxay ku heshiiyeen sidan soo socota:
Si looga badbaado luminta codadka ay muwaadiniintu dhiibteen, waxa ku filan saxeexidda laba wakiil amah al wakiil iyo Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-ku-Xigeenka Xafiiska Doorashada. Si kastaba ha ahaatee, sababaha dhacdadaas waa in qoraal

ahaan loo diiwaan-geliyo.

Wakiilka Xisbi ee ay Ia noqoto inaanu saxeexm natiijadda waa inuu sababta uu u saxeexi waayey qoraal ku caddeeyo laguna rido baqshaddaha. Wakiilka Xisbi ee saxeexi waaya baqshadda ama sababta uu u saxeexi waayey oo qoraal ah raacin waaya baqshaddaas, waxa KDQ u gudbinayaa hay'adaha sharci fulinta si loogu oogo xil- gudasho-la'aan.

## QODOBKA 19aad: NIDAAMKA LOO RAACAYO SOO SAARISTA LIISKA CODBIXIYEYAASHA AH

Nidaamka liiska cob-bixiyeyaasha kama danbaysta ah loo soo saarayo waxa loo raacaayaa Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

## QODOBKA 20aadd: DAABACAADA IYO SOO SAARISTA LIISKA CODBIXIYEYAASHA

Sida ay tilmaamayaan Qodobbada 4aad, Farqadiisa 2aad, 5aad, 7aad, farqadiisa 2aad, 37aad iyo 38aad ee Xeerka Diiwaangelintu Xeer Lr. 37/2007, ee wax-ka-bedelka lagu sameeyay 2014 iyo 2016, waxa ay jideenayaan soo saarista diiwaanka codbixiyaha ee kama danbaysta ah oo uu Komishanku u xil saaran yahay. Xisbi kasta oo siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu Ia socdo habaynta, dhaqangelinta iyo daabacaadda liisaska Diiwaanka.

## QODOBKA 21aad: SOO SAARISTA LIISKA KAMA DANBAYSTA AH

1) Marka la diiwaangeliyo dhammaan wixii isbedel ah, waxa la diyaarinayaa liiska kama danbaysta ah oo noqonaya liiska uu Komishanka Doorashooyinku amri doono in laga daabaco dhammaan liisaska loo baahan yahay ee xaqa u leh in ay codeeyaan sida ay waajibinayaan Xeerarku.

2) Diiwaanka codbixiyaha ee kama danbaysta ah waxa nuqulo laga siin doonaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Xisbiyadda Siyaasadda.

## QODOBKA 22aad: XALLINTA KHILAAFAADKA XISBIYADDA (CONFLICT RESOLUTION)

1) Xisbiyada Siyaasaddu waxa ay muran iyo khilaaf kasta oo ka dhex dillaaca kuna saabsa, Xeerkan ku xallinayaan wada hadal iyo is-afgarad (amicable solution);

2) Haddii ay Xisbiyadu ku guulaysan waayaan in ay khilaafka dhexdooda ah xalliyaan waxay u soo ban-dhigayaan Guddida Ilaalinta Anshaxa Doorashada;

3) Haddii arrintu ay tahay mid aanay waxba ka qaban karaynin Guddidaasi waxaa loo soo gudbinayaa Komishanka Doorashooyinka.

## QODOBKA 23aad: CABASHOOYINKA

Xisbi kastaa waxa uu Cabasho u soo gudbiyanayaa Guddida Ilaalinta Anshaxa Doorashooyinka ee lagu aasaasay Qodobka 25aad ee Xeerkan Hah-dhaqan, haddii

uu u arko in lagu xad-gudbay Xeerkan Hab-dhaqan;

1) Iyadoo lagu xisaabtamayo wakhtiga, Cabashooyinka la soo gudbiyo waa in si dhakhso ah baadhis loogu sameeyo go'aanna laga gaadho;
2) Cabashooyinku waa in ay qoraal ahaadaan, laguna soo hagaajiyaa Guddida Anshaxa;
3) Cashasho kasta waa in ay ku cadahay xisbiga laga cabanayo iyo asbaabta looga cabanayo, oo mudaysan, isla markaana goobaysan, waana in ay wadataa cadaynta lagama maarmaanka ah;
4) Guddida Ilaalinta Anshaxa Doorashooyinku, waa in ay si madax banaan u baadhaan, u xaqiijiyaan, isla markaana muddo saddex cisho gudahood ah go'aan uga gaadhaan cabasho kasta oo soo gaadha;
5) Xisbiyada Siyaasaddu waxa ay ku dedaalayaan in wixii cabasho ah ee dhexdooda ah ay ku dhameeyaan is-afgarad iyo wada xaajood.

**QODOBKA 24aad: CABASHOOYINKA BEEN-ABUURKA AH (ABUSE OF COMPLAINT PROCEDURE)**

Xisbiyada Siyaasaddu waa in aanay ku xad-gudbin xuquuqda soo gudbinta cabashooyinka. Waa in aanay samaynin cabasho been-abuur ah (false, frivolous and vexatious complaints) oo lagu jahawareerinaayo geeddi-socodka doorashooyinka.

## QAYBTA AFRAAD

## QODOBKA 25aad: GUDDIDA ILAALINTA ANSHAXA DOORASHOOYINKA

1. Ujeeddada Loo Aasaasay Guddida

Guddida Illaalinta Anshaxa Doorashooyinka waxa loo aasaasay kor-u-qaadista suurto-galnimada in ay doorasho xor iyo xalaal ahi xilligeedii dalka kaga qabsoonto, iyo in ay doorashadaasi ku qabsoonto kuna gebo-gebawdo turxaan la'aan, si waafaqsan Sharciga iyo Xeerarka dalka.

2. **Xilka Guddida:**

Guddidu waxay u xilsaaran tahay:

a. Ilaalinta Habsami-ugu-dhaqanka Xeerarka Doorashooyinka iyo Xeerkan Hab-Dhaqanka Xisbiyada Siyaasadeed.
b. Xallinta khilaafaadka iyo murannada la xidhiidha Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyadda ee ka dhex dhasha laba dhinac ama ka badan oo ka mid ah dhinacyada ku loollamaaya doorashada,
c. Soo-saarista warbixino ku saabsan sida dhinacyadu ugu dhaqmayaan Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada iyo guud ahaanba Geedi-socodka Doorashada.

*4.*[1] **Awoodda Guddida**

Guddidu waxay awood u leedahay:

a. Xallinta khilaafkasta oo ka dhex-dhasha dhinacyada Xeerkan Hab-Dhaqan kala

[1] Ma jirto Faqarad tirsigeedu yahay 3.

saxeexday;

b. Hubinta meel-marinta Xeerka Hab-Dhaqanka ee Xisbiyada Siyaasadeed;

c. Ka qaadista tallaabo anshax-marineed oo Xeerka Hab-dhaqan waafaqsan xad-gudub kasta oo Guddida ama wakiilladeedu ogaadeen dhicitaankiisa.

d. Tallaabada anshax-marineed ee ay Guddidu soo saartaa ama qaaddaa wuxuu noqonayaa mid qaadashadiisu waajib ku tahay dhinacyada uu khuseeyo, si waafaqsan Xeerarka doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta iyo Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada (Code of Conduct).

### 5. Tirada Xubnaha Guddida iyo Qaabka Soo-Xulisteeda

a. Guddidu waxay ka kooban tahay Toddoba aqoonyahan oo reer Somaliland ah.

b. Guddidu waxa ay iska dhex doorayaan Guddoomiye, Guddoomiye Ku- xigeen iyo Xog-haye. Guddida waxaa soo xulaaya isla markaana magacaabaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

c. Toddobada xubnood ee reer Somaliland waxa soo xulaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

d. Guddidu waxay lixda gobol-doorasho ee dalka ku yeelanaysaa min laba wakiil oo KDQ uu soo xulo. Iyagoo Guddidu u igmanaaya in ay waajibaadkooda ka fuliyaan Gobollada.

### 6. Shuruudaha Lagu Soo Xulayo Xubinta Guddida

Guddida ahi waa in ay buuxiso shuruudahan hoos ku qoran:

a. In uu yahay/ tahay qof sumcad wanaagsan ku leh bulshada.

b. Qof leh Go'aan qaadasho, karti, aqoon iyo waayo-aragnimo uu ku gudan karo mas'uuliyadda culus ee Ia saaray,

c. Ku sifoobay dhexdhexaadnimo siyaasadeed.

d. In uu leeyahay/leedahay xirfad uu ku qoro/qorto warbixin (report writing skills).

### 7. Tallaabooyinka ay Guddidu ka Qaadi Karto Cidda ku Xad-Gudubta Xeerkan Hab-Dhaqan

a. Dhinaca ka mid ah dhinacyada ay Guddidu ku leedahay ilaalinta, ee ku xad-gudba arrin ay hab-dhaqankeeda caddeeyeen Xeerarka doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta ama Xeerkan Hah-Dhaqanku, waxay Guddidu ku anshax-marinaysaa:

i. Digniin caadi ah;

ii Ka-joojin Xisbiga ama musharraxa / musharraxiinta, muddo cayiman ama si joogto ah, adeegsiga warbaahinta dawladda iyo tan madaxbannaanba.

iii Ka-joojin Xisbiga, muddo cayiman, in uu sameeyo kulammo dadweyne, bannaan-bax ama dhoollo-tus siyaasadeed, olole doorasho IWM;

iv Ku rido ganaax idaari ah oo lacagced oon ka badnayn 200,000,000 (laba boqol oo milyan oo Shilinka Somaliland ah);

v Ka joojiyo ololaha doorashada qayb ahaan ama gabi ahaanba.

i. Gaddiidka aan haysan ruqsada dhaqdhaqaaq ce KDQ oo ay u cadaato Guddida inuu ku jiro olole aan waafaqsaneyn Xeerka Hab-clhaqanka, waxay u gudbin doonaan Ciidanka amniga si ay u xayiraaan socodkiisa.

ii. Gaadiidka Dawladda looma isticmaali karo Ololaha Doorashada iyo maalinta dhigaysaa.

iii. Qaadista tallaabadii kale ee ansha:x-marineed ee ugu muuqata in ay ku habboon tahay;
iv. U-gudbinta hay'adaha sharci-fulinta warka iyo macluumaadka cid kasta oo hawsha ay Guddidu ilaalinteeda u xil- saaran tahay ka gasha danbi gaadhsiisan dembi ciqaabeed (oo ay Guddidu hesho warkiisa) iyo la-socodka tallaabada ay hay'adaha sharci-fulintu ka qaadaan arrintaas;

b**.** Wasiirka ama sarkaalka kale ee dawladeed ee ku xad-gudba Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta ama Xeerkan Hab-Dhaqan, tallaabada anshax-marineed ee ay Guddida ugu muuqato in laga qaado oo qoraal ah waxay u gudbinaysaa KDQ; waxaanay la soconaysaa inuu KDQ tallaabadii ku habboonayd uu ka qaaday iyo in kale;

c. Mas'uulka ama hawlwadeenka Xisbi ee ku xad-gudba Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta ama Xeerkan Hab-Dhaqan, tallaabada anshax-marineed ee ay Guddida ugu muuqato in laga qaado oo qoraal ah waxay u gudbinaysaa KDQ; waxaanay la soconaysaa inuu KDQ tallaabadii ku habboonayd uu ka qaaday iyo in kale;

d. Masuulka ama hawl-wadeenka Xisbi ama taageere xisbi ee ay ku cadaato in uu ku kacay falal wiiqi kara amniga, nabad-gelyada, ama sameeya abaabul hubaysan, ama kicin dadweyne, ama lagu helo haddalo fitno abuuraya, dadka kala fogeynaya oo ku dhisan shakhsi weerar, caytan, qabyaalad iyo kicin waxa laga qaadayaa talaabo anshax marineed oo deg- deg ah, wa:xana lagu wargalinayaa ciidamadda amnigu in ay sida ugu dhakhsaha badan u qabtaan una horgeeyaan hay'adaha baadhista iyo garsoorka si loogu oogo danbiga uu galay.

e. Guddidu wa:xay ku baahinaysaa warbaahinta xad-gudub kasta oo ay cidi kula kacdo Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Diiwaangelina iyo Xeerkan Hab-Dhaqanka iyo tallaabada ay ka qaadayba, iyadoo weliba Guddidu ay dib ka baahin doonto sida looga waantoobay xad-gudubyadii ay tallaabada anshax-marineed ka qaaday

**8. Muddada Xilka ee Guddida**

Guddidu waxay hawsheeda bilaabaysaa isla marka Komishanku dhammays tiro magacaabisteeda, waxaanay ku egtahay marka uu Komishanku ku dhawaaqo natiijada Ku-meel-gaadhka ah ee doorashada.

**9. Wadashaqeynta KDQ iyo Guddida:**

a. Guddida Illaalinta Anshaxa Doorashooyinku wey u madaxbaanaaneysaa hawlahooda shaqo, iyagoo marwalba latashi la yeelanaya KDQ.

b. Wixii tallaabo anshax marineed ah ee ay Guddidu soo jeediso waxay u gudbineynsaa KDQ si loo fuliyo.

c. Xisbiyada Siyaasadda iyo Murashaxiintoodu waa in ay wada shaqayn iyo gacanba siiyaan Guddida Illaalinta Anshaxa Doorashooyinka. Waana in ay ku taageeraan shaqadooda.

## QAYBTA SHANAAD

### QODOBKA 26aad: TALLAABOOYINKA LAGA QAADAYO CIDDA XEERKAN JEBISA

Xisbi kasta oo ka qayb qaadanaaya doorashada ama hawl-wadeen Xisbi, xubin Xisbi, taageere Xisbi iyo murashax doorasho ee ku xadgudba Xeerkankan, Komishanka Doorashooyinku wuxuu ka qaadanayaa go'aamo anshax marineed sida:

a) Digniin caadiya;

b) In laga joojiyo Xisbiga wakhti cayiman ama si joogto ah adeegsiga warbaahinta Dawladda iyo ta madaxa banaan;

c) In Xisbigaasi laga joojiyo wakhti cayiman inuu sameeyo kulamo dadweyne, banaan- baxyo ama inuu tago gobol doorasho si uu uga soo ololeeyo ama uga taago boodhadh, halku hagyo ama calaamadda xisbiga

d) In lagu ganaaxo xisbigaasi ganaax idaari ah oo lacageed oon ka badnayn 200,000,000 (laba boqol oo milyan oo Shilinka Somaliland ah);

e) Kajoojiyo ololaha doorashada qayb ahaan ama gabi ahaanba.

f) Haddii danbiyadda dhacay ay noqdaan kuwo ka culus awoodda Komishanka Doorashooyinka Qaranka ama xad-gudubyada dhacay ay yihiin kuwo dambi ciqaabeed ka dhalan karo, waxaa Komishanka Doorashooyinku u gudbinayaa Hay'addaha ay khusayso arrintaasi;

g) Wixii khilaaf ah ama farsamo ah ee xallintoooda laga waayo Dastuurka Qaranka, Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Diiwaan-gelinta iyo Xeerkan Hab-dhaqanka Xisbiyada waxa xal ka gaadhaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

### QODOBKA 27aad: KU DHAQANKA IYO WAX KA BEDDELKA XEERKAN HAB-DHAQAN

a) Xeerkan Hab-dhaqan nuxur ahaan wuxuu waafaqsan yahay shuruucda doorashooyinka ee dalka u yaalla sida: Dastuurka Qaranka, Xeerarka Doorashooyinka, iyo Xeerka Diiwaan-gelinta Codbixiyeyaasha;

b) Xeerkan Hab-dhaqan waxaa lagu dabaqayaa xaaladaha aanay shuruucda dalka ee doorashada khuseeyaa wax ka jidaynin;

c) Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa xarunta dhexe ee KDQ, xarumaha doorashooyinka gobollada iyo degmooyinka iyo goobaha doorashada;

d) Xeerkan waxaa ku dhaqmaaya fulintiisana ilaalinaya Saddexda Xisbi Qaran, taageerayaashooda, murashixiintooda, iyo saraakiishooda iyo KDQ;

e) Wax ka beddelka Xeerkan wuxuu ku iman karaa marka dhinacyada wada saxeexay ay ka wada tashadaan kana heshiiyaan waxa lagu darayo iyo waxa laga saarayo.

### QODOBKA 28aad: AWOODDA SAXIIXA

Xeerkan Hab-dhaqan waxaa saddexda Xisbi Siyaasadeed ee Qaranka u saxeexay saddexda Guddoomiye ee Xisbiyada Siyaasadda.

WAXAA LAGU SAXIIXAY HARGEYSA, MAANTA OO AH **SALAASA LIX IYO LABAATANKA BISHA SAGAALAAD EE LABA KUN IYO TODOBA IYO TOBAN**.

**XISBIGA UCID**
Mudane Feysal Cali Xuseen
Guddoomiyaha Xisbiga UCID

**XISBIGA KULMIYE**
Mudane Muuse Biixi Cabdi
Guddoomiyaha Xisbiga KULMIYE

**XISBIGA WADDANI**
Mudane C/raxmaan C/laahi Cirro
Guddoomiyaha Xisbiga Waddani

**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA**
Eng. Abdiqaadir Iimaan Warsame
Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**NATIONAL ELECTORAL COMMISSION**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**GUDDIDA DOORASHOOYINKA QARANKA**

## XEERKA ANSHAXA SAXAAFADA EE DOORASHADA MADAXTOOYADA EE 2017
## *(Media Code of Conduct for Presidential Election 2017)*

**ARAR:**

1. Xeerkan Anshaxu waxa lagu dhaqi doonaa dhammaan saxaafadda gaarka ah iyo ta dawladdu maamusho xiliga doorashada Madaxtooyada ee 2017 ka. Waxa uu khuseeyaa muddada ka horeysa doorashada, doorashada dhexdeeda iyo mudada ka danbaysa doorashooyinka, waxaanu dhaqangalayaa maalinta ololaha doorashada si rasmi Komishanka Doorashooyinku ugu dhawaaqo, waxaanu ku eg yahay bil kadib maalinta doorashada.

2. Xeerkan Anshaxa waxa ku jira ararta, waxanu dejinayaa mabaadiida guud ee ka caawinaysa saxafiyiinta in ay raacaan heerarka habsimo ee ugu sareeya dhinaca xirfada saxaafada iyo gudashada xilkoooda, taas oo ah in ay bulshada siiyaan xog sugan si ay uga qayb-galaan doorashooyinka.

3. Waxa uu xooga saarayaa isla markaana dhawrayaa xaqa shakhsigu u leeyahay in uu xog sugan helo, waxa uu faahfaahinayaa waxyaabaha saxaafadu doonayso, iyo waxyaabaha saraakiisha goobta, degmada iyo booliisku ay tahay in ay sameeyaan si ay saxaafada uga saacidaan gudashada shaqadooda waxana uu laf-dhabar u yahay saxaafadu in ay iyadu is maamusho taas oo saxeexayaasha Xeerkani ka dhigeen heshiis dhaqangal ah.

4. Xeerkani waxa uu horseedayaa isfahan dhex mara Komishanka, xukuumadda, xisbiyada siyaasadda iyo saxaafadda si ay u aqoonsadaan mid kasta waxa laga rajaynayo, xuquuqda iyo masuuliyadaha hab bisayl ku jiro kaas oo horseedaya dhismaha seeska dimuquraadiyadeed ee dalka.

5. Waxa muhiim ah in aan Xeerkan qoraal ahaan uun la ixtiraamin, balse nuxurkiisa guud ahaan la ixtiraamo. Waa in aan loo tafsiirin Xeerkan si kooban si loo waxyeeleeyo balanqaadkiisa, oo ah in la ixtiraamo xuquuqda shakhsiyaadka, isla markaana aan loo tafsiirin si balaadhan si ay faragelin aan loo baahnayn ugu noqoto xoriyadda rayiga ama ay ka hortagto daabacaadda danta caamka ah.

6. Waxa masuuliyadi ka saaran tahay tafatirayaasha iyo baahiyayaasha in ay u adeegsadaan Xeerka waxyaabaha la tafatirayo ha daabacnaadeen ama ha noqdeen qaar laga heli karo mareegaha iyo mida la baahiyaba. Waa in ay ka taxadaraan oo ay hubiyaan in si adag ay u dhawraan dadka saxaafada wax ku daabaca, oo ay ku jiraan kuwa aan saxafiyiinta ahayni.

7. Xeerkani waxa uu aqoonsan yahay baahiyaadka gaarka ah ee dumarka, dadka laxaadka la' xiliga doorashooyinka iyo dumarka saxafiyiinta ahba, waxa uu waydiisanayaa saraakiisha goobaha codbixinta, saraakiisha dawlada, saraakiisha xisbiyadda iyo saxaafadu guud ahaanwaa in ay ka qayb qaataan hubiyaana in arrimaha dumarka si dhamays tiran loo baahiyo lana tixgasho sharafta iyo ixtiraamka dumarka saxafiyiinta ah in ay hawshooda fushadaan.

8. Si loo buuxiyo doorka saxaafada, ee ah in ay ilaaliso qaranka, waxa uu ka dalbanayaa saraakiisha doorashada in aanay saxafiyiinta is hortaagin isla markaana tixgeliyaan hubinta habsami u socodka doorashada.

9. Taas bedelkeeda saxaafada waxa laga doonayaa in ay ula dhaqanto dhamaan xogaha xisbiyada siyaasada dhexdhexaadnimo waxa na ay ka rajaynasaaa xukuumadda in ay ku baahiyaan xogtooda saxaafadda dawladda iyo mida gaa rka loo leeyahayba.

10. Xukuumaddu waa in ay ula dhaqantaa sa xaaf adda da wladda iyo ta madaxa banana si siman, oo ay hagayso ahmiyadda koowaad ee a h in bulshadu hesho xog sugan. Taas bedelkeeda saxaafada waxa laga doonayaa in ay xisbiyada si siman ula dhaqanto.

**MABAADI'DA GUUD EE XEERKA ANSHAXA EE SAXAAFADDA EE DOORASHADA 2017KA:**

1. Baahinta saxaafadda wanaagsan waxa haga mihnad aqoosan ama garawsan ahmiyadda muhimka ah ee ay bulshada u hayo iyada oo xaq bulshadu ugu leedahay in ay hesho xog sugan oo ka tarjumaysa xaqiiqda oo sax ah si ay u qaadato go'aan xog-ogaalnimo ku dhisan.

2. Saxaafadda wanaagsani waa mid dheeli-tiran, iskuna miisaanta afkaarta iska soo horjeedda si ay u dheellitirto doodaha xisbiyada iyo shakhsiyaadka. Habkaasi waxa uu dhawrayaa xaqa uu qofku u leeyahay in uu helo xog run ah.

3. Baahinta saxaafadda wanaagsani waxa ay masuuliyad iska saartaa in ay ka dheeraato in ay bulshada fidno kala dhex-dhigto, mana tebiso war been abuur ah, ama nacayb ka buuxo ama hadal deel-qaaf a h.

4. Haddii barnaamij tebintiisa cidi iibsato, bulshadu waxa ay xaq u leedahay in ay ogaato aqoonsiga qofka, xisbiga ama masuulka bixiyay lacagta barnaamijka.

5. Saxaafaddu waa in ay u dhaqantaa si masuuliyadi ku dheehan tahay iyaga oo tebinaysa xaqiiqda isla markaana ka dhawrsanaysa in ay qaataan war marin habaabin samaynaya, kuwaas oo ay ku jiraan sawiro, ama haddalo deel-qaaf ah, faalo aan sax ahayn oo ka dhan ah shakhsiyaad ama xisbi.

6. Qof kastaaba waxa uu xaq u leeyahay in loo dhawro noloshiisa gaarka ah iyo nolosha qoyskiisa ee gaarka ah, gurigiisa, caafimaadkiisa iyo isgaadhsiintiisa. Baahintu waa in ay sababayn kartaa ku-xadgudubka lagu sameeyay nolosha gaarka ah ee qofka isaga oon ogolaansho laga helin.

7. Saxafiyiintu waxa ay masuuliyadni ka saaran tahay in ay baahiyaan baahiyaadka gaarka ah ee dumarka, dadka laxaadka Ia', da' yarta iyo dadka laga tirada badan yahay iyo in ay arrintaasi u soo bandhigaan hab dheeli tiran.

8. Saxaafaddu waa in ay ka fogaataa in qofka loo aaneeyo qabiilkiisa, jinsigiisa ama xanuun maskaxiyan ah oo kale ama xaalad naafanimo.

9. Saxafiyiinta iyo sawir qaadayaashu waa in ay raacaan shuruucda xuquuqda sawirka iyo hab-raacyadooda.

10. Saxafiyiinta waxa uu waajib ka saaran yahay in ay warka ku saabsan geedi-socodka doorashada iyo ku dhawaaqista doorashada ay qaataan oo kaliya Komishanka Doorashooyinka ee Qaranka.

11. Xogta aan saxda ahayn, marin habaabinta, ama qaladaadka waxa ay u baahan yihiin in Ia aqoonsado, sixitaanka xogta Ia baahiyay/daabacay waa in loo sameeyaa sida ugu dhakhsaha badan si looga ilaaliyo bulshadda in ay gaadhaan warbixin qaldani.

12. Waa in fursad caddaalad ah Ia siiyaa jawaab celinta xogta qaldan ee ay bixinayaan shakhsiyaad ama xisbiyo marka si macquula looga dalbado waana in Ia siiyaa waqti iyo mug (space) ku filan. Mar kasta oo hay'ad war-baahineed cid dhibane ahi ka dalbato, hay'ada war-baahineedna garawsato.

13. Saxaafadu waa in aanay qaybin xog kasta oo dhaawacaysa sirta gaarka ah ee qofka, ama sumcadooda iyo sharaftooda dhaawacaysa

14. Saxaafaddu waa in ay ka dheeraataa baahinta xog ku xad-gudbaysa dhawrsanaanta Diinta lslaamka.

15. Saxaafaddu waa in ay ka taxadartaa in aanay baahin xog dhaawacaysa amniga qaranka. lyada oo taas laga duulayo, saxaafadu waa in aanay baahin natiijooyinka aan rasmiga ahayn, mala-awaalka ah, ama been abuurka ah, si ay u marin habaabiyaan bulshada.

16. Saxaafaddu waa in ay adeegsataa taxadar badan marka ay tebinayso kiisaska ku jira maxkamadaha, ee aan wali Ia go'aamin, si ay uga taxadaraan in ay dhaawacaan geeddi-socodka dhagaysiga maxkamadda. Balse taasi looma tafsiiri doone in ay xakamaynayso xaqa ay saxaafaddu u leedahay in ay ka warbixiyaan dhagaysiga maxkamadaha.

17. Arrimaha ku lugta leh dhibaato iyo tacsi qof sao gaadhay, waa in waydiimaha iyo habka lao waraysanayaa noqdaa mid naxariisi ku jirto oo dhibta Ia dareemi karta dhibanayaasha.

18. Saxaafaddu waa in ay ka qayb gashaa nidaamka wacyigelinta bulshada si ay codbixiyayaashu u helaan go'aan xog-ogaalnimo ku dhisan oo ay ugu codeeyaan murashaxa ay rabaan.

19. Wariyayaashu waa in aanay isku dayin in ay warka ku helaan iyada oo isticmaa laya

hab sir ah sida kamaradaha qarsoon ama qa la bka wax lagu dhagaysto.

20. Saxafiyiintu waa in aanay u dabaal-degin natiijada doorashooyink a. Waa in ay u tabiyaan hab xaqiiqo ku dhisan kana taxadaraan in ay hoes u dhigaan (yaraystaan) xisbiyadda aan guulaysan hab wax u dhimi kara nabadda iyo amniga dalka.

**XUQUUQDA IYO RABITAANKA SAXAAFADDA EE XILUGADOORASHADDA:**

1. Dhammaan saxaafadda Ia ogolaaday waa in ay galaangal macquul ah u yeelan karaan habraaca doorashadda iyo ka-qayb galayaasheeda, kuwaas oo ay ku jiraan maamulayaasha doorashada, goobaha doorashada, murashixiinta iyo cod-bixiyayaasha.

2. Waxa lagama maarmaan ah in saxaafaddu galaangal u yeelato xogta dawladda.

3. Saxaafaddu waa in ay awooddaa in ay warbixinteeda iyo daraasadeeda ku samayso deegaan ka bad-qaba cabsi-gelin iyo aargoosi.

4. Saxaafaddu waa in ay xor u noqotaa in ay daboosho kana warbixiso dhacdooyinka doorashadda iyo doorashadda ka dib hab ku dhisan xaqiiqo iyo sugid.

5. Saxaafaddu waxa ay xor u tahay in ay abaabusho barnaamijyada iyo doodaha Ia xidhiidha doorashooyinka.

6. Saxaafaddu waa in ay awoodaa in ay si xor ah dalka u tagi karto si ay ula socoto ololaha doorashooyinka ee Xisbiyadda qaranka ama murashixiinta una eegto sida maamulka doorashooyinku uu uga shaqaynayo goobaha doorashooyinka;

7. Dhamaan saxaafada waa in leola dhaqmaa si isku mid ah, ha noqoto saxaafada gaarka lao leeyahay ama ta dawladda. Tani waxa ay khuseysaa galaan-galka ay u Leeyihiin xisbiyada siyaasada, murashixiinta, goobaha doorashada iyo xogta.

8. Maamulka dawladda, xisbiyadda siyaasadda iyo ciddii kale ee ay khuseysaa waa in ay ka waantoobaa n in ay faro-geliyaan arrimaha saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee saxaafadda iyaga oo ujeedadoodu tahay in ay saameeyaan doorashooyinka ay waddaan KDQ.

9. Si loola dagaalamo wurarka been abuurka ah, natiijada doorashada waa in Ia soo saaraa waqti ku haboon lana siiyaa dhamaan saxafiyiinta si looga hortago natiijooyinka ma la-awaalka ah.

10. Saxaafadda ajaanibka ah ee ka hawl-gelaysa Somaliland waxa ay leedahay baahin balaadhan oo muhim ah, iyo dhagaystayaal waxana ay saamayn kartaa cod-bixiyayaasha . Sababtaasi awgeed, adeegyadaasi waa in lagu dhiirigeliyaa in ay ka warbixiyaan ololaha doorashada ee Somaliland hab qoto dheer leh, iyaga oo tixgelinaya xeerarkooda anshaxa ee ku saabsan tebinta doorashooyinka iyo xeerkan hab-dhaqan ee Somaliland.

11. Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxa lagu dhiirigelinayaa in ay Ia socdaan

tebinta warbaahinta ee doorashooyinka ee saxaafadda dibadda iyo in ay sameeyaan hab lagula shaqayn karo oo lagu xaliyo cabashooyinka. Si looga taxadiro wararka ku- tiri-kuteenka ah ee ku saabsan natiijooyinka doorashooyinka, iyada oo Ia raacayo Shuruucda Somaliland ee Doorashooyinka, saxaafada waa in Ia siiyaa natiijada hordhaca ah, ee heer qaran oo ay siiyaan Komishanka Doorashooyinku.

**MASUULIYAADKA SAXAAFADDA WAQTIGA CODBIXINTA IYO MUDDADA KA HOREYSA:**

**Saxafiyiinta Somaliland waxa ay dhaqangelin doonaan Qodobada Xeerkan Anshaxa ee soo socda waqtiga doorashadda ka horeysa, waqtiga doorashadda iyo doorashadda ka dib:**

**Saxaafaddu waxa ay balan qaadaysaa:**

1. In ay tabiso ololaha doorashada, muddada codaynta iyo doorasada ka dib una tebiso hab cadaaladi ah, dheeli tiran isla markaana dhexdhexaad ah, kana madhan buun-buunin iyo u xaglin cid gaar ah.

2. In ay hubiso in warku dheeli-tirnaado noqdo dhexdhexaad isla markaana ku salaysnaado xaqiiqda markaa taagan, ee ku jira waraysiyadda iyo doodaha kuwaas oo saamayn ku keeni kara maanhagaha (attitude) cod-bixiyayaasha.

3. In ay ka digtoonaadaan in ay siiyaan tabin dheeraad ah ama xad-dhaaf ah xisbiyadda ama murashixiinta qaarkood ama muxaafidka ha noqdaan ama mucaaridka ba.

4. In aanay bixin farriimo doorasho oo dhinac u xaglinaya muddada doorashada, gaar ahaana, maalinta ka horaysa cod-bixinta, si loogu ogolaado codbixiyayaashu in ay go'aankooda ku gaadhaan iyaga oon cadaadis saarnayn.

5. lnta suurto-gal ah, in ay si toos ah usoo tebiyaan aragtida murashixiiinta iyo xisbiyada siyaasiga ah iyaga oo hadalkooda sidiisa usoo daynaya, oo aanay soo dayn iyaga oo Ia jar-jaray, si loo marin habaabiyo bulshadda ama iyaga oo qof kale sharaxayo. Haddii aanu hadalku xanbaarsanayn deel-qaaf, nacayb, iyo kicin dadweyne, oo wax u dhimi karta amniga iyo xasiloonida dalka.

6. In ay damaanad qaadaan xaqa murashaxu ama xisbiga siyaasiga ahi u leeyahay in uu si deg-deg ah u jawaab-celiyo, haddii sidaa loo baahdo, si xuquuqdaasi loo isticmaali karo muddada lagu jiro ololaha doorashada.

7. In uu hubiyo in xogta warku tahay mid xaqiiqo ahaan sugan, dhamays tiran, nuxur ahaan khuseysa isla markaana waaqaca ku dhisan.

8. In ay isticmaalaan erayo dhexdhexaad ah oon dhinacna u xaglinayn, tabinta warbixinaha doorashaduna noqdaan qaar aan ku dhisnayn caaddifad iyo laab-la-kac kana taxadir o erayada farsammo iyo tira-koobka isla markaana hubiyo in ciwaanka warku ka ta rjumayo xaqiiqada iyo xogta gudaha ee warku xanbaarsan yahay.

9. In ay ka dheeraadaan in uu kiciyo/huriyo dareenka caadifadaysan ee arrimaha lagu

muransan yahay isaga oo arrimahaasi si caadifadaysan u gudbinaya.

10. In kala saara aragtida iyo fasiraada qofka, kuna koobo aragtida iyo faaladda tafatiraha qa ybta tafatiraha iyo bogga rayiga iyo barnaamijyadda.

11. In uu wi xii x ay aysiis ah si cad u muujiyo isla markaana aanu ku dhex darin warka isla markaana hubiyo in baahinta dacaayaddu waafaqsan tahay Xeerka Anshaxa ee Saxaafadda ee ay w ada qaateen Saxaafadda iyo Kamishanku Daarashadu.

12. Saxafiyiinta waxa waajib ku ah in ay isbaraan qafka daacadna ka naqdaan kana caddaalad sameeyaan habka warka ay ku helayaan, u tabinayaan iya qaabka ay usaa gudbinayaan.

13. In ilaha warka daorashaayinka ku kaabnaada ilaha rasmiga ah ee Kamishanka Daarashaayinku masuulka ka yihiin.

14. In ay aanay wax ka bedelin sawirada iya muuqaalada si ay bulshada u marin habaabiyaan.

15. In aanay ka qaadan wax saamaynaya shaqadiisa qaf siyaasi ah ama murashax.

16. In aanay qadarka laga qaadaya dacaayada kala duwin aa midna aanay qiime jaban siin (qiime dhimis) midna u diidin.

17. Saxaafada waxa ka reeban gabi ahaanba in ay rayiga bulshada qaada maadaama aa aanay lahayn xirafadii iya awaadii aqaaneed ee habka lao ururiya rayiga bulshada, isla markaana aanu shacabku u bislayn.

18. Saxafiyiinta iya saxaafadu waa in aanay ka har dhicin natiijada daarashada isla markaana aanay ka saa xigan natiijadda cid kale aan ahayn Guddida Daarashaayinka Qaranka, taas aa abuuri karta xasilaani darra iya kalsaani darra.

19. Saxaafadu waa in aanay saa gudbin shirarka jaaraa'id e shaqsi lagu aflagaadaynaya ee bulshada dhexdeeda ka abuuraya nacayb sida qabyalada, cayda shakhsiga ah.

20. Muddada doorashada saaxafadu waa in aanay gudbin wararka cidi u yeedhisa ama dana dhaqaale ha dhaafsadan ama dan qabiil ha dhafsadan waxaana waajib ah in warka saxafigu gudbinaya naqda mid si xar ah aa madax banaan uu ku helay kuna dhisan xaqiiq isla markaana waafaqsan anshax wanaagsan iya akhlaaqda suuban, ee mihnadda saxaafada laga daanaya, waana in uu warkaasi naqda mid bulshada wax taraya aa aan dhibi ku jirin.

**MASUULIYADDA WARBAAHINTA DAWLADDA**

1. lyada aa Ia tixraacaya Wareegtada Madaxweynaha Jamhuuriyada Samaliland ee Tixraaceedu yahay JSL/M/WM/222-5061/092017 ee 30/09/2017, iya Qadabka 26aad 26aad ee Xeerka Daarashada Galaha Wakiilada (Xeer Lr. 20-2/2005} Warbaahinta Dawladda sida Raadyaw Hargaysa, TVga qaranka, iya jaraa'idka dawladu gacanta ku haysaa, xisbiyadda qaranku waa u siman yihiin, waana in ay

siiyaan bed, iyo waqti is-leeg alalaha xisbiyadda siyaasadda ee rasmiga ah;

2. Komishanka Doorashooyinka Qaranku isaga oo arrintaasi kala tashanaya Wasiirka Wasaaradda arfaafinta iyo Wacyigelinta, iyo xisbiyadda waxa uu dajin doonaa shaxda muddaysan ee loo qoondeeyay sii deynta ololayaasha xisbiyadda qaranka ee kaltanka wararka iyo barnaamijyadda, shaxdaasi waa qayb muhim ah oo ka mid ah Xeerkan Hab-dhaqan;

3. Shaxda muddaysan ee loo qoondeeyay sii deynta ololayaasha xisbiyadda qaranka, waxa Komishanka Qaranku soo saari doonaa ugu yaraan 7 (todoba) cisho ka hor bilawga ololaha doora shada ee Xisbiyadda Qaranka.

4. Guddida llaalinta Xeerka Hab-dhaqan saxaafaddu waxa ay si maalinle ah ula socon doonaa n barnaamijyadda laga sii daayo Raadyow Hargeysa, TVga Qaranka iyo jaraa'idka dawlada si ay u hubiyaan in ay si dhexdhexaad ah, oo dheelitiran xisbiyadduna u siman yihiin usoo dayaan barnaajiyadooda, waxaanay warbixintooda siin doonaan KDQ;

**GUDDIDA ILAALINTA XEERKA HAB-DHAQANKA SAXAAFADDA:**

1. Saxeexayaasha Xeerkan Hab-dhaqan waxa ay isku raaceen in Ia abuuro Guddida llaalinta Xeerka Hab-dhaqanka Saxaafadda ee Muddada Doorashada Madaxtooyada 2017, si loo dhaqa ngesho Xeerkan Hab-dhaqan ee saxaafadda, loona abuuro guddi kormeerta si loo hubiyo fulintiisa loona gudbiyo bulshada iyo dhinacyaddaba in ay raacaan.

2. Guddida llaa linta Xeerka Hab-dhaqanka Saxaafadu waxa ay ka kooban tahay 7 xubnood, oo ah aqoonyahano reer Somaliland oo ka kala iman doona:

a) Laba wakiil oo ay soo magacaabaan Ururka Saxafiyiinta ee SOLJA;
b) Laba wakiil oo uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Warfaafintu;
c) Hal wakiil oo ka socda ururka Saxafiyiinta Dumarka ee WIJA;
d) Laba xubnood oo uu Komishanku ka soo magacaabo qareenadda iyo aqoonyahanka dalka;

3. Komishanku marka uu helo magacaabista xubnaha sare ku xusan, isla markaana hubiyo in ay yihiin dad ku sifoobay dhex-dhexaadnimo, oo buuxiyay shuruudaha u dejisan, waxa uu si rasmi ah u shaacin doonaa magacaabista Guddida.

4. Haddii xubin Guddida loo magacaabay uu Komishanku ku qanci waayo, iyaga oo sababaynaya waxa uu ka dalban doonaa cidda soo magacooday in ay sida ugu dhakhsaha badan usoo bedelato, isla markaana waafaqdo shuruudaha u yaala.

5. Xubnaha Guddida llaalinta Xeerka Hab-dhaqanka Saxaafaddu waa in ay ku sifoobaan dhex-dhexaadnimo, daacadnimo, hufnaan, isla markaana waa in aanay xubin firfircoon ka ahayn xisbiyada tartamaya;

6. Xubnaha Guddidu waa in aanay noqon mulkiilayaasha rugaha saxaafada, iyo tafatirayaashooda isla markaana waa in aanay xil ka haynin hay'adaha warbaahineed ee ay ka tirsan yihiin mid dawladeed iyo mid madax banaan ba ..

7. Xubnaha Guddidu waxa ay iska dhex dooran doonaan Guddoomiye, Guddomiye ku-xigeen iyo Xoghaye;

8. Xubnaha Guddidu waxa ay noqon doonaan shakhsiyaad dhexdhexaad ah, khibrad leh si ay u hubiyaan in Xeerka Anshaxa Ia fuliyo cabashooyinka Ia baadho una daabacaan natiijadooda.

9. Guddidu waxa ay iskood u kuurgeli doonaan qaabka ay u shaqayso saxaafada dawladda iyo mida gaarka loo leeyahay ba waqtiga doorashada waxana ay warbixinta gungaadhkooda siin doonaan Komishanka Doorashooyinka todobaad kasta hal mar, ama kolba sida loogu baahdo inta uu socdo ololaha doorashadu.

10. Guddidu waxa ay si joogto ah xog ku saabsan sida dhinacyadu ugu dhaqmeen Xeerka Anshaxa u siin doontaa Komishanka Doorashooyinka.

11. Guddidu waxa ay yeelandoontaa xafiis ay hawshooda iyo kulamadooda ku qabsadaan, isla markaana u saamaxaya xil-gudashadooda;

12. Guddidu waxa ay kulmi doonaan doorashada ka hor iyo doorashada ka dib si ay u hubiyaan in kormeerkoodu u noqdo mid dheeli tiran oo dhexdhexaad ah si loo wanaajiyo xidhiidhka u dhaxeeya, dawlada, saxaafadda iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo in ay tallo-bixin siiyaan.

13. Guddidu waxa ay talo-bixin ka gaysan doonaan habka loo suurtogelin karo doodaha khuseeya in si firfircoon loo adeegsado Xeerka Saxaafadda, Xeerkan Anshaxa taas oo ay ku jiraan qodobada baahinta khuseeya.

14. Guddidu waxa ay talo-bixin ka gaysan doonaan qaabka loo xakamaynayo war-baahinta xisbiyadda u gaarka ah, sida bogooda internetka iyo warbaahinta bulshada (social media), muddada ololaha doorashda iyo ku-dhawaaqista natiijadda doorashda.

15. Saxafiga ama rugta saxaafadeed ee ku gefta qodobada Xeerkan, waxa ay guddidu ka dalban doontaa in ay iskood u saxaan,

16. Guddidu waxa ay soo saari doontaa bulshadana usoo bandhigi doontaa warbixinta todobaad leh ah, oo ku saabsan sida saxaafadu ugu dhaqantay Xeerkan Anshaxa muddada doorashooyinka, iyaga oo magac dhabi kara saxaafada ama rugaha saxaafadeed ee ku gafa Xeerka Anshaxa.

17. cid kasta oo ku gefka Qodobadda Xeerkan Anshaxa, isna sixi wayda marka sidaa ay ka dalbado cida ka cabanaysa ama Guddidu, talaabadda ku haboon ee laga qaadayo waxa loo raaci doonaa Xeerka Saxaafadda (Xeer Lr. 27/2004), iyo xeerarka kale ee dhaqan galka ah.

**XUBNAHA MATALAYA SAXEEXAYAASHA XEERKANI WAXA AY SAXEEXEEN MAANTA 00 AY TAARIIKHDU TAHAY 16/10/2017.**

**KOMISHANKA DOORASHOOYINKA JSl:**
**ENG. ABDIQAADIR IIMAAN WARSAME**
**GUDDOOMIYAHA KOMISHANKA OOORASHOOYINKA QARANKA EE JSl**

**WASAARADDA WARFAAFINTA IYO WACYIGELINTA:**
**CISMAAN C/LAAHI SAXARDIID "CADAANI"**
**WASIIRKA WASAARADAD WARFAAFINTA IYO WACYIGELINTA**

**URURKA SAXAFIYIINTA EE SOLJA:**
**MAXAMUUD CABDI JAAMAC**
**GUDDOOMIYAHA URURKA SAXAFIYIINTA EE SOLJA**

**URURKA SAXAFIYIINTA EE WIJA:**
**YAASMIIN AXMED YUUSUF**
**GUDDOOMIYAHA URURKA SAXAFIYIINTA EE WIJA**